
# EREYGA ILAAH WELIGII WAA RUN



# Ereyga Ilaah Weligii Waa Run

MERF Ethiopia
grace_trth@yahoo.com
www.somalforchrist.com

**Axdiyadii Ilaah la dhigtay Ibraahim.**

In badan ka dib daadkii, dadku waxay samaeysteen qorshe.

"Waxaaan dhisi doonaa caasimad weyn oo leh Munaarad dheer oo xagga sare samada," waxay yidhaahdeen "aannu wada noolaanno kol walba." Qof walbana wuxuu ku hadli jiray luqad keliya oo isku mid ah.Ilaaha wuxuu doonayey dadka iney ku wada noolaadaan dunidan uu Isaga sameeyey. Haddaba wuxuu u sameeyey wax gaar. Durbadiiba wuxuu siiyey luqado cusub.

Dadkii oo idil ee ku hadlayay luqadda keliya waa laga masaxaya. Laga yaabee dadkii iney kala cabsadeen maaadaama ay is-fahmi kareyn. Midaasoo Ilaahay dadkii garansiiyey luqado kala duwan. Caasimaddii ay ka kala tageen waxaa loogu yeedhi jiray Babel oo la micne ahayd Jahwareer.

Sanado badan ka dibna waxaa loogu yeedhi jiray meeshaa Ur tii Kaldees, Ilaah wuxuu la hadalay nin la odhan jiray Abram. "ka tag waddankan," buu Ilaah ku amray. "Oo aad dhulkaan ku tusi doonno"

Wuu adeecay Abram, Ilaahna wuxuu ku hoggaamiyey Kancaan. Xaaskiisii iyo wiil uu adeer u haa Luut ayaa raacay. Kanaan kolkii ay tageen, Abram iyo Luut hanti badan bay yeesheen oo wey hodmeen. Qowsaaaradii Luut iyo Xoola jiradii Abram ayaa murmay daaqsiintii. "Yeysan dhicin rabsahad," Buu yidhi Abram. Waynu kala guureynaa. Luut buu dooransiiyey fursad ah inuu qaato dhulkuu doonno."

Luutna wuxuu adan qaatay deegaan siman oo ku wanaagsanaa daaqsiinta oo caws baaxad lehna leh una dhaw caasimado iyo tuulooyin. Una muuqda meel wanaagsan. Laakiinse caasimadaha waa meelo fusuq badan. Luut markii uu ka guuray meeshii, Abram

Ilaah baa la hadlay. “Waxaan ku siin doonaa dhulka Kancaan oo idil adiga iyo faracaadaba weligood.” Abram iyo Sahraba caruur ma aysan lahayn. Sidee buu Ilaah haddaba .ku dhawri karaa Axdigan weyn Saddex nin baa uga yimid xaggga Ilaah Abram iyo Sahra. “Ilmo ayaa dhali doonta mar dhaw,” Ayey ku yihddhdeen Sahra. Sahra ayaa qosashay. Maysanna farriinta Ilaah. Da’deedana waxay ahayd sagaashan jir. Ilaahna Abram wuxuu u sheegay in loogu yeedhi doonno Abraham   Weliba Ilaah Abraham wuxuu u sheegay inuu Isaga waa Ilaahe’ uu baabi’in doono labadan caasmadoo ee aadka u xun ee Sodom iyo Gomorah. Wiilkii uu Araham adeerka u ahaa ee Luut iyo reerkiisi ba waxay ku noolaayeen Sodom.

Luut wuxuu rumeysnaa inuu Ilaah ka dhabeynayo ballantiisa kolkay timaado, laakiinse raggii qabay gabdhihiisa wey diideen iney ka tagaan Sodom. Bal eega Masiibadaa! Ma aysan Ereyga Ilaah.

Waxaa ka baxsaday oo keliya Luut iyo labadiis hablood. Dab iyo dhagxaan ololaya ayaa ku soo dul daaday caasimadihii fusuqaysnaa.

Waxaa muruga leh, Marwadii Luut iney adeeci weydayey digniintii oo ay dib u eegtay iyada oo sii ordeysa. Waxay isu bedeshay oo ay noqotay tiir cusba ah oo taagan. Ilaah wuxuu dhawray ballamadiisii uu la galay Abraham iyo Sahra. Waxay dhaleen ilmo iyagoo da’ ah, sidii ay ahayd ballantii Ilaah. Maad qiyaasi kartaaa farxadoodii sida ay ahayd!

Laga yaabe inuu Abraham weliba inuu ka fakiryey ballantiisii ahayd inuu faraca ubadkiis siin doono dhulkii Kancaan weligood. Ilaah wuu karaa oo awoodaa sideedaba inuu dhawro ballanta. Marwalba Ilaah wuu dhawraa ballamaha.
*(Bilowgii 11-21)*

## Ilaah wuu tijaabiyey jacaylka Abraham

Habeen buu Ilaah amar yaab leh siiyey Abraham. Waxaana lagu tijaabiyey in la eego inuu wiilkiisa ka jecel yahay in ka badan Ilaah.“Kaxee wiilkaaga Isaaq, oo iigu bixi sidii Allabari guban,” Ilaah baa sidaa ku amray. Sadaqee Isaaq? Ilaah dartii u gowrac wiilkaaga? Taasi aad bay ugu adkaatay Abraham. Aad buu u jeclaa inankiisa. Laakiinse Abraham wuxuu bartay oo uu yaqaanay rumeysadka Ilaah xitaa haddii uusan fahmayn micno. Aroortiiba wuu isdiyaarshay oo buurtii waaqdhaaca ayuu kaxeeyey wiilkisii Isaaq iyada oo ay la socdaan lab aka mid ah shaqaalihiisii. Intii uu ambabaxin, Abraham xaabadiisii buu jarjartay si uu dabka waaqdhaaca Allabariga ugu samaysto. Qorshaha Abrahamna wuxuu ahaa adeecidda Ilaah.

Saddex cisho ka dib bay ag-tageen buurtii. “Jooga halkan” buu ku yidhi shaqaalihiisii. “Waannu soo cibaadeysanaynaa, oo waannu idinku soo noqoneynaa” Isaaq xaabadii buu qaaday; Abrahamna qorigii dabka iyo Mindidii buu qaaday. “Aaway wankii Allabariga la gubo loo bixin lahaa?” Isaaq baa weyddiiyey. “Ilaah qudhiisa ayaa keeni doona wanka” buu ugu jawaabay Abrahmna. Labadoodiiba waxay yimaaadeen bartii uu Ilaah u doortay hawshan. Halkaa, Abraham wuxuu ka dhistay meeshii Allabariga oo wuxuu diyaarsaday qoryihii lagu gubi lahaa Allabariga Ilaah hortiisa. Abraham wuxuu dhistay meelo badan oo allabariyo. Runtii middan waa middii ugu adkayd. Abraham wuxuu ku dul xidhay wiilkiisii uu jecla meeshii Allabariga. Runtii Abraham ma wuxuu doonayaa inuu adeeco Ilaah oo uu gawraco wiilkiis wanaagsanaa ee Isaaq? Haa! Mindidii oo aad u afeysan kor u qaaday. Laga yaabee isaga oo qalbi jabsan, laakiinse Abraham waxa uu granayayey inuu adeeco Ilaah. “JOOJI” Malaa’ktii Rabbiga baa qaylisay sidaa. “Iminka waan

garanayaa inaad Ilaah ka cabsatid. Gacanta ha saarin wiilka, wiilkaaga keliya, oo xaggayga ka yimid."
Lagayaabe Isaaq inuu sidan ku fekeray, "Ilaah baa keenay, sidii kolkii hireba uu Aabahay igu yidhi."

Isla kolkaa ay Aabbaha iyo wiilka wada cibaadeysanayee, Malaa'iktii Rabbiga ayaa la hadashay Abraham. "Caruurta farcankaaga ayay dunida oo dhan ku barkadoobi doonaan, sabatoo ah adigu waad adeecadnimadad awgeed" maalin unbaa, Ciise ka dhalan doonay farcankii caruurta Abraham.

Aqalkoodii bay ku soo noqdeen Abraham iyo Isaaq. Wakhti yar ka dib, nasiib darro waxaa geeriyootay Sahra. Abraham xaaskiisii buu waayay, oo Isaaqna hooyadii buu waayey.
Xilligii dugtii/Aaskii ka dib, Abraham taliyihii shaqaalihiisa ayuu u diray raadiyo gabadh uu guursado Isaaq. Shaqaalihiina wuxuu uga doonay oo uu aaday deegaankoodii hore inuu gabadh uga soo helo qaraabadii Abraham dhexdooda.

Shaqaalihii Ilaah buu weyddiistay calaamad. "Bal eeg gabadha geeleyga waraabisa weeye midda ku haboon inuu Isaaq" Durbadiiba Rebeqa ayaa biyo siisay. Waxayna ka mid ahayd ehelldii iyo qaraabadii Abraham. Midddinkii wuu gartay Ilaah inuu u aqbalay baryadiisii.
Rebeqa wey ka tagatay reerkoodii oo Isaaq baa guursaday. Weyna raalligelisay Isaaq ka dib geeridii hooyadii. Aad buuna u jeclaa iayada!
*(Bilowgii 22-24)*

## Khiyaanoolihii Yacquub ahaa

Ilaah ilmo yar ma u soo diray qoyskaaga? Waa farxad xad dhaaf ah! Isaaq iyo Rebeqa farxad laba jibaaran bay heleen. Ilaah baa siiyey mataano.

Caruurtii uurkii Rebeqa ayay isku rixriixeen. Kolkii ay bariday, ayuu Ilaah ku yidhi iyada, labada wiil midkood baa xoog badnaan doona ka kale. Sida caadada ay tahay kan ugu soo hor baxo ayaa ah ka weyn. Ugu dambayntii wey dhasheen caruurtii. Mataanihii isuma aysan ekeyn. kii weynaa, xaad badan buu lahaa oo aad buu u koray, wuxuuna ahaa duurgal ugaadhssigana aad u yaqaano. Jacquubse wuxuu ahaa nin aamusan nin jeclaa inuu ka shaqeeyo xaafadda agagaarkeeda. Maalin buu, Ceesow baahday. "Cunta i sii," ayuu ku yidhi Yacquub. "Iga iibi curadnimada" buu weydiiyey Yacquub. Ceesow ma uusan ilaaineyn ballamadii Ilaah ee ahaa dhowridaa curadnimada. Hesshiis buu galay. Iminka Yacquub baa reerka u qabanayo hoggaanka ka dib markii uu dhinto Aabbahooda.m Habeenn buu Ilaah la hadlay Isaaq. "Waxaan ahay Ilaaha Aabbahaa Abraham. Waan kula jiri doonaa. Caruurtaadana waan barakadeyn doonaa" Inkasta oo Isaaq Ilaah caabudi jiray, wiilkiisa Ceesow laba haween buu guursaday oo ahaa reer Hittites, dad aan Ilaah garanaynin. Isaaq wuu gabooba. "Fadlan ii keen hilib." Ayuu ku yidhi Ceesow. "Dabdeed waan ku barakadeyn doonaaa" Barakadeyntan gaarka u ah curadka reerka Aabuhu siinayo wiilkiisa ugu weyn. Ceesow durbadiiba wuxuu u cararary ugaadhsi. Laakiin Rebeqa ayaa ka horreysay. Oo waxay dooneysay in Yacquub barakada helo.Rebeqa qorshe kale bay wadatay. Isla kolkii bay degdeg u karisy raashinkii uu jeclaa Isaaq, Yacquub bay u soo labistay dharkii Ceesow, oo dhogrtii haragii ugaadha ayay gacmaha iyo qoorta ugu soo xidhay. Isaaq aad ma uusan wax u arkayn. Yacquub cuntadii buu u keenay Isaaq."Codkaada wuxuu u egyahay

Yacquub." Buu yidhi Isaaq "Laakiinse gacantaadase wxay u egtahay Ceesow."  Ka dib markii uu cunay cunnadii, Isaaq wuxuu barakadeeyey wiilkii ku jilba joogsnaaa hortiisa. Kolkii uu Yacquub ka tagay, Isaaq waxaa u yimid Ceesow. "Waatan cuntadadaadii" ayuu yidhi. Waa la khiyanay. "Ma badeli karo barkada" ayuu odygii ku ooyay. Ceesow qalbigiisa waxaa ka buuxsamay nacayb. Wuxuuna go'aansaday inuu dilo Yacquub. Rebeqa waxay maqashay hanjaabaaddii Ceesow. "Aad caqalka Abtigaa" ayay ku tidhi Yacquub Ilaa uu ka iloobayo walaaalkaa wixii ku dhacay. Isaaqna wuxuu ku raacay xaaskiisii  in Yacquub ka doonto gabadh uu guursado reer Abtigii. Sidaas buuna Yacquu reerka uga tagay. Habeenkaa, Yacquub wuxuu ku seexday barkin dhagax ah. laga yaabe inuu keligii ahaa, laga yaabee inuu cabsanayay. Laakiinse keligii ma uusan ahayn. Ilaah baa kula hadlau Riyo manaam ah oo aad cajiib u ah.
"WAXAAN AHAY RABBIGA AABBAYAASHAADA, ABRAHAM IYO ISAAQ. WAAN KULA JIRAA. WAXAAN KU SIIN DOONAA DHULKAN. ADIGA IYO QOYSKAAGA OO IDIL DADKA DHULKAN OO IDIDLNA WAA LAGU BAKADEEYEY." Deedan ka dib markii Rabbiga la hadlay, Yacquub hurdadaii buu toosay. Isaga oo baqanaya. Yacquub Abtigii Laabaan baa soo dhaweeyey. Yacquub wuxuu jeclaaday ina abtidii Raaxeel oo toddoba sanadood ayuu u shaqeeyey Abtigii si uu iayda u guursado. Laakiinse habeenkii caqal galka arooska ayuu abtigii khiyaanay Yacquub. Tani waa Lee'ah, ma aha Raaxeel. Yacquub baa ku calaalay. "Waad i khiyaantay" "Hablaha hadba midd ugu weyn baa kolka hore la guursadaa," Laabaan baa sidaa ku yidhi. "Iminka guurso Raaxeel oo weliba toddoba sanadood oo kale ayaad ii shaqaynaysaaa."Yacquub wuu ogalaaday sidaa. Lagayaabee inuu xusuuustay khiyaanadiisii uu khiyaanay Isaaq iyo Ceesow. Yacquub wuxuu dhalay kow iyo toban carruura. Sanado badam ka dib wuxuu

u xiisay inuu qoyskiisa dib ugu celiyo reerkiisii oo yaalay Kancaaan waalidiintiiisaana halkaa ba joogeen. Laakiinse bal eeg Ceesow baa isna halkaa jooga ooh aa ninkii ku dhaartay inuu dilayo. Ma lagu nabadgelayaa taasi? Maalin buu Rabbiga ku yidhi ku noq reerkiinnii.Yacquub wuxuu isu keenay qoyskiisii iyo xoolahooda si ay ugu ambabaxaan gurigoodii.
Socdaal noocee ah buu ahaa. Ceesow wuxuu kala horyimid afar boqol rag! Wax dhib ahna uma geysan. Wuxuu ku soo orday Yacquub oo laabta ku qaaday ooh ab siiyey walaalkii. Yacquub iyo Ceesow sidaa saaxiibo ku noqdeen mar labaad, YAcquubna sidaa ayuu ku nabadgalay.
Bilowgii 25-33

**Nin Xagga Rabbiga Laga Soo Diray**

Guriga wax lagu caabudo iyadoo lagu jiro maalin ka mid ah maalmaha, ayaa wadaad da'a  ah, oo lagu magacabo Sakairya, oo foox shidayay, .xagga dibaddana dad baa ku tukanayay, kolkiiba si degdeg ah, waxaa gariiray Sakariya.

Malaa'ik baa u timid. "Ha cabsn," bay ku tidhi. Rabbiga ayaa isoo diray. Naagtaada wiil bay dhali doontaa. Waxaana loogu yeedhi doonaa Yooxanaa. Marka uu dhashayaba waxaa ka buuxsami doona Ruuxa Qudduuska. Dad badan buuna Rabbiga u soo jeedin doonaa. "Sakariya ayaa sidaa ku hadlay." Dadkii way fahmi waayeen weyna ku wareereen. Mana aysan ogayn in Jibriil Malaa'iktii iney ku tidhi cidna ha u sheegin ilaa uu ilmaha ka dhalanayo sababta oo ah ma uusan rumeysan farriintaa iney Rabbiga ka timid. Wuxuuna ku fikirayay in naagtissa gabowday oo aysan wax ubad ah aysan dhalin kareynin.

Guriga xagiisii. Sakariya wuxuu u qoray wax alla wixii Malaa'ikta ku tidhi, Elisabet, xaaskiisii, we la yaabtay. Weligoodba Rabbiga ubad bay ka baryi jireen.

Durbadiiba Elisabet waxay garatay iney uur leedahay oo uu ilmo iman doono. Ilaah bay ammaantay. Maalin baa, Elisabet ina adeerteed Maryan soo booqatay. Maryanna waxay sugeysan inay dhasho ilmo.

Kolkii Maryan ay u timid, Elisabet waxay dareentay in ilmaha calloosheeda ku jira uu ku boodboodayo. Elisabet Ruuxa Qudduuska ayaa ka buuxsamay. Waxayna ogaatay in ilmaha Maryan ay caloosha ku siddo uu yahaya Rabbi Ciise Masiixa.si wada jira ah bayna Ilaah ku wada amaaneen...
Ilmihii Elisabet wuu dhashay sidii horey Ilaah kula ballamay.”uguna yeedho Sakariya sidii Aabbihii” Wadaaddadii kale iyo Sakariya waxay xasuusteen amarkii Ilaah. “Maya! Ilmahu magacaciisa waa Yooxanaa” kolkuu Sakariya qorayay Erayadaa, hadal jeedintiisa baa dib ugu soo noqoneysay. Deedna wuxuu amaanay Ilaah.

Yooxanaa markii uu korayay wuxuu u ekaa Elijah, ninkii weynaa IlaahYooxanaa dadka waxa uu u sheegi jiray inuu sida ugu dhakhsaha badan uu u iman doono Masiixa si uu iyaga u barakeeyo. Odayaasha hoggaamiya Yuhuudda wey nebcaayeen Yooxanaa sababta oo ah wuxuu ku odhan jiray “Toobadkeena! Joojiya dembiyada” Iyagu se ma aysan jecleyn inay maqlaan waxyaalaha ku saabsan dembiyadooda.

Dadka qaar waxay ugu yeedhi jireen Yooxanahiii Baatiiska sababta oo ay dadkuu biyaha hoostooda ku quusin jiray oo uu ku tusayo iney iyaga k a xun yihiin dembiyadooda. Maalin baaa Ciise ugu yimid in

la baabtiiso. “Waa inaad i baabtiistaa” Yooxanaa ayaa kaga horyimd. Laakiinse Ciise ayaa ku yidhi “Waa iney saa ahaataa” Yooxanaa baana baabtiisay Isaga. Ka dib markii Ciise la baabtiisay, Yooxanaa wuxuu arkay Ruuxa Qudduuska oo ku soo dul dagaya dusha Ciise sidii wax u eg qooleey. Middani waa calaamad Rabbi. Yooxanaa wuxuu gartay Ciise I uu yhay Wiilkii Ilaah. Yooxanaa wuxuu ugu yeedhay Ciise Wankii Ilaah ee dembiyada ka qaadayay dunida.

Yooxanaa dad badan buu Ilaah ku soo hanuuniyey. Laakiinse Herod, Hoggaaniyihii xumaa, xabsiguu ku tuuray Yooxanaa. “Waa dembi inaad inaad walaalkaa Heradiyos xaaskiisa, iney kuu noqoto naagtaada” Yooxanaa ayaa sidaa ku yidhi. Herod wuxuu ogaa taasi inay run tahay. Wuxuuna ogaa in Yooxanaa yahay Adeege Ilaah, xaq yahay, oo yahay nin qudduus ah. Laakiinse ma uusan dooneynin inuu joojiyo dembiyadiisa. Deedna Yooxanaa ma uusan joojin wacdigiisii ka geeska ahaa dembiga, xitaa haddii ay ula micne tahay in xabsi la dhigo.

Maalintii dhalashadiisa Herod xaflad weyn buu sameeyey. Waxaa u ciyaartay gabdhii uu dhalay. Si ay uga farxiso Herod. “Wax walba oo aad doonto waan ku siin” ayuu kula ballamay. Xitaa qayb ahaan boqrtooyadeeda.

“Maxaan weyddistaa?”gabdhi baa sidaa isku tidhi. Hooyadii sharwalaha ahayd ee Heridiyos, oo necbeyd Yooxanaa, ayaa ku tidhi iyadii waxaa weyddii! Waxeyn ahayd wax aaad u xun!

Saxan iigu keen madaxa Yooxanaa pabtist,” Gabdhiibaa sidaa ku tidhi Herod. , wuxuuna aad uga xumaady ballantii uu la galay, laakiinse wuu burin waayay kibir dartii taa iayda ah.

“Madaxa ka soo gooya oo keena halkan,” ayuu amar ku bixiyey Herod. Askartiisina wey yeeleen.

Nasiib darro saaxiibadii Yooxanaa ayaa aasay intii maydkii addoonkii Ilaah daacadda u ahaa.
*(Markos 6, Luukos 1, 3)*

### Wakhtigii Xumaa ee Ciise

Markii Ciise la baabtiisay, Ilaah baa la hadlay oo yidhi, "Kani waa Wiilkaygii aan jeclaa. Isagu waan ku faraxsahay" Ruuxa Qudduuska ee Ilaah baa ku soo dul dagay sidii qooleey oo kale u eg.
Inyar dabadeed, Ruuxii Qudduuska Ilaah ayaa Ciise ku hoggaamiyey meshii cidlada ahayd. Ciise waa keligii.

Afartan cisho ayuu soomay Ciise. Oo la micne ah inuusan wax habayaraatee cunta ah afka saarin. Aad buu u gaajooday
.
Kitaabka Qudduuska ayaa sheegay in bahalo dugaagta duurka ay meeshaa jooogeen.
Shayddaankii baa u yimid si uu jarribo Ciise. Wakhtigii bilowgiina, wuxuu jarribay aadan iyo Xaawo iney Ilaah ku addeeci waayeen beerta Eden.
Shayddaankii xitaa wuxuu isku dayayaa inuu jarribo, Wilkii Ilaah, Ciise.
Haddii aad ahaan lahayd Wiilka Ilaah" oo Shayddaanka ku yidhaado, "Dhagaxan u bedel Kibis" wuuna ogaa inuu Ciise gaajoonayo. Wuuna ogaa inuu Wiilka Ilaah inuu dhagaxa u bedeli karo Roodhi. Miyuu Ciise ka yeelay Sheyddanka?
Maya! Ciise wuu ka diiday ma adeecin Shayddaankii. Labadaraadlaba wuxuu ugu jawaabay Ereyga Ilaah. "Dadku waa inaanu kibis oo keliya ku noolaan, laakiin inuu erey walba oo afka Ilaah ka soo baxo ku noolaado."

Markaasaa Ibliiskii magaaladii quduuska ahayd ee Yerusaalim geeyey, macbudkii qudduuska ahaa oo ahayd meeshii dadka ku caabudi jireen Ilaah. Kolkaa ka dib muxuu sameeyey Shayddaankii? “Haddaad tahay Wiilka Ilah, hoos isu tuur,” Ibliiskii baa sidaa ku yidhi. “Ereygiisa wuxuu leeyaahay wuu ku badbaadin doonaaaye”

Maya! Ciise ayaa ugu jawaabay. “Wey qoran tahay...’ Rabbiga Ilaahaaga ah waa inaadan jarribin”
Kol labaad buu isku dayaya Shayddaankii. Wuxuu geeyey buur aad u dheer
Wuxuuna tusay boqortooyooyinkii dunida oo dhan iyo ammaantoodii, wuxuuna ku yidhi, “Waxyaalahan oo dhan waan ku siin doonaa haddii aad ii sujuuddid oo i caabuddid”
“Shayddaan yahow, bax!” ayuu ku amray Ciise. “Wey qoran tahay…’Waa inaad caabuddaa Rabbiga Ilaahaaga ah oo waa inaad Isaga keliya u adeegtaa” *(Matayos)* Ciise wuxuu xushay laba iyo toban caawisa.

Ciise waxa uu sameeyo waxyaalo mucjisa ah. Wuxuu daweeyey cuduradii, dad dhibanaa buu qalbiyadooda iyo maskaxdooda nabadeeyey, oo wuxuu Ereyga Ilaah. Dad badn baa u yimid inuu caawiyo oo bogsiiyo. Wuxuuna go’aansaday inuu ka xusho laba iyo toban nin kuwii Isaga raacsanaa, inay ka caawiyaan hawshiisa Ilaah.

Haddaad leedahay xulasho muhiim ah inaad samayso, Ilaah ma baryaysaa? Sidaa Ciise ayaa sameeyey! Wakhti gaaban buu aaday meel buur ah oo wuxuu la hadlay Aabbihiisii samada ku jiray. Ciise wuxuu tukanayaya ilaa gabal dhicii qoraxda madoobaaneysay Ciise wuxuu salad ku jiray ilaa iyio habeenkii oo dhan.

Aroortii buu u yeedhay xertiisii – dhamaan saaxiibadii we adeeceen oo yeeleen Isaga. Laba iyo toban ka mid ahaa ayuu doortay rasuullo.Labadii ugu horreysay ee uu doortay waxay ahaayeen walaalo, Simonkii Butros iyo Andros. Waxayna ka soo tageen shaqadoodii kaluumeysiga markii uu Ciise u yeedhay oo way raaceen.

Yacquub iyo Yooxanaa, wiilashii Sebadii, xitaa waxay ka soo tageen shabagyadii kaluumeysiga.
Ciise weliba wuxuu doortay Filibos, Bartolomayos, Matayos, Toomas, Simon qiioolihii, Yacquub ina Alfayos, Yuudas Yacquub walaalkii, iyo Yuudas Iskaariyot, kii gacan gelin doonay ee noqday cadowgii Ciise.
Ciise waxa uu barayo inay tahay sidii aqal la dhisayo aas aaskiisa adag oo kale. Dabka iyo dabaysaha ay san dumin Karin. Laakiin ma aysan aqbalin Ciise' Ereygu waa sidii dhismo aqal laga dul dhisay ciid, kolkii ay dabaysha xoogga leh timaaddo iska dhaca. Qaar ka mid ah Amarada Ciise wax sahlan maysan ahayn. "Qof haduu dhanka midigta kaa dharbaaxo, u du' dhanka bidixda" weliba wuxuu baray "Inay cadowgooda jeclaadaan" Dadku waxay u baahan yihiin inay ku noolaadaan sidii Ciise oo kale.
Ciise weliba dadka wuxuu u sheegay inay si hoose u tukadaan - inaysan isku tustusin dadka hortooda sida ay sameeyaan wadaaddada hoggaamiya diiinta ay sameeyaan.

Ciise wuxuu yidhi Ilaah baa cunto dhar ba siin doona dadka kuwa Isaga rumeysan. Shimbiraha Isagaa cunto siiya oo eega quruxda midabada ubaxyada duurka sida ay baxaan. Dadkiisa waa inay aaminaan oo wax walba oo ay u baahn yihiin wuu siin doonaa.
Maalintaa xertiisii uu doortay waxyaalo badan buu baray. Markii uu dhameeyey, nin baras leh baa u yimid wuu bogsiiyey. Ciise wuu u

jawaabay ninkii baraska qabay, “Waan kaa bogsiin doonaa” Iyagoo xertiisii eegayaan, ayuu bogsiiyey, wuuna bogsooday baraslihii. Wuu bogsiiyey! Wiilka Ilaah keliya ayaa sidaa samayn kara. Xertiina wey garteen inuu leeyihiin Sayid.
*(Matayos 4-7, Markos 1, Luukos* 6)

## Wiilkii la jeclaa oo Addoon noqday

Isaaq aad bu u faraxsanaa. Wiilkiisii Yacquubna guriga ayuu joogay. Xitaa wuxuu soo dhaweeyey walaalkii oo bari ku dhaartay inuu dilo. Laakinse wiilashii Yacquub ma aysan faraxasanayn sababtoo ah Yuusuf, wiilkoodii ugu yaraa, oo ahaa kii uu jecla Aabbahooda.
Yuusuf walaalihii aad bay uga cadhoodeen markii uu u sheegay riyooyinkiisii.”Xidhmadeydii ayaa kor u kacday oo istaagtay, oo kuwii walaalahay way u sujuudeen,” Yacquub baa yidhi. Riyadatani waxay iila micne tahay Yuusuf inuu ka mudnaan badan yahay walaalihii.
Riyadii labaad ee Yuusuf, qoraxda, bisha iyo xiddigaha ayaa u sujuuday isaga. Xitaa Aabbihii baa ka carooday isaga inuu iska sare qaaday waaliddiintiisii iyo walaalihii. Maalin buu Yacquub u diray Yuusuf inuu meeshii ay walaalihii Adhiga ku daajinayeen. Walaalihii waxay arkeen inuu u soo socdo. “Aynu dilno riyoolahan,” ayay ku tashteen inay dilaan. Yuusuf se ma uusan ogayn khatarta ku soo food leh.
Ruubeen, walaalki ugu weynaa ayaa ku khilaafay. “Waan inaydaan dhiiggiisa daadinin”Ayuu yidhi “Bal eega ceel baa halkan ku yaala! Ruubeen oo qorshihiisa ahaa inuu samata bixiyo markii uu gabalka dhaco”.

Markii uu u yimid Yuusuf, walaalihii wey qabteen, oo waxay ka furteenshullugii midabyada lahaa ee sida goonida ah Yacquub ugu tolay wiilkiisii uu jeclaa. Deedna waxay ku tureen celkii engagnaa.

Intuusan Ruubeen u soo noqon, ayaa waxaa ku soo dhawaday niman bayac mushtari ah geel wata oo ku sii socda waddada Masar, “Aynu iibsanno Yuusuf” walaalkii Yuhuudah ku qayliyey. Heshiiskiina sidaa buu u dhacay. Waxay ku iibiyeen Yuusuf labaatan xabadood oo lacag ah. Ilmeyn iyo cabsi, Yuusuf markii la saarayaya Awrka si looga fogeeyo reerkiisa iyo waddankiisaba. “Sow kan ma aha shullugii Yuusuf. Waa dhiig miiran. Waxaannu ka helnay banka”walaalihii arxan darnaa waxay ogolaysiiyeen Yacquub inuu aamino in bahal dilay wilkiisii uu jeclaa. Yacquub dharkiisii buu jeejeexay oo geeri baa gashay oo waa la waayay qof qalbi qaboojiya. Masar, Yuusuf wuxuu ahaa qof cabsi badan oo kalinimo dareemayo. Laga yaabee inuu u xiisay gurigoodii. Laakiinse ma uusan ka baxsan kareyn. Wuxuuna shaqaale ka ahaa gurigii Footifaar, oo ahaa nin aad muhiim ka ah xagga Masar. Foorifar wuxuu arkay inuu Yuusuf mar walba shaqo adag qabto wuuna aaminay. “Wax walba wuu ku liibaanay,” Footiifar baa maalin Yuusuf ku yidhi. “Rabbiga ayaa kula jira. Waxan doonayaa inaad madax u noqoto shaqaalaha, oo aad xukunto shaqada oo idil iyo dhamaan shaqaalaha kale oo idil.

Rabbiga Fooriifar wuxuu siiyey sarac fiican oo wuu taajiray Yuusuf awgiis. Iminka waa nin loo baahan yahaya oo qiimo leh,, Yuusuf weli Ilaah buu aad u aaminsan yahay.
Laakiinse dhib buu la kulmayaa. Footiifar naagtiisa waxay ahayd naag aad u xun. Waxayna tidhi nin ii noqo. Wuuna ka diiday. Ma uusanna ku dambaabin Rabbiga hortiisa inuu wax xun ku sameeyo Footiifar.

Koolkii auy naagtii isku dayday inay xoogto, Isagu wuu ka cararay. Laakinse waxay ka qabsatay koodhkiisii oo u hadhay.“Addoonkaagii baa I soo weeraray” Footiifar naagtiisa ayaa sidaa calaacashay. “Bal eeg Koodhkiisii” Footiifar wuu cadhooday. Laga yaabee inay naagtiisa been sheegeyso.
Laakiin waa inuu wax un sameeyo. Maxay ahaan doontaa? Footiifar Jayl buu dhigay Yuusuf. Inkasta oo isagu waxba samaynin, Yuusuf aad uma cadhoonin ama kama xumaanin. Lagayaabe inuu wax ka soo bartay dhibkii hore oo middan waxba lama aha markii l;oo eego, haddii uu ilah sharfayo, Ilaahna wuu sharfayaa isaga – xitaa xabsi. *(Bilowgii 37, Bilowgii 39)*

## Rabbiga wuu sharfay Addoonkiisii

Yuusuf si khalad ah buu Sayidkiisii Footiifar ugu xidhay. Xabisiga dhexdiisa, Yuusuf wuxuu ahaa nin dhaga nugul oo caawiya dadka. Ilaaliyaashii xabsig Yuusuf waxay ku aamineen inuu maamulo nolosha xabsiga., sabata oo ah Ilaah baa la jiray isaga, xabsigiina wuxuu noqday meel noloshiisa wanaagsan tahay.
Boqorka kii wax u dubi jiray iyo kii khamriga siin jiray ee ku jiray Jaylka. “Maxaad la calool xun tihiin?” ayaa Yuusuf weyddiiyey maalintaa. Nimankii dhibaataysnaa baa u jawaabay.“Ilaah wuu karaa” Yuusuf baa saa yidhi “ Ii sheega riyooyinkiina” “Riyadaada waxay la micne tahay saddex cisho ka dib waxaad ku noqon doontaa qasriga boqor Fircoon” kii khamriga shubi jiray. “I soo xasuuso oo ii weydii inuu Fircoon inuu i sii daayo” kii wax dubi jiray riyadiisii waxey noqotay war xun. “Adigu Saddex cisho gudohood baad ku hdimanaysa” Ayuu Yuusuf ku yidhi. Labadoodiiba riyooyinkoodii run bay noqdeen. Laakiin khamri shubihii wuu iska ilaabay farriintii Yuusuf ilaa uu Fircoon subax dambe rabshad la soo toosay. “Waan riyooday” isaga oo ku

dhawaaqaya.midna nimankii xigmadda lahaa wey u micneyn waayeen. Markaa ka dib ayaa khamri shubihii soo xasuustay Yuusufkii ku jiray jaylka. Fircoon buuna u sheegay waxyaalihii ku saabsanaa isaga. Fircoon dad buu u diray durbadiiba. “Riyadaada waa farriin ka timid Ilaah” ayuu yuusuf ku yidhi boqorkii. “Masar waxaa imna doona toddoba sanadood oo barwaaqo ah, ka dibna todoba sanadood oo abaaar ah.” “Qorshee iminka oo keydi cuntada toddobada sanadood ee barwaaqada ah.” Ayuu Yuusuf Fircoon kula taliyey. “Ama dadkaadu gaajada abaarta ba’an bay la dhiman doonaa.” “Ilaah baa kula jira” Fircoona wuu caddeeyey taasi” Masar oo idil adigaa xukum oo ah kan igu xiga aniga keliya”

Toddobadii sanadood ee barwaaqa ahayd ayaa la gaaray. Ka dib toddobadii sanadood ee abaarta ahayd ayaa timid. Cuntadiina wey ka dhaamaatay meel walba Masar mooyee oo horey u keydsatay cunto badan oo dadka u qaybisa. Yuusuf reerkoodii meeshii fogeyd deganaa. Yacquub qoyskiisii wey gaajoodeen.

Dadkii waddamada kale oo idil waxy yimaadeen Masar si ay hadhuudh uga iibsadaan. “Masar waxaa yimid wiilashii oo u soo diyar garoobay iney cunto iibsadaan.” Yacquub wiilshiisii waxay ku hor sujuudeen Sayidkii ugu sareeyey Masar. Ma asysan garan karin Yuusuf, kii walaalkooda ahaa. Laakiinse Yuususf wuu gartay walaalihii. Yuusufna wuxuu soo xusuustay riyooyinkiisiii cruurnimo. Ilaah baa ka sareysiiyey walaalihii. Yuusuf xigmad buu lahaa. Si kulul buu ula hadlay deedna walaalkii Simon buu rahan ula hadhay. “Qaata cuntada oo gurigiina geeye oo la imaada walaalkiin kan ugu da’da yar,” ayuu ku amray. Kolkaa ka dib waxaan garan doonaa inaad tihiin basaasiin. Walaalihii waxay ku fikireen inuu Ilaah ku ciqaabayo iibintii ay iibiyeen Yuusuf sidii addooon oo kale waagii hore.

Wiilashii Yacquub wey wareereen/siku-buuqeen. "lacagteenni waxey inooga soo dhex noqtay hadhuudhka dhexdiisa. Oo sayidkiina u talinayaya wadankaa wuxuu nagu yidhi ii keena Benyamiin" Yacquubna inagama yeelayo inuu Benyamiin ka socdo. Laakiin durbadiiba cuntadii waa la isticmaalay oo idlaatay. Walaalahii waa in ay Masar ku noqdaan. Benymiinn ahorey buu u raacay.Markii uu Yuusuf arkay Benyamiin Addoomadiiisii buu amar ku siiyey inyay diyaar gareeyaan xaflad weyn. Walalihiina waa lagu casuumay. Yuusuf ba weyddiiyey "AAbbihiin miyuu nool yahay oo caafimaad qabaa?" laga yaabee inuu damacsanaa oo uu ku fikirayay siduu reerka oo idil oo wadajira ku soo rari lahaa. Weliba Yuusuf wuxuu doonayay inuu ogaado walaalihii inay ka xun yihiin dembiyadooda sanadihii hore ay ku kaceen. Casuumddii ka dib wuxuu ku eedeeyey iyagii xatooyo tuuganimimo." La idinkuna ciqaabayo. "Aniga inaan haysanayo Benyamiin si uu addoonkayga u noqdo." Sayidow nafta iga qaad aniga" ayuu ku baryootamay Yuudah. Yuusuf wuu gartay inuu yahay Yuudah, oo ahaa kii go'aamiyey in Yuusuf la iibiyo.runtiina wuu isbedelay.Intaa ka badan ma uusan qarin kareyn jaceylka uu uqabo qoyskiisa, Yuusuf Masaaridii buu dibaddda isaga bixiyey. Dabadeedna wuxuu bilaabay inuu ooyo. "Waxaan ahay walaalkiinii aad ka iibsateen Masar," la yaab, filan waa iyo cabsi, waxba way odhan waayeen.

Yuusuf wuu dhiirra-geliyey walaalihii. "Ilaah baa Sayid iiga dhigay Masar haddaba waan idinka badbaadin doonaa abaarta. Orda oo Aabahay ii keena. Waan idin dhaqaalayn doonaaye"

Yacquub iyo Yuusuf Masar bay ku wada dib ugu midoobeen oo reerkii oo idil nabad iyo barwaaqo ayay u haatay. (*Bilowgii 39-45)*

## Amiirkii wabiga ka yimid

Raysal wasaare Yuusuf wuu geeriyooday! Masaridii oo idil qoyskiisii bay la baroorteen. Yuusuf Ilaah waxa uu u isticmaalay Cibraaniyiintii inuu waddanka kaga badbaadiyo abaartii ba'neyd. Xigmad buu lahaa oo hoggaamiye la jecel yahay buu ahaa. Iminka wuu tagay. In ka badan saddex boqol oo sanadoo markii ay ka soo wareegatay. Dadkii Yuusuf, Cibraniyiintii, waxy noqdeen qowmiyad weyn oo tiro badan ku nool dadlka Masar. Fircoonkii cusbaa Cibraaninyiinta tirade badan inay ka soo horjeestaan, deedna kuligoodba addoomo ayuu ka dhigtay. Fircoonna si aad u xun buu ula macaamilooday Cibraaniyiintii. Laaliinse waxba ma aysan ka bedelin sidii adkayd ee uu ula shaqeeyey iyaga, Cibraaniyiinta weyba sii tarmeen oo tiradoodii wey sii korodhay. Maalin baa, Amar cabsi leh oo aad u xun ka soo saaray Fircoon "wiil kasta oo dhasha waa inaad webiga Niil ku tuurtaan." Fircoonkan inkaaran wuxuu is yidhi sidaa bay ku yaraan kartaa tirade Cibraaniyiinta. "Maxeynu samaynaa?" qoysbaa wax la yaab leh la yimid. Waxay go'aansdeen inay ilmahooda k tuuraan webiga Niil. Laakiinse wuxuu ku jiray abxad/dambiil adag oo aysn biyaha soo dhaafi karin. Wey qaaday alaabtan qaaliga ah. Dambiishii doonta yarayd ahayd waxey sabaysan biyihii jiinka korkiisa. Wax walba oo ku dhacaba kara ilmahaa yar? Meel fog, waxaa taagnayd walaashiisa iney ogaato dambiishaa qaaliga ah ee sida wanaagsan ugu dul sabaynaysa jirjirka caws duurka webiga qarkiisa.

Kolkiiba gabadhii Fircoon iyo addoomadeedii baa yimid wabiga si ay ugu maydhato. Waddo kale oo lagu qariyaan ma aysan jirin, laga yaabee inay garab socdeen iyagoon arkayn.

"Alla! Waa dambiil, halkaa caws duurka. Waxaan la yaabanahay waxa ku jira." Gabadhii Fircoon addoomadeedii bay ku amartay inay soo qabtaan dambiishaa. Markii ay furtay - limihii wuxuu

bilaabay inuu ooyo. “Waa ilmo yar Cibraani ah,” amiiradii wey sheegatay.
“Miskiinkan yarow, aad baad u qurux badan tahay.” Aalaaba waxay ula hadashay ilmihii yaraa sida dadka waaweyn ay ula hadlaan caruurta oo kale. Iney sidan tidhi laga yaabaa “Ootchie-kootchie Koo-ums”- Afkii Masaarida, weeye. Ilaah baa xikmad gaar ah siiyey ilmihii yaraa walaashii waxay ku oroday gabadhii Fircoon. “Ma kuugu yeedhaa naagaha Cibraaniyadda middood si ay kuugu nuujiso?” “Haayoo iigu yeedh” Bay ku tidhi” qofkee buu kula yahay ka naas nuujin doona ilmaha? “Hooyo! Dhakhsa u soo orod! Alla soo horey carar!” laga yaabee inanata inaysan haysan wakhti ay ugu sharaxdo. Wadajir bay dib ugu soo daadageen raadkii. Dib bay ugu soo noqdeen webigii, iyadoo gabadhii Fircoon ilmihii kor u haysata. “Ii nuuji isaga. Lacag baan ku siin doonaaye, Waxaa loo bixiyey Muuse” lagayaabe Muuse inuu la micne yahay xagga Masaarida wiilkii biyaha. Haddaba Muuse waxa uu dib ugu soo noqday waalidiintiisii iyo xaafaddii. Waxay bareen inuu jeclaado Ilaah iyo dadka Cibraaniyiinta. Durbadiiba waxay ahayd inuu ku noolaado meeshii ay joogtay gabadhii Fircoon. Ilaaha samata bixiyey noloshiisa, mustaqbalka waxbuu u qorsheeyey ilamahan Muuse ah. (*Baxniintii 2)*

## Mucjisooyinkii Ciise

Ciise mucjisooyinnbadan buu sameeyey. Mucjisooyinka waxay calaamad u ahaayeen oo muujanayeen inuu Ciise runtii yahay Wiilkii Ilaah. Mucjisadii ugu horreysay waxay ka dhaday xafladii arooska. Arrin dhib leh baa dhacday. Meeshii baa ka dhamaatay sharaabkii biyahay canabka ahaa qof walba. Maryan, Ciise hooyadii, waxay u sheegtay dhibaata, deedna waxay u sheegtay shaqaalihii inay yeelaan waxa uu ku amray Sayidka.

“Ashuumaha biyo ka buuxiya,” ayuu yidhi Ciise. “Biyo” u badi iney weddiyeen. Haa, biyo, ayuu Ciise ayuu ka codsaday Deedna Ciise shaqaalihii qaada ashoonkan weyn oo u geeya ninka ka mas’uulka ah xafladda ha dhadhamiyee. Biyihii waxay isku bedeleen sharaab canab ah oo aad u wanaagsan! Shaqaalihii amakaageen. Ciise biyihii wuxuu u bedelay sharaabka canabka Ilaah keliya ayaa samayn kara mucjisdan. Ciis wuxuu soo bandhigay mucjisooyin kale oo fara badan. Habeen baa, Isaga iyo xertiisii tageen gurigii Butros. Bitros soddojdii aya aad u xanuunsanayd oo qandhanayd. Ciise wuxuu taabtay gacantii Islaantii bugtay. Durbadiiba wey bogsootay. Wayna toostoo waxay u adeegtay Ciise iyo xertiiisii. Waxay u ekeyd dadkii magaaladii oo idil ay isugu yimaadeen afaafkii hore ee aqalkii habeenkaa. Dad wad buka ayaa yimid – indhoole, dhagoole, kuwa aan hadli karin, curyaaniinba. Xitaa dad jiniyo qaba ayaa ku soo xoomay Ciise. In badan wuu caawiyey.

Ciise Wiilkiii Ilaah, wuu karaa inuu ku caawiyo. Ciise in badan buu caawiyey. Dhssmssn intii u timid o idil wuu bogsiiyey. Dadkii curyaanmada ku dhashay oo nolosha weligood curyaan ahaa wey socdeen oo boodboodeen.

Qaar kale ayaa u yimid, kuwii uu foolxumeeyey oo cudurka baraska qabay.

Waxay noqdeen Giddigoodba daahir hadba sidii uu Ciise ku bogsiiyey. Rag iyo dumar ay dhibeen jiniyo ayaa Ciise hor yimid. Wuxuuna ku amray jiniyadii inay ka baxaaan. Wey yeeleen jiniyadii, , dadkii cabsanayay, oo farxad darrada haysatay baa degenaan iyo faraxad helay. Dadkii buuqyay gadaashooodada, afar nin baa isku dayayay iinuu Ciise caawiyaan saaxiibkooda. Laakiinse maysan jirin meel ay u soo maraan. Maxay samayn karaan?

Iyaga oo sare u sida ayay dusha aqalka ninkii la soo fuuleen, afartii nine e iimaanka lahaa saaxiibkood bay xagga hoose ula soo

dejiyeen. Iminka aad buu ugu u dhaw yahay Ciise. Ciise wuxuu arkay in afartan nin iimaan leeyihiin. Ninkii bukayna wuxuu ku yidhi, “Dembiyadaadii waa la cafiyey,” Ninkii wuu istaagay, caafimaad iyo xoog. Ciisa ayaa boksiiyey. Inyar ka dib, Ciise dooni buu la fuulay xertiisii. Duufaan cabsi leh baddii buu ku soo kacay, Ciise wuu iska hurday. Xertiyoo cabsi la gariiraya ayaa hurdada ka kicisay Isaga. “Rabbiyow na badbaadi,” bay ku dhawaaqayeen. “Waan baaba’nay” Ciise amar buu siiyey mowjadihii. Durbadiiba, baddii way degtay. “Wa’ayo ninkan noocan ah” sidaa bay qalbiga iska weyddiiyeen. Xitaa dabayshii iyo baddii ay adeecayaan. Waxayna rumeysteen inuu yahay Ciise Wiilka Ilaah sababta oo ah mucjisooyinkiisii baa tusay Amaantiisa. Taasi xertii ma aysan garanayn, laakiin waxay arkayeen bandhigyadii Ciise xitaa ka weyn mucjisooyin ee uu dadka ugu adeegayay.
Matayos 8-9, Markos 1-2, Markos 4, Luukos 4, Luukos 8, Yooxanaa 2.

## Odaygii Macbudka Ayaa Ciise Booqday

Maalin buu Ciise macbudka yimid. Wuxuu ku arkay macbudkii dad shataf jabinayay IIlaah.Waxay ku dhex iibinayeen xoolo oo lacag bay ku kala badalanayeen Macbudka! Markaasuu xadhka karbaash ka sameeyeyCiise bacbudkii ka eryey ganacsatadee. “WaIxyaaalahan meeshaw ka qada” sidaa buun ku amray. “Guriga Aabbahay ha ka dhigina guri baayacmushtari” Ciise wuu jeclaa guriga Aabbihii. Odayaashii waxay Ciise weyddiisteen inuu tuso calaamaduu u haysto oo caddeyneyso inuu nadiifiyo macbudka. “”Macbudkan dumiya oo saddec xisho Ayaan ku dhisi doonaaye”” Suuragal ma aha! Macbudka dhismihiisa sadex iyo afartan sanadood buu qaatay.

Laakiin Ciise jidhkiisa ayuu ka hadlayaya. Sidii macbudka oo kale, jidhkiidu meeshaa buu lahaa. Inkast oo Ciise ku dul dhiman doonay iskutallaabta dusheeda Isagu wuu ogaa inuu ka soo sarakkicn geerida asaddex cisho ka dib.

Habeenkaa, waxaa soo booqday mid ka mid ahaa hoggaamiyayaashii macbudka. Wuxuuna ku gartay inuu Ciise laga so diray xagga Ilaah. Nikodemos baa u yimid inuu Ciise wax uga barto waxyaalo badan oo ku saabsan Ilaah.

Ciise wuxuu u sheegay Nikodemos in dadku haddayna markale dhalan ma gali karaan boqortooyada Ilaah. Sidee baa qof weyn u noqon karaa ilmo yar marlabaad? Dhanka kale , wuuuu isau nin diinta yaqaano. Intaasi kuuguma filna miyaa”

Taasi waxaa weeye wixii ka dhasha ruux waa ruux” Ciisa ayaa u fasiray. “Ruuxa Ilaah waa sidii dabayssha oo kale ama ma fahmi karan dabaysha. Waxay arki karaan keliya waxa ay samayneyso.”

Ciise wuxuu soo xusuusiyey Nikodemiyos inay waxyaalaha ku saabsan caruurtii reer Binu Isra’eel ka ku calaacali jireen Muuse waagii hore. “Ma haysanno cinto, biyo, oo waan nacnay muufada aad na siineyso” bay ku dhawaayeen.

Dembiyadii dadka ayuu Ilaah ka cadhooday.wuxuu u soo diray abeesooyin naareed oo badan iyagii. Abeesooyinkii baa dad badan qaniinay oo in badan baa ka dhintay dadkii. “Waannu dembaabnay, baryadoodana sidatan bay ahayd RABBIYOW naga fogeey abeesooyinkan” Ilaah bay sidaa ka baryeen. Deedna Muuse ayaa u duceeyey iyagii. Laakiinse Ilaah kama uusan gogeynin abeesooyinkii. Markaasuu Muuse Rabbiga ku yidhi abeeso samee, oo tiircalan kor saar.  “Oo mid kasta oo la qaniino, markuu eego tiirkaa calanka saaran yahay wuu noolaanayaa” Ilaah baaa sidaa kula ballamay Muuse. Oo Muuse ayaa abeeso naxaas ah sameeyey oo haddii uu eego qofkii la qaniina wuu bogsoon jiray.

Ciise wuxuu ku yidhi Nikodemos wiilka adanaha waa in kor loo qaada sidii Muuse abeesadii naxaasta ahayd kor ugu qaadaay. Ciise baa sidaa uga sii hadlay iskutallaabta meeshuu ugu dhiman lahaa debiiilayaasha.
Ciise ayaa yidhi "Ilaah intuu dunida jacayl u qabay ayuu siiyey Wiilkiisa Keliya ee dhashay in mid kastoo isaga rumeysta uusan luminlaakiinse uu lahaado nolosha weligeed ah."Middaas oo la micne ah in qof walba oo rumeysta Ciise in uu ka dhashay qoyska Ilaah.Laga yaabee Nikodemos inuusan ka mid noqon xertii Ciise habeenkaa. Laakiinse sanado ka dib, Nikodemos waxaa la arkayay isagoo jecel oo rumeysan Ciise oo uu ka qayb qaatay ama caawiyey aaskii wiilkii Ilaah ee liskutallaabra lagua daldalay. Intaa ka dib, Ciise iyo xertiisii waxay u ambabaxeen safar xagga waqooyi ah. daaka qaar waxay doorbidayeen inay maqlaan oo wax badan ka ogaadaan Boqortooyada ILaah oo ay helaan fursad ay ku rumeystaan Ciisaha reer Nasareet, Wiilla Ilaah. *(Yooxanaa 2-3, Tirintii 21)*

## **Ciise waa Macalin weyn**.

Ciise wuxuu ahaa macalin weyn – abid kii ugu wanaagsanaa. Dadka isku soo ururray wey dhegeysan jireen Isaga. Ciise wuxuu u sheegi jiray naxariis, wanaag iyo raxmad. Qaar baa laga yaabaa in lagu nici jiray oo lagu waxyeeleen jiray iyaga, laakiinse Ilaah baa ka ilaalin jiray iyaga. Ciise wax badn buu baray. Wuxuu yidhi dadka Ilaah waxay u ifayaan sidii shumaca uga nuuro aqalka. Muxuu ka badeli karaa shumaca markii la shido aqal mugdi ahaa!

Ciise wuxuu kula hadlay dadkii rumeysnaa aargudhashada. "Sidii ilba il, ilikna ilik" lakiinse Ciise waxa uu baray iscafinta iyo jacaylka, xitaa haddii ay yihiin cadawyadooda. Waagii Ciise joogay,

dadla qaar ka mid ah waxay matali jireen iney yihiin qudduus, markii ay lacagta siinayaan dawarsadayasha, waxay wadan jireen qof Trumbo cod dheer dhawaajiya si ay cid walba u arakto. "Adigu wax ma u bixisaa si qarsoon, oo Ilaah baa kuugu abaal marin doonna" Ayuu Ciise ku yidh. Sidaas oo kale Ciise wuxuu baray salaadda. Qaar baa ku tukan jiray waddooyinka cadhiidhiga ah koonayaashooda si ay u arkaan dadkaa hareer maraya. Dan maysan ka gali jirin Ilaah, dantooda waxay ahayd waxa dadka kale u arkaan iyaga, Ciise wuxuu ugu yeedhay iyaga laba wajiilayal – been jilayaaal.

Ciise inta badan wuxuu u isticmaali jiray Waxbarididiisa sharaxaad dabiici ah. Tusaale, wuxuu ku tilmaami jiray shimbiraha "Aabbahaagii janada ku jira ayaa quudiya iyag." Ha ka welwalin, Iaal ba ku quudin doonee.

"Xitaa boqor Suleymaankii taajirka ahaa quruxdooda oo kale uma labisan jirin ubaxyada. Miyuusan Isaga kuu labisi karin? Ciise dadkii wuxuu baray inay Ilaaha wax siiya aaminaan wax walboo ay uga baaahan yihiin.

"Haddii aad u xukuntid walaalkaa, waxay la mid tahay inaad ka bixineyso saxar isaha kaga jira adiga qudhaada oo falar weyn oo qori ah ishaada ku jira," Ciise ayaa yidhi. Laga yaabe dadkii hoos bay ka qosleyn. Lakiin waa inay ka fikiraan micnaheeda. Ciise dadkii wuxuu yu sheegay inay caawimaad weyddiistaan Ilaah. Addunka ma ka iraa Aabbe dhaga kuusan siinaya haddii ilmahiisa oo gaajoon rooti weyddiisto? Maya! Waxay siinyaan wax wanaagsan. Ilaahayna sidaa oo kale wax wanaagsan buu siinayaa kuwa wax weyddiista. Ciise, wuxuu ahaa macalin weyn, wuxuuna ka digay waxyaalaha ku saabsan macalinnimada beenta ah. "Waxay u labistan sidii idaha," "Laakinse waa dhurwaayo yeey ah!" wuxuu yidhi macalimiinta beenta ah waxaa lagu gartaa noloshooda iyo siday u nool yihiinba.

Sheeko ayuu ugu sheegay, Ciise wuxuu tusay dadkaa iyaga ah kuwa adeeca Ereyga Ilaah inay la mid yihiin ninkii aqalkiisa ka dul dhistay dhagaxa adag. Kolkii dabayshii duufaanka ku soo kacday. Markii dhamaataynа, aqalkii uu sidiisii u taagnaa. Laakiinse ninka doqonka ah aqalkiisa wuxuu ka dhistaa ciiidda korkeeda. Markasy ku dhufato dabaysha, labo ayuu u kala dhacaa sababtoo ah saaskiisa ayaa daciif ah. Ciise dadkii wuxuu ku yidhi  kaa waa kan aan adeecin Ereyga Ilaah ayuu la mid yahay ninkaa.. Dadkii isu soo baxay wey la yaabeen ereyadii Ciise. Mana aysan horey u maqlin weligood waxyaalaha hadda ka hor. Iminkana waxay garteen inaysan horey ugu filnayn inay maqlaan Ereyga Ilaah. Waxaana ku waajibay inay adeecaan maalin walba. (*Matayos 5-7, Luukos 6)*

**Amiirkii wuxuu noqday Adhi jire**

Maalin buu Muuse arkay Masari garaacaysa addoomadii Cibraaniyiinta ahaa.

Intuu agagaaradiisii iska eegay ayuu weeraray kii madaxda u ahaa addoomada. Dagaalkii intuu socday buu ku dilay Masrigii. Durbadiiba, si degdeg ah ayuu u aasaay maydkii.

Subaxdii dambe, Muuse wuxuu arkay labaa Cibraaniyiin ah oo is-dilayo. Wuxuu isku dayay inuu kala qabto. Mid baa ku yidhi “Ma waxaad doonaysaa inaad i disho sidaad u dishay Masrigii??” Markaasuu Muuse cabsaday. Shalay bay cid walba ogaatay. Fircoona wuu ogaaday. Waa inuu baxsadaa Muuse dee. Wuxuu aaday dalka Midyaan.

Muuse oo ceel agtiisa ku nasanaya. Toddobadii gabdhood ee wadaadkii Midyaan dhalay ayaa buuxiyey brkadihii biyaha si ay u waraabiyaan xoolihii Aabbahood.

Markaaseey adhijirro yimaadeen oo ka eryeen.. Muuse wuu difaaacy oo caawiyey hablihii.“Dhakhsa ayaad u guriga ugu soo noqoteen!” ayuu Racuu’eel ku yidhi Aabbaheed kolkii ay gabdhiiisii

uga sheekeeyeen sababta, wuxuu ku yidhi “Bal ninkaa iigu yeedha” Muuse wuxuu la noolaaday Re’uuceel tii uu ugu yeedhi jiray Yetro. Ug dambeyntii Muuse wuu guursaday Recuu’eel gabadhii ug weyneyd hablaha.

Markii uu ku soo laabtay dalka Masar, Fircoon wuu geeriyooday. Dadkii Ilahna, Cibraaniyiintii, wali waa la addoonsanayay. Sidee buu ahaa taahi dhibka haysta! Sidee buu se ahaa baryadii ay Ilaah caawimaadda ku weyddiisnayeen! Ilaah wuu maqlay baryadoodii. Muuse ma uusan ogeynt taasi, laakiin qorshihii Ilaah buu ku socday si uu u caawiyo Cibraaniyiintii ku hoos jirtay addoonsiga. Afartan sanadood baan alaga joogay wakhtigii uu ka tagay dalka Muuse dadlka Masar. Adhijire ayuuna u ahaa Recoo’eel adhyahoodii. Laakiinse wuu waayay dadkiisii Masar joogay. Maalin baa Muuse looga yeedhay keyn gubanaysa dhexdeeda. Laakiinse dabkii ma uusan gubeynin geedihii keynta. Muuse wuuxuu go’aansaday inuu ogaado sababta ka socd meeshan. Markii uu u ku soo leexdayna, Ilaah baan uga dhex yedhay geedka dhexdiisa. “Muuse!” “Waa i kan ” ayuu yishi Muuse. “ Halkan ha u soo dhowaan, kabaha iska siib, waayo, meesha aad taagan tahay waa dhul qudduus ah.” Ilaah baa waxa uu ku yidhi “Waxaan kuu dirayaa Fircoon, inaad dalka Masar ka soo kaxeyiso dadkayga” Laakiin Muuse wuu cabsaday inuu u tago. Dabadeedna Ilaah Muuse wuxuu tusay awooddiisa weyn. Wuxuuna ushii Muuse u bedelay Abeeso. Markii Muuse dabada abeesada soo qabtayna waxay noqotay ushiisii. Ilaah wuxuu ssiyey calaamad kale. “Gacantaada laabta saar,” Ayuu ku amray, Muuse sidii buu sameeeyey. Gacantiisii cudurka baras bay yeelatay. Markii markii labaad laabta saarayn way bogsootay. Muuse wali wuu diidan yahay, “Anigu codkar ma ihi” ayuu ku yidhi Ilaah. “Waxaan isticmaali doonaa Haaruun, walaalkaa, erayada aad kula hadasho ayuu u sheegi doonaa” Ayuu ku yidhi. Markaasaa Muuse u tagey

Yetroo, allaabtiisiina ka soo gurtay oo aaday Masar. Ilaahna wuxuu ku soo hagay Muuse walaalkii oo buuraha jooga. Iyaga oo wada jira ayay fariintii u sheegeen odayaashii Cibraaniyiinta. Wadajir bayna baryo ugu dhaceen wajiga. Si geesinimo leh, Muuse iyo Haaruun ugu tageen Fircoon. Oo waxay ku yidhaahden “Ilaah wuxuu leeyahay sii daa dadkaygu ha tageene” “Ma yeelo doono inay Reer Binu Israa’iil iska tagaan” buu Fircoon ugu jawaabay. Isagu ma aqoonsnayd oo adeecsanayn Ilaah. Ilaah bawoodiisa weyn buu u isticmaalayaa inuu maskaxd Fircoon bedelo.
*Baxniinta 2-5)*

**Nabadeey Fircoonow!**

Fircoon wuu ka cadhooday! Wixii Ilaah ku amray isaga oo uu u sheegay Muuse inay addoomaha Reer Binu Israa’iil ka tagaan Masar. Wuu diiday. “Hawlo culculus”, in loo dhiibo ayuu Fircoon ku amray kuwii Addoomada xukumay. Iminka wayba uga sii dartay Israa’iiliyiintii. “Isku soo ururiya xashkiinii cawska engagna ahaa, idinma ma siin doono hadda ka dib. Laakiin sameeya tire jaajuur ah in la eg intaad sameyn jirteen.” Sidaas buu Fircoon ku bixiyey amararadiisii cusubaa..Nimankii ku shaqada karbaashka lahaa isla kolkaa waxay garaacyeen addoonta sababtoo ah wakhti dheeraad ah uma aysan haysan inay soo guraan xashka cawska engagan iyo samaynta jaajuurada.

Dadkii waxay eedeyn dul saareen Muuse iyo Haaruun inaan looga horreyn dhibaatadan ku dhacaysa. “Adigu dadkaada ma samata bixneysid sideedaba” “Anigu waxaan ahay Rabbigiina, oo waan idinka soo saari doonaa,” ayuu Ilaah ku yidhi. Dabadeedna Ilaah wuxuu u diray Muuse iyo Haaruun inay dib ugu laabtaan Fircoon. Markii boqorkii arlada u talin jiray weyddiistay adeegayaashii

calamad ka timid Ilaah, Haaruun ushii geedka ka samaysnayd baa mas dhuuban isu bedeshay. “Iigu yeedha saaxiriintii” ayuu Fircoon ku qayliyey. Markii saaxiriintii Masaarida dhulka ku tureen ulahoodii, mid walba waxay noqotay mas iyana. Laakiin ushii Haaruun baa liqday kuwii kale. Wali, Fircoon wuu diiday inay dadkii iska baxaan. Sabaxdii dambe, Muuse iyo iyo Haaruun baa ku kulmay wabiga. Markii uu Haaruun ushiisii ku fidiyey, Ilaah biyihii wuxuu u bedelay dhiig. Kalluunkii wuu wada dhintay! Dadkiina ma aysan cabdi karin.! Laakiinse Fircoon qalbigiisii wuu sii adkaaday. Mana uusan yeelin inay Israa’iliyiintii ka baxaan dalka Masar. Mar kale ayuu Muuse la hadlay Fircon inuu dadaka sii daayo. Fircoonse wuu ka diiday haddana. Ilaah wuxuu u soo diray balaayo kale. dalka Masar oo idil waxaa buux dhaafiyey Rah. Guri walba, qol walba iyo jiko walba waxaa ku dul orday Rahyo fara badan. “II duceey aniga, waa intaasoo Ilaah iga saaraa Rahan,” ayuu ku baryootamay Fircoon”oo dadkaaga waan kuu siideyn doonaaye.” Ilaah kolkaa balayiin Injiro u soo diray, kolkaaseey iswada xoqxoqeen qaniinyadeeda darteed, laakiinse Fircoon ma siinin dadkii Ilaah. Waxaa xigtay inuu Ilaah u diray duqsiyo, raxan raxan u socda iyagii. Ilaah wuxuu u soo diray cudurro dila xoolaha nool Masaaridii. Ilaah wuxuu u soo diray boogo nabara xunxun ah. Dadkii way dhibaatoodeen oo cabsi baa gashay. Wali Fircoon wuu iska caabinayaa Ilaah. Balaayooyinkii nabarada ka dib, Ilaah wuxuu u soo diray ayax guuraya. Ayaxii wuxuu cunay dhirtii cagaarnayd oo idil ee dalka ku yiil. Dabadeed Ilaah wuxuu u soo diray in saddex maalmood (caana maal) oo mugdi ah.laakiin madax adaygii Fircoon uma aysan suur galayn inay xoroobaan Israa’iliyiintii “Waxaan idiin soo diri doonaa malayo dheeraad ah kolkan.” Ayuu Ilaah ugu digay. “Habeeenbadka baan Masar ku dhex socon doonaa, oo curadyada jooga dalka Masar iyo xoolaha oo idil way wada dhiman doonaan.” Wuxuuna Ilaah ku yidhi reer Binu Israa’iil curadyadooda waa la

badbaadin doonaa haddii orgiyo la qalay dhiigiisa ay mariyaan faaradda albaabda guryahooda. Saqdii dhexe ee habeenimadaa, aya oohin badan ka dhex yeedhay guryihii Masaarida oo geeri farabadan baa dhacday. Ugu yaraan hal qof baa ka dhintaqy qoys walba. "Iska baxa" Ayuu Fircoon ku baryay Muuse. "Taga oo u adeega Rabbiga" Durbadiiba, dadkii Ilaah waxay bilaabeen guuritaan inta ku aadan xaggaa iyo xuduudda Masar inta ka shisheyso. Ilaah wuxuu u sheegay Muuse inuu xasuusto habeenkii kor maridda sababatoo ah Mla'iktii Ilah baa soo dul martay reer Binu Israa'iil guryahoodii iyo kuwii Masaarida ee la laayay iyo dadkiisaba. 430 sanadood ka dib oo ay joogeen Masar, Ilaah dadkiisa iminka waa xoroobeen. Ilaah wuxuu ku hagayay tiir daruur ah iyo tiir dab ah habeenkii. Laakiin Fircoon weli kama dhamaan reer Binu Israa'iil Kol kale ayuu ilaabay Ilaah. Kol kalena, wuu bedelay maskaxdiisii. Wuxuu isu keenay ciidamadiisii, wuxuuna ka daba tagay addoontii. Markiiba wuxuu ku dageen halka u dhaxeysa qirarka waddadad wareegra iyo badda agteeda. "Ilaah baa idiin dagaalamaya" Muuse ayaa sidaa yidh. Muuse wuxuu sii hor tagay xeebta badda afkeeda gacmihiisuuna kor u qaaday. Mucjiso weyn baan dhacday Ilaah biyihii buu waddo ka baneeyey. Dadkiina si bad-qab ah bay kaga gudbeen. Dabadeedna Fircoon iyo ciidankiisii ku tuuray Badda Cas. "Iminka waynu soo qabanaynaa" sidaa bay ku fikirayeen ciidankii. Laakiin Ilaah wuu xidhay biyihii. Ciidankii xooga lahaa ee Masaarida way liqeen biyihii. *(Baxniintii 4-15)*

### Afartan Sanadood

Markii Ilaah ka soo samata bixiyey reer Binu Israa'iil Masar, Muuse dadkii wuxuu ku hogaamiyey cibaado. Wuxuu sameeyey qasiidooyin Ilaah amaan. "Waxaan u gabyi doonaa Rabbiga amaanta guusahiisa" Ilaah wuxuu ka gabyaya dhamaan wax walba

oo uu u sameeyey reer Binu Israa'iil. Saddex cisho ka dib iyagoo haraad la ildaran ayay dadkii heleen hadho war ah oo aan ku haboonayn in la cabo biyahaa khadhaadh ee qudhmay. Intii ay Ilaah baryi lahayeen ayay bilaabaeen cabasho dadkii. Waxayn u muuqden dadkii inay wax walba ka cabanayeen. "Cunto Ayaan ku haysanay Masr, bankan sxaraha ah gaajaa inagu dilaysa." Bay ku gunuunaceen galabtaa waxaa lagu soo daayay shimbiro digaag-duureed ah. Dadkiina si sahlan bay u soo qabqabsadeen. Subaxdii dambe Ilaah wuxuu u soo diray kibistii Maanada. Waa nooc la mid kibista caadiga ah oo u dhadhanta sidii malab khafiid ah. Aroor walba kibista Maanada waxay iska ooli jirtay dibadda oo laga guran jiray. Sidaa buuna Ilaah ku quudin jiray dadkiisa banka saxaraha ah dhexdiisa markay joogeen. Wxayna aamineen Ilaah maalin walba inuu ssinayo cunta cusub. Laaakiin qaar kale ayaa gurtay cunto ka badan intii loogu talay galay, xitaa inkasta Ilaah ku yidhi yeysan noqon in maalin ku filan in la qaato. Waa hubaal inay ku filan tahay, Maanadii shalay waxaa ka buuxsamay cayayaan yaryar inta aan ka ahayn maalinta Sabtida. Maalintaa gaarka u ah maalinta toddobaad dadku way nastaan oo ay cunaan maanadii shalaytoole. Ilaah wuu ilaaliyay Israa'iliyiintii intii ay joogeen banka saxaraha ah. Cunto iyo biyo ba wuu siiyey. – Wuuna ka difacay cadowyada. Markii reer Camaalaq soo weerreen, wuu ku guuleeyey Israa'iliyiintii dagaladii ay la galeen intii uu usha Ilaah gacanta kor ugu hayay Ilaah Israa'iliyiintii wuxuu ku yidhi, "Haddii aaad addeecdaaa Codkayga waxaad noqon doontaa dadkayga gaarka ah." "Dhamaan waxa Ilaah yidhaahdo way ahaan doonaa." Muuse dadkii buu u sheegay.Waxay ula soo lugeeyeen buurtii Siinaay oo waxay ku sugeen Muuse intuu Ilaah kala soo kulmayay.

Muuse afartan cisho ayuu buurta la joogay Ilaah. Ilaah wuxuu u soo qoray tobanka amar oo ku kala qoran laba loox dhagax. Wuxuuna Muuse u soo sheegay sida uu doonayo inay u noolaadaan dadkiisa.

1. Waa inaadan aniga mooyee Ilaahyo kale lahaan.
2. Waa inaadan samaysan ama u sujuudin sanam.
3. Waa inaadan magaca Rabbiga si beenbeen ugu hadal qaadin.
4. “Xusuuso maalinta Sabtiga, inaad qudduus ka dhigto.”
5. “Maamuus Aabahaa iyo Hooyadaa”
6. “Waa inaaadan qudh goyn.
7. “Waa inaadan sineysan.
8. “Waa waxba xadin.
9. Waa inaadan been sheegin.
10. “Waa inaadan damcin.”

Intii Muuse Ilaah la joogay buurta Siinaay Israa’iliyiintii waxay sameeyaan wax xun oo aad u khalafsan. Waxay ku amreen Haaruun inuu sameeyo weyl dahab ah – oo ay caabudaan intii ay Ilaah caabudi lahaayeen. Ilaah aad buu ugu cadhooday. Sidaas oo kale Muusana.

Markii Muuse arkay weyshii dahabka ahayd oo dadkii u cayaarayaan, looxyadii dhagaxa ahaa baa kaga dhacay dhulka. Muusihii cadhaysanaa wuxuu jajabiyey sanamkii dahabka ahaa. Dadkii xunxumaa ee caabudayay waa la dilay. Ilaah wuxuu ugu bedelay laba loox dhagaxeed. Wuxuuna ku yidhi Muuse dhis macbud – teendho weyn oo u samee xeen daab ku wareegsan – meeshaa buuna Ilaah la joogayaa dadkiisa. Halkaa bayna Ilaah ku caabudayaan Dauurtii tiirka ahayd iyo dabkii tiirka ahaa ayaa Ilaah tusi doona dadaka xaadirnimadiisa. Markii ay u soo dhowaadeen Kancaan, Muuse wuxuu xushay laba iyo toban sahan ah inay soo arkaan dalkii Ilah kala ballamay dadka. Intii kale waxay isku raaceen inuu dhulka qurux badan yahay, laakiinse laba keliya , Yashuuca iyo Qaalib, waxay aaminsanayeen in la qabto dhulka caawimaadda Ilaah awgeed. Tobankii sahmiyayaal way ka

cabsadeen caasimadihii ad-adkaa iyo dadkii waaweynaa ee dhulka joogay. Dadkii waxay raaceen tobankii sahmiyaaal ee rumaysad la'aanta ahaa. Waxayna ku gunuunaceen inay dib ugu laabtaan Masar intuu Muuse ku layn lahaa!
Ilaah wuu badbaadiyey Muuse noloshiisa. Deedna wuxuu dadkii ku yidhi, " Muddo afartan sanadood ah waxaa ku warwareegaysaan cidlada. Qaalib iyo Yashuuca, iyo caruurtiina ayaa gali doona kuna noolaan doona dhulkaa maadaama aad xaqirteen. (*Baxniintii 15 ilaa Tirintii 14)*

**Beeraleygii iyo Abuurkii**

Maalin buu Ciise harada agteeda ax ku baray. Dad badan baan aisugu yimid inay dhegeystaan. Dadkii isu soo ururayna aad bay u badnaayeen. Muxuu sameeyey Ciise? Wuxuu arkay doon ku dhwo, Ciise wuxuu fuulay doontii dusheeda. Iminka wuxuu arkaa dadkii oo dadkiina isaga way arki karaan oo maqli karaan. Ciise wuxuu bilaabay inuu u sheego masaaladii. – Sheekooyinkii qaabaysnaa eek u saabsanaa waxyaalihii dadku barayay Ilaah. "Beerey baa ku saydhay beertiisii abuur." Sheekadii Ciise waxay u ekeyd sidii sawir ay la jiraan ereyo la dul qoray. Dadkuna ay sawiri karaan shaqadii beereyga. – Waxayna arkeen in badan. Qaar ba jidka geesekiisa abuurkii ku dhacay, Way haadeen! Markiiba shimbiro u yimidoo wey cuneen. Qaar kalena waxay ku dhaceen dhul dhagax ah oo aan xcarro badan lahayn. Durbadiiba wey soo baxeen. Laakiin qorxdii markii ay soo baxday wey gubteen, wana engageen, sabata oo ah carradu aad uma sii dheeeraynQaar kalena waxay ku dhaceen qodxan, qodxaantiina way soo baxday oo ceejisay Intii kale ee hadhay ee abuurka ahayd dhul wanaagsan bay ku dhaceen oo ay midho dhaleen. Hadhuudh badan bayna dhaleen. Beereygiina aad buu u farxay. Ciise na wuxuu yidhi masaaladan

dadka waxay ka caawiniyaan inay fahmaan waxyaalaha Ilaah ku saabsan waa haddii ay jecel yihiin Isaga. Ciise wuxuu u fasiray masaaladii. Waxuuna yidhi abuurka waa Ereyga Ilaah. Abuurkii jidka geestiiis la dhacay wuxuu la mid yahay qof maqlay laakiinse aan fahmin Ereyga Ilaah. Shayddaan baa ilowsiiyey wixii uu Ilaah kula hadlay.

Dadka qaar baa durbadiiba qaata Ereyga Ilaah. Kuwaa waxay la mid yihiin abuurkii sheekadii carrada kuwii ku dhacay. Laakiinse jsla marka qof ku qosqoslo iyaga ama ay dhibaateeyaan jaceylka Ilaah dartii, wax qalaad baa ku dhaca. Dadka noocan ah ee si farxad leh ku bilaaba inay raacaan Ciise way ka beedhaan oo joojiyaan adeecidda Ereyga Ilaah. Mana doonyaan inay qiimo ku bixiyaan raacidda Ilaah. Sidee bay u xun tahay inay mamusaan saaxiibadood intey adeeci lahaayeen Ilaah!  Qaarkii qodxaanta ku dhex dhacday ee masaalkii waxay la mid yihiin kuwa ka walwala adduunka oo jecel lacagta badan oo li foan inay hesho noloshooda.  Laakiin abuurkii ku dhacay dhulkii – ciiddii wanaagsanayd ee la siiyey midhihii fiicnaa waxay la mid yihiin kuwa uu galay qalbiyadooda Ereyga Ilaah oo uu bedelay noloshooda. Dadkaa weeye dadaka u adeega oo sharfa Ilaah.  Dadkii badnaa ee isu soo ururuay waxay doonayeen inaysan ka tagin. In badan baan raacday oo amaantay Ilaah. *(Matayos 13)*

**Ninkii Hodanka ahaa, Ninkii Miskiinka ahaa**

Ciise wuxuu aad u garanayay inta badan hoggaamiyeyaasha diinta lacagta jecel yihiinin ka badan inta ay Ilaah lahaayeen. Waxaa jiray nin taajir ahaa oo xiran jiray dhar aad u qurux badan oo lacag qaali ah jooga. Wuxuu u labisan jiray sidii boqor. Waliba ninkaa taajirka ahaa cunta fiican buu cuni jiray. Wakhti walboo wax la cunana waxay u ekeyd cunto xafladeed. Lacag fara bandanna wuu heystaay oo cuntaduu doonno ku iibsado quraac, qado iyo cashaba. - inta xiliyadaa u dhaxeysana inyar oo faakihees ku dara. Albaabka hore ee gurigiisana waxaa fadhin jiray nin miskiin ah, buka oo dawarsada. Magaciisana waxaa la odhan jiray Laaasoroos. Miskiinkii Laasoroos ahaa jidhkiisa nabaro booga ah ayaa ka buuxay. Laga yaabe in uu cudurka lahaa. Laga yaabe in nabaro jeexjeexan oo booga ah ay micno u lahayd noole kale.laga yaabe inuu xanuun badan hayay sababta oo ah cunto wanaagsan ma uusan heli jirin sida caanaha. khudradda ama hilibka. Laasoroos cuntuu doonayay. Wuuna ku faraxsanaa inuu ka xaabxaabsado reebreebka cuntada ka daaddaato miiska ninkan taajirka ah. Mararaka qaar waxaa agjoogi j iray eeyo miskiinkii tuugsan jiray. Wayna ka leefleef jireen waxayna u ekeyd in Laasoroos aysan jirin cid u ka caawisa gaajada haysa. Subax un buu, Laasoroos soo kici kari waaayay. Miskiinkii gaajeysnaa ee saaxiib la’aanta ahaa dawarsan jirayna naftii baa ka baxday, Laasaroos wuu dhintay. Farxad baa u bilaabatay Lasaroos isla kolkiii uu dhintay. Ciisa ayaa yidhi Malaa’igihii baa u geeyey Ibraahim laasaroos Ilaah baa ka raali noqday. Ninkii taajirka ahaa isna wuu dhintay. Lacagtisii oo idilna maysan badbaadin karin noloshiisa. Markii geerida ku timid, maysasan jirin cid ka joojin karaysay. Waa la aasay ninkii hodanka ahaa. Laga-yaabee aas weyn in loo dhigay. Laga-yaabee dadku inay aamaanayen ninkan taajirka ahaa inuu xariif caqli badan ahaa

oo guuleystay. Ninkii taajirka ahaa naarta ayaa la geeyey. Naartii dhexdeeda ayuu oohin kala soo dhex qayliyey, “Abbo Ibraahimow ii soo dir Laasaroos inuu fartiisa caaaradeeda biyo ku tiinbiyo oo arrabkayga ku qabowjiyo, wayuo aniga ololka yaan ku silcayaa” Intaad nooleyd wax walba waad haysatay oo Laasaroos waxba ma haysan” Ibraahim wuxuu soo xusuusiyey ninkii taajirka ahaa. “Haddeer Laasaroos halkan ayaa lagu raaxeysiinayaa, adiga se waad silceysaa.” Cidn kam soo gudbi karto bohosha weyn ee inoo dhaxaysa idinka iyo anaga. “Laasaroos u dir gurigeygii ha u digee shantaydii walaal,” ninkii taajirka haa sidaa buu ku baryootamay. “ Ma doonayo iyaga inay meeshan silica leh ku dambeeyaan” “Walaalahaa waxsay haystaan Ereyga Ilaah, “Ibraahim baa sidaa ugu jawaabay. Haddii aysan walaalahaa shanta ah haddii aysan aaminsaneen Kitabka Qudduusk, ma aamini doonaan haddii Laasaroos dib uga soo laabto geerida. Markii uu ciise dhameeyey sheekadii ninkii taajirka ahaa iyo Laasaroos, laga yaabee culimadii iny isweyddiiyeen qudhooda, “Miyaan jeclahay taajirnimada in ka badan inaan jeclaado “Ilaah?” iminka way ogaadeen waxa dhici kara hadddii iyagu ay u dhug-yeelan Ereyga Ilaah.?” (*Luukos 16)*

## Wiilkii wixiisii khasaariyey

Ciise wuxuu jeclaa inuu dadak u shego waxyaalaha ku saabsan cafinta Ilaah. Sheekada ugu horreysa waxay ku saabsan tahay Nin haystay boqol neef oo ido ah. Mid baa ka lumay/ halowday. Isla kolkiba si toos ah ayuu aadhijirihii sagaal iyo sagaashankii cidlada uga tagay oo tii luntay ka daba tagay. Adhijirihii wuu raadiyey oo raadiyey ilaa uu ka soo helo. Deedna garbihiis ayuu ku soo saartay oo u soo qaaday xaafaddii isaga oo aad u faraxsan. Saaxiibadii buu ku yidhi, “ila Farxa, inaan soo helay neefkaygii idaha ahaa ee iga

lumay!” Ciise wuxuu ugu sharxay in ay farxad weyn janada kaga jiri doonto dembiilayaasha toobad keena. Toobad keenidda micnaheeda waxa weeyaan in laga xumaado demiyadeenna – wey ku filan tahay ka xumaasha ka dhan aamusnaan! Ciise sheekadiisa ku xigta waxa weeye oo ay ku saabsan tahay qof dumar (Naag) ah oo haysaatay toban lacag sanuud ah, laga yaabee inay ahayd inay nolsheedii oo idil ay urusanaysay intaa yar. Wax aan fiicnayn baa qabsaday oo. Waxaa ka luntay senti ka md ahaa sunuuddii. Wey Xaaqday! Oo Xaaqday! Oo Xaaqday aqalkeedii naagtii meel walba ayaya ka baartay. Ugu dambayntii lacagtii ka luntay wey heshay. Aad by u farxday. Maad qiyaasi kartaa waxa ay samaysay? Haa, waxay u sheegtay dhammaan saaxiibadeedii oo idil! Mar labaad Ciise wuxuu yidhi, “Sidaa oo kale maerkii mid dembi leh toobad keeno, farxad ayaa kaga jirta Malaa’igaha hortooda.” Sheekada sadexaad ee uu Ciise sheegayna waxay tahay tii ugu murugada badnayd. Wuxuuna ka hadlay wiil isaga gurigii Aabbihii. Dal fog buuna ku kharash gareeyey lacagtiiisi oo idil si nacasnima ah. Iminka muxuu samayn karaa? Waxay ku samaysay wax laga naxo, macluul, wiilii gaajuu la dhiman karaa. Baahi aad u daran, wiilkii shaqo ayuu ka helay xero doofaarada lagu quudiyo. Wuxuuna ku farxsanaa inuu cuno raashinka doofaarada. Laga yaabee inuu sidaa sameeyey! Ugu dambayntii, wiilkii caqligiisii baa soo noqday. “Ku noqo gurigiinii, xitaa shaqaalahaa cunta wanaagsan bay cunaan” ayuu ku fikiray ama is yidhi. Gurigii baan aadayaa oo sheegayaa Aabbahay inaan ka xumahay dembiyadeedii.  Ma istaahili inaan wiilkaaga noqdo hadda ka dib. Waxaan rajaynayaa inuu i shaqaalaysiin doono shaqaaale ahaan. Intii uu weli meel fog oo ka duruksan gurigii Aabbihii soo socday, AAbbihii baa arkay inuu soo socdo, Aabbihii baa ku soo orday wiilkiisii soo noqonaya. Wuu dhunkaday oo laabta saaaray isagii. “Aabbe waan kuugu gafay. Ma istaahilo inaan wiilkaagii noqdo.” Wiilkii AAbihii wuxuu

weyddistay inuu u kireysto shaqaale ahaan. Aabihii baa ka dhex galay. U keena khamiiska ugu fiican, kabo iyo kaatun wiilkayga. Oo u diyari xaflad weyn."

Waxaa dhacday xaflad lala yaabay sababtoo ah wiilkii lumay baa la helay. Ciise ayaa sheekadan sheegay sababta oo ah waxay tusuneysay sida Ilaah u jecel yahay inuu aqbalo dembiilayaasha u toobad keeno Isaga. (*Luukos 15)*

## Yashuuca Baa Taladii La Wareegay

Muuse wuu dhintay. Yashuuca wuu yaqaanay Ilaah wuxuu u doortay isaga inuu hoggaamiyo Israa'iliyiintii. Horay baa loogu diyaariyey ciidanka Yashuuc, isna wuu isu diyaariyey qudhiisa. Ilaah wuxuu u ballan qaaday Yashuuca guul iyo barwaaqo eek u jirta dhulkii ballanta haddii ay dadka marwalba ay adeecaaan Ereyga Ilaah. Israa'iliyiinta waxay u ballan qaadeen inay raacayaan Yashuuca oo ay aqbali doonaan Ereyga Ilaah. Si Xigmadaysan, Hoggaamiyihii cusbaa basaasiin buu u diray Kancaan inay soo xuuraan digaaca magaalada weyn ee Yerixoo. Weerarka dagaalka ugu horeeyea ee Israa'iiliyiinta ayaa noqn doona meeshaa. Qof baa u sheegay boqorkii Yerixoo inay magaalada ku jiraan laba nin oo basaasiin ah. wuxuuna diray ciidamadiisii inay soo helaa.Baaritaankii baa ka bilowday gurigii Raxab, meeshii ay joogeen nimankii. Askartii si xoog badan bay albaabbkii u garaaceen. Durbadiiba, Raxab waxaey ku qarisay nimankii caws xariir ah saqafka dushiisa. Markii ay ka tageen Raxab askartii, Raxab waxay u isticmaashay inay ku daadijiso xagag hoose xarig si badqab ah dibadda derbiga magaalada. Maxaa iyada ku kalifay inay caawiso iyaga? Sababta waxay ahayd wey ogayd inuu iyaga Ilaah la jiro. Waxayna dooneysay inay nafteeda Ilaah u hibeyso.

Basaasiintiina wxay u ballan qaadeen inay badbaadin doonaan qoyskeeda. Intii aan la gaarin Yerixoo, Israa'iliyiintii waxay ka gudbeen webiga Urdu oo Kancaan bay gaareen. Kancaan, Dhulkii ballanta. Halkaa kaabad (Buundo) kama jirin! Sidee bay haddaba uga gudbeen? Ilaah wuxuu ku yidhi Yashuuca wadaaddada waa inay hoggaamiyaan ciidanka iyo dadakaba, iyaga kor u sidaan sanduuqii Ilaah ee ay ku jiraan qoraalkii tobanka amar ee Ilaah. Markii wadaaaddadii cagahooda taabteen faraqyada webiga, Ilaah mucjiso ayuu sameeyey Ilaahna waddo engagan ayuu biyihii dhexdooda ka sameeyey. Ka dib markii dakii oo idil badqab ku gudbeen, Waxay dhigeen laba iyo toban dhagax ah badda hoosteeda ay ka oo qaadeen ayay qotomiyeen degtii shishe ee Kancaan ee webiga kaa aadanayd. Waxay ka caawin doontaa xusuusta dadka inay baraan caruurtooda waxyaalaha ku saabbssan awoodda iyo jacaylka Ilaah. Yerixoo waxay lahayd darbiyo adaag oo dhuu-dhuuban. Intii uu Yeshuuca qorshaynayaya weerarkiisa, Ilaah wuxuu u soo diray Dhame (Kabtan) ciidankii ka yimid xagga samada inuu xusuusiyo Israa'iliyiinta taliyahan cusub oo uu Ilaah ku guuleynayo dagaalada dadkiisa. Ilaah wuxuu u sheegay Yashuuc sidii – habkii uu ku weerari lhaaa Yerixoo. Qorshe yaable leh buuna ahaa. Ilaah dadkiisii waxay ku warwareegeen magaaladii kolba mar muddo ku siman lix maalood, oo toddoba mar maalintii toddobaadna. Deedna waxay afuufayeen buunan dhawaaq dheer leh iyo qaylo badan, oo derbiyadii magaalada ayaa iska dhacay! Yashuuca iyo ciidankiisii waxay sameeyeen wwixii Ilaah ku amray inay sameeyaan. Laga yaabee dadkii Yerixoo joogay ay ku qoslayeen iyaga. Laakiinse wareeggii toddobaad wadaaddadii waxay aad u afuufeen buunankii wananka geesahooda. Oo ahad sidii Ilaah kula ballamay ……….. DERBIYADII WAAWEYNAA EE YERIXOO WAY DHACEEN! Aqalkii Raxab keliya ayaa ka badbaaday derbigii Xarig casaan ah bayna ka soo raaricisay dariishada sare. Durbadiiba, raggii

Yashuuca ayaa soo samata bixiyey Raxab iyo reerkoodiiba. Dabadeedna way burburtay magaaaladii Yerixoo ahayd, sidii uu Ilaah ku amray.
Si rasmi ah, Yashuuca wuxuu la wareegay dhabkii, allaabtii naxaasta, oo hantidiii shaqada Ilaah loogu adeegayay bay noqdeen. Markiiba cidwalba oo Kancaan joogtay waxay maqashay sidii Yashuuca Yerixoo uu u qabsaday. Waxay ogaadeen in Ilaah la jiro dadkan. (*Yashuuca 1-6)*

**Samsoon. Ninkii Ilaah ee Xoogga Lahaa.**

Xilli laga joogo waah ore, dhulka Israa'iil waxaa ku noolaan jiray nin la yidhaahdo Maanoo'ax Isaga iyo xaaskiisaba caruur ma aysan lahayn. Maalin baa Malaai'igta Rabbiga u timid Maanoo'ax, "Waxaad dhali doontaaan wiil aan caadi ahayn oo khaas ah." ayuu yidhi Waxayna u sheegtay ninkeedii iyadii akhbaar cajiib ah, Maanaa'ax wuu tukaday, "Rabbigaygiyow ….. Kol kale inoo imow inaga. Ina bar inaga waxan ku samayn lahayn ilmaha"Malaa'igtii waxay u sheegtay Maaoo'ax inuusan gabi ahaan ba ilmaha ka xiirin timaha, waa inuusan khamriga cabin, waa inuusan raashinka qaar cunin. Ilaah baa u doortay ilmahaa inuu xukumo, wuxuuna hoggaamin doonaa reer Binu Israa'iil.

Dadkii Ilaah caawimaad bay u baahdeen. Way ka tageen Ilaah oo waxay keliya u jeesteen danta noloshooda, oo dabadeed waxaa ka adkaaday cadowygoodii, Falastiiniyiintii. Laakiinse markii ay Ilaah baryeen wuu maqlay. Wuxuuna u soo diray wiil yar oo noqon doono ninka adduunka ugu xoogga badnaan doono. Deedna naagtii baa umushay/dhashay wiil oo loo bixiyey magaciisa Samsoon: oo wiilkii wuu koray, oo Ilaah baa barakadeeyey isaga.oo Ruuxii Ilaah

baa bilaabay inuu ka dhex shaqeeyo.” Samsoon aad buu xoog u yeeshay. Maalin buu la dagaalamay Libaax isaga oo faramaran – wuuna dilay. Markii dambe, Samsoon wuxuu dhadhamiyey malabkii qoyanaa ee shinida ku beermay calooshii libaaxii dhintay. Daldaloolo ayuu sameeyey Isagii, “Cunaagii waxbaa ka soo dibada uga soo baxay oo wax xoog leh  baa uga soo baxay wax macaan” Cidna ma qiyaasi karto micnaheeda – laakiin Samsoon naagtiisii cusbayd, ee Falastiiniyadda ahayd. Waxay u sheegeen, baa aad uga cadhaysiisay Samsoon. Samsoon aad buu u sii carooday markii Falastiiniyiintii naagtiisii inay naag u noqoto saaxiibkiisii ugu dhowaa saaxiibadii. Wuxuuna qorshaystay inuu aarguto. Laakiin sidee dee? Ugu horreyntii, Samsoon wuxuu qabtay 300 oo dawaco. Markaasuu isugu xidhay min laba sayntii dabadooda, laba labo, oo wuxuu dhex dhiga qoryo ololaya laba walbaba inta u dhaxayso. Dabadeed dawacooyinkii buu ku sii dhex daayay beerihii sareenka ahaa ee reer Falastiin.Iminka Faalstiinyiintii waxay doonayaan inay aargutaan. Samsoon waa la soo qabtay, oo la soo xidhxidhay si loogy dhiibo FAlastiiniyiinta inay dilaan. Markaasaa Ruuxii Rabbiga aad ugu soo degay Samsoon. Xadhkihii gacmihiis ku xidhnaa way kala go’go’een, Markaasuu helay oo soo qaatay laf daan dameer oo dhintay, oo wuxuu dilay 1000 cadawgiis ahaa. Falastiiniyiintii qaybo badan bay ka raadiyeen si ay doon - doonaya Samsoon. Habayn bay dain ugu dhigeen oo waxay ka xidhen albaabadii magaalada laga baxayay. Laakiin Samsoon dibadda ayuu u soo baxay – isaga oo Albaabkii weynaa ee magaalada irideeda garbaha ku wata! Laakiin Samsoon wuu ku fashilmay Ilaah, Il;aah xoog buu siiyey intii uu adeecayay Isaga. Maalin baa, Samsoon wuxuu u sheegay Delilah sirta ku jirta xooggiisa. Basaasaddii reer Falistiin ee quruxda badnayd. Timihiina bay ka xiirtay intuu jiifay. Falastiniyiintii waxay ku weerareen Samsoon qolka jiifka ee Dalilah. Samsoon aad buu u dagaalam, laakiin tabartii baa ka tagtay.

Cadowgiina indhaha ayaya ka saareen. Indho la'aan iyo daciifnimo, Samsoon addoon buu u noqday Falastiiniyiintii. Weyna ku qosqosleen oo ku ciyaareen adeegihii Ilaah. Falastiiniyiintii xaflad weyn bay dhigteen. Waxayna amaaneen ilaahoodii kaluunka aha, Daagoon, inay ku cafiyaan Samsoon gacmahooda. Wey sarkhaameen oo ku farxeen macdbudkii Daagoon. Dabadeedna waxay u yeedheen Samsoon inuu hortooda ku ciyaaro. Samsoon wiil baa keenay goobtii, oo inuu barto tiirarkii xajiya dhismaha macbudka. Waxaa joogay 3000 oo Falastiiniyiin ah saqafka dhismaha, qaar badan xagga hoose ee gudaha ayay joogeen, dhamaantood wey ku majaajiloonayeen. Laakiin Samsoon timihii baa u soo baxay intuu ku jiray xabsiga. Iminka wuxuu Ilaah ku baryay "Sayidow, Rabbiyow waan ku baryayaae, i xusuuso, oo si aan uga magdhowdo Falastiiniyiinta labadaydii indhood." Ereyga Ilaah ma xoog buu siiyey mar labaad Samsoon? Waxaan suurtagal ahayn miyuu samayn karaa Samsoon? HAA! HAA! Culeys xoog badadn ayaa saarmay, Tiirarkii buuna Samsoon isu keenay. Macbudkii Daagoonna wuu dumay, kumanaan reer Falastiin ah ku dilay. (*Xaakinada 13-16)*

## Askarigii yaraa ee Gidcoon

Ka dib markii Yashuuca dhintay, dadkii reer Binu Israa'iil oo idil way ka jeesteen Ilaah oo adeeci waayeen.Deedna Ilaah u daayay inay reerihii derskooda ahaa reer Midyaan ay ka gubaan dalagii iyo guryahahoodaba. Israa'iliyiintii waxay bilaabeen inay godadaka buuraha ku noolaadaan. Mid ka mid ah Israa'iliyiinta, Gidcoon, bay ahayd inuu meel qarsoon ku tumo sareen. Wuxuuna ku meeshii macsarada geed weyn hoostii. Reer Midyaan ma aysan garanaynin meeshaa – laakiin Ilaah baa sidaa sameeyey! Ilaah wuxuu u soo diray Malaa'ig farriin sidda kuna socota Gidcoon. Ilaah wuxuu

Gidcoon ka doonayay inuu burburiyo sawir bixinta Ilaahyada beenta ah reer Aabbihii oo uu dhiso meel Ilaha runta ah lagu caabudo. Inkastoo Gidcoon ka cabsaday inay dilaan tolkii. Wuxuuna sameeyey wixii Ilaah ku amray oo idil. Ilaah waxa kale oo ka doonayay Gidcoon inuu hoggaamiyo ciidanka Isra'iil eek a soo horjeeda reer Midyaan. Laakiin Gidcoon wuu cabsaday. Wuxuuna weydiistay calaamad gaar in Ilaah uu tuso isaga. Dabadeed wuxuu dul dhigay haraggii meel egagan oo dusheeda. Dhogortiisa "Haddii dhedadu ku dhacdo dhogorta keliya, oo uu engagnaado dulka intiisa kale," Gidcoon baa ku baryay, "dabadeed waan garan doonaa inaad ku badbaadin doonto gacantayda, sidaa horey iigu tidhi." Subaxdii, dhulkii wuu engagnaa, laakiin DHOGORTII WAY QOYNEYD! Wali wuu shakisan yahay Gidcoon. Iminka wuxuu doonayaa inuu Ilaah u soo diro dhedo dhulka laakiin aysan u ahaan dhogorta. Subaxdii dambe eek u xigtay, dhulkiiba qoyay, laakiin DHOGORTII AY QALALNAYD! Gidcoon wuxuu bilaabay dibadda inuu u soo saaro ciidankiisii oo tiro ahaan gardhayay 32,000 oo askari. Ilaahay wuxuu ka soo reebay 300 oo keliya raggii. Ilaah ma uusan doonayn inay Israa'iliyiintu yidhaahdaan "b Gacantayda ayaa i badbaadisay" Ilaah keliya ayaa ah badbaadiyaha reer Binu Israa'iil. Waxaa la ogaa weli inuu Gidcoon baqayo, Ilaah baa si hoose u maqlay nin reer Midyaan ah oo askari kale u sheegaya riyo cajiib ah. Riyadaa oo ahayd, in kibis shaciir ah oo intay ku soo dul dhacday teendhadii reer Midyaan deedna dumisay. Waardiyihii kale aad buu u cabsaday. "Tani waa …… Seeftii Gidcoon …" buun ku qayliyey. Markii uu isna Gidcon maqlay riaydii micney u yeelatay, wuxuuna gartay Ilaah inuu guusha siin doono isaga. Gidcoonna wuxuu diyaarshay isla habeenkaa in la weeraro. Mid walba oo askatiisa ka mid ah wuxuu siiyey buun, iyo jalxad madhan oo ay qoryo ololaya ku dhex jiraan. Waxayna hareereeyeen ciidankii reer Midyaan. Baaqii Gidcoon markii uu baxayna, ciidamadii waxy

afuufeen buunankii, weyna jajabiyeen jalxadihii qorig ololayay ku dhex jireen. Dhwaq nooce ah! Jahawareer noocee ah! Wey cabsadeen Midyaaniintii oo way kala carareen.Guushan weyn ka dib, raggii reer Binu ISraa'iil Gidcoon waxay weyddiisteen inuu xukumo iyaga. "Idinma xukumayo anigu….. Rabbiga ayaa idiin talinaya" Gidcoon baa sidaa ugu jawabay raggii. Wuxuu garanaya in Ilaahkaliya u taliyo dadka noloshooda. (*Xaakinada 6-8)*

**Samaaritaankii wanaagsanaa**

Macalin! Maxaa igu waajib ah inaan sameeyo si aan u helo noloshaw weligeed ah? Ninka su'aashan weyddiinaya wuxuu ahaa garyaqaan doonayay inuu dayo oo uu xujeyo Ciise. "Sharciga Ilaah muxuu ka yidhi?" ayaa Ciise ugu jawaabay. "Jeclow Ilaah iyo deriskaaga" ninkii wuxuu yidhi. "Wa'ayo desiskayga" ayuu weyddiiyey. Ka jawaabidda su'aasha ninkan, Ciise wuxuu u sheegay sheeko ku saabsan nin ku safrayay waddada u dhaxeyso Yerusaalim iyo Yerixoo. Ninkii waxaa soo weeraray tuugo. Ninkii wax walba oo uu watay way ka dhaceen, xitaa dharkii uu gashanaa musaafurkii way ka furteen nasiib darro. Oo weliba si xun bay u garaaceen oo dhaawavceen, waxayna kaga tageen waddada dhinaceeda isagaoo dhiman oo aan nooleyn. Nasiib wanaag iminka waxaa waddadii soo maray nin wadaad ah, Runtii wuu caawin karay ninkii. May! Markii uu arkay ninkan dhiig baxay, wuu iska dhaafay oo waddada dhankeeda kale ayuu maray. Durbadiiba raadkii waxaa soo maray oo ku soo beegmay qof kale. Wuxuu ahaa nin reer Laawi ah oo macbudka ka caawiya wadaaddada. Wuu eegay oo wuu ka tagay ninkii dhaawacnaa isagoo inaba caawinin. Ugu dambayntii, nin reer Samariya ah ayaa sii maray waddadii oo u yimid. Israa'iliyiintu ogow aad bay u neci jireen reer Samaariya. Dadkii dhageysanayey sheekadii Ciise maysan ka filayn in qof rermaariya

ah uu halyay noqon karo. Laakiinse wuu ahaa. Samaaritankii wuu daryeelay, oo u joogsaday inuu caawiyo ninkan. Samaaritaankii ninkii wuu u leexday, oo uu si fiican daaweeyey oo uu faashad ku xidhay dhaawacyadiiisii. Hoteel waddada ku ag yaalay, ayuu ka xanaaneynayay habeenkaa oo idil. Aroortii ayuu siiyey ninkii hoteelka lahaa lacagtii uu ku dhaqaalayn lahaa musaafarkan ilaa uu ka bogsoonayo. Sidaa bayna ku dhamaatay sheekadii. Ciise ayaa weyddiiyay, "Kumaa deris la ah ninkan dhaawacan?" Garyaqaankii wxuu ugu jawaabay, "Deriskiisu waa ninkan reer Samaariyaha ah ee u naxariistay" "Tag oo sidiisoo kale samee" buu Ciise ugu jawaabay. Dersiku waaa cid walboo caawimaad u baahan. Waxaynu tusi karnaa jacayl aan ku caawin karno baahidooda. Taasi Ilaah bay raalligelisaa. (*Luukos 10)*

**Naagtii Joogtay Ceelka**

Ciise iyo xertiisii ayaa socdaal ku dhex marayay dhulka Samaariya. Waxayna yimaadeen magaalada la odhan jiray Sukhar. Meeshaa ceel baa ku yiilay, oo ahayd meesha ay dadka reer Sukhar ka dhaansadaan biyaha ay cabaan. Yacquub, Aabbihii reer Binu Israa'iil, ayaa qoday ceelkan wakhti hore. Xilli ku aadan duhur gaabad kuleyl iyo qoraxna ay jirto. Isaga oo daalan, ayuu Ciise ag fariistay ceel biyaha laga dhaansado intii ay xertiisa ku maqnaayeen magaalda Sukhar si ay cunto uga soo iibsadaan. Ciise keligii buu ahaa – laakiin naag ku nooleyd magaalada Sukhar ayaa u timid si ay biyo uga dhaansato ceelka. Naagtii way yaabtay. "Sidee baad, adigoo Yuhuudi ah, biyo ii weyddiisanaysaa, anigoo anigoo naag reer Samaariya ah?" ayay tidhi. Maalmahaas, Yuhuudda dan kama lahayn reer Samaariya! Oo aad bay ula sii yaabtay iyadii markii Ciise ku yidhi, "Haddaad garanaysid Kana an ahay, adigu waad i weyddiisan lahayd biyaha nool."

Naagtii Ciise waxay ku tidhi, “Sayidow waxaad biyo ku dhaansato ma hayatid, ceelkuna wuu dheer yahay. Haddaba xaggeed ka helaysaa biyaha nool? Miyaad ka weyn tahay awowehayagii Yacquub ee ceelka ina siiyey….?” “Kii kasta ee biyahan ka cabaa, mar kale wuu haraadi doonaa,” Ayaa Ciise ku yidhi naagtii. “Laakiinse, ku alla kii ka cabaa biyahaan siin doono, weligii ma haraadi doono. Biyaha aan siin doono … gudihiisa ayay ku noqon doonaanil biyo ka duulayaan tan iyo nolosha weligeed ah.” “Sayidow biyahaa sii.” Bay tidhi naagtii. Ciise wuxuu yidhi naagtii tag oo ninkaaga iigu yeedh. “Nin ma lihi” bay tidhi naagtii. “Shan nin baad lahayd” buu Ciise ku yidhi. “Oo kan aad haddeer haysatidna ninkaaga ma aha.” Naagtii waxay garatay in Ciise nabi yahay. Waxayna isku dayday inay kula muranto Isaga waxyaalo ku sabsan caabudidda Ilaah: Yeruusalaam ama buurta Samaariya ee qudduuska ah baa. Ciise wuxuu ku yidhi caabudidda caabudyaasha runta ah waa ta Aabbaha Ruuxa runta ah. “Waan ogahay Masiixu inuu inuu imanayo,” ayay ku tidhi naagtii Ciise. “Oo markii uu yimado, wax walba ayuu inoo sheegi doonaa.” “Anigoo kula hadlaya ayaa ah Isaga,” ayuu ku yidhi iyadii Ciise. Iosla markii, waxaa yimid xertii. Naagtii ayaa ashuunkeedii qaaliga haa isaga tagtay, oo magaaladii u baxday. “Kaalaya oo arka ninkii ii sheegay wax walba oo aan sameeyey,” naagtii dadkii magaaada Sukhar bay u sheegtay. “Miyaanu kani ahayn Masiixa?” Markaaseey dadkii magaalada ka soo baxeen oo ay arkeen Ciise iyaga qudhooda. Ilaa wakhtigaas, xertii Ciise waxay ku lhaayeen wax cun. Laakiin Ciise wuxuu ku yidhi, “Cuntadaydu waa inaaan sameeyo doonista kii i”soo diray oo an shuqulkiisa dhameeeyo” Shaqadiisa waxay ahayd in dadka uu u keeno Ilaah. Samaariyiin badan baa rumeystay Isaga sababtoo ah ereygii naagta. Waxayna weyddiiyeen Ciise inuu la joogo iyaga, oo laba maalmood buu la joogay. Dad fara badan baan rumeystay sababtoo ah erayadii Ciise qudhiisa. Waxayna

yidhaahdeen, “Waanu maqalnay, waannuna naqaan kanu inuu yahay Masiixa, Badbaadiyaha dunida. (*Yooxanaa 4)*

## Ciise Duufaankii Badda Dejiyey

Ciise iyo Xertiisii dooni bay saarnaayeen kolkii dufaanta ku kacaysay. Baddii Galile si xanaaq badan bay isu laalaabantay. Duufaanka noocan ah wuxuu burburin karaa oo dejin - quusin karaa maraakiibta. Duufaankii weynaa wuxuu cabsi galiyey xertii. Mowjadihii-hirarkiina waxay qariyeen doonida. Oo biyo ayaa ka soo buuxsamay. Laakiin Ciise xagga hoose ayuu hurday, wuu iska hurday duufaantoo jirta. Xertiisii baa Ciise hurdada toosisay, iyagoo ku qaylinay “Sayidow, Sayidow, waa dhimanaynaa oo baa’ba’eenaa!” Kolkaasuu wuxuu ku yidhi xertiisii “Maxaad u baqanaysaan rumeysadyarayaalow” Dabaded Ciise wuxuu amar ku siiyey dabayshii kacsanayd inay joojiso isgaraaciddeeda …… Oo ….. Ciise wuxuu amar hirarkii kacsanaa inay aayar degto-tartiibsato …. OO DABAYSHIINA WEY DEGTAY …. BADDIINA WAY NABDOONAATAY OO XASISHAY. Xertii wey yaabtay, iyagoo leh, “Waa nin caynkee ah kan dabaysha iyo badduba yeeleen Isaga” Waaa dambe ka dib, Ciise maalin kale pp howl badan ayaa jirtay. In ka badan 5000 oo qof ayaa u soo raacday Isaga meel lama dagaaan ah oo ban ah. Awoodda Ilaah Ciise wuxuu quudiyey dadkii badnaa ee isu soo baxay isaga oo isticmaalayo wiil yar qadadiisa. Waa galin dambe. Ciise cid walba wuu iks diray. Xitaa xertiisii way ka tageen. Ciise wuxuu sii saaray dooni inay Isaga uga sii hormaraan dhanka kale ee badda Galilee.

Markii uu cidwalba iska diray, ayuu fuulay buurta dusheeda Isaga keligii inuu ku soo tukado. Kolkii fiidkii la gaaray, keligii buu ku ahaa meeshaa. Meel dhulka ka fog harada dhexdeeda xertii waxaa

dhibay oo qabsaday dabaylo duufaan wadato. Duufaantiina waxay ku joojisay iyaga inay ka soo gudbaan biyahaa, inkasta oo ay xitaa saacado badan isku dayeen inay soo gudbaan. Xertii ma aysan garanaynin taa, laakiin waxay la kulmeen wax weyn oo ka yaabiyey. Inta u dhaxeysa meelahaa saacaddu ku began tahay qiyaas ahaan ilaa saddexdii iyo lixdii aroornimo iyadoo dabaysha badda ruxeysa, ayaa xertii waxay arkeen wax cabsi baadan ku beeray. Oo waxay ku qayliyeen, "Alla waa waa ruuxaan" Laakiinse wuxuu ahaa Ciise, Rabbigoodii iyo Sayidkoodii, oo ku soo socda iyaga, KUNA SOCDA BIYAHA DUSHOODA. "Kalsoonaada!" Ciise ayaa sidaa ugu yeedhay iyagii, "Waa aniga ee ha baqina," Markaasaa Butrus u jawaabay oo ku yidhi, "Sayidow, haddaad adiga tahay, igu amar inaan biyaha kuugu dul imaado." Ciise wuxuu ku yidhi "Kaalay, dhiiranow, Butros markuu doonida ka degay ayuu biyihii ku dul socday inuu u tago Ciise." Laakiin Goortuu dabaysha arkay, ayuu cabsaday Butros, oo markaasuu bilaabay inuu dego, isaga oo ku qaylinaya "Rabbiyow i badbaadi."
Duradiiba, Ciise Ciise ayaa gacantiisuu u taagay oo qabtay oo ku yidhi, "Rumeysta yarayahow maxaad u shakiday?"Oo markay doonida fuuleen Butros iyo Sayidkiisa Ciise dabayshii wey degtay. Oo kuwii doonida ku jirayna way caabudeen Ciise, "Runtii waxaad tahay Wiilka Ilaah." (*Matayos 8, Matayos 14, Markos 4, Luukos 8)*

## Ruut: Sheeko Jacayl Ah.

Haddaad la kulantid waaldiintii awoowayaashaadii – waalidiintoodii, oo dadkii oo idil ee ka soo jeeday qoyskiina u hor yimaadaan, lag ayaabee inaad la yaabee inaad la yaani lahayd nooca dadka ay yihiin. Kitaabka Qudduuska waxa ku jiraa, mid ka mid ah faraca Ciise uu ka soo jeedo inay ahayd Ruut – naagtii reer Moo'aab ee sanamyada cabudi jiray.

Sheekada Ruutwaxay ka bilabatay Israa'iil xiligii ka dambaysay wkahtigii Samsoon. Markii ay dadkii ay ka leexdeen rumeysadka iyo adeecidda Ilaah.Abaar ba'an baana ka dhacday waddankii. Ma garan kartaa waxa ay tahay abaarta? Waa hagaag! Abaartu waa marka ay khudaarta iyo hadhuudka aysan bixin, oo xoolahana ay madhaan oo xitaa dakana ay gaajo u dhintaan. Nin la odhan jiray Eliimelek, ayaa ka tagay Beytilaxam isaga iyo naagtiisa iyo laba will uu dhalay, si uu cunto u helo.wuxuu aaday Moo'aab, meeshiii dadkooda ay ku caabudi jireen sanamyada. Xaaladiisa kuma aysan wanaagsanayn Eliimelek iyo qoyskiisaba dadlkii Moo'aab. Wuumna dhintay, waxaana xigay lanadiisii wiil. Xaaskiisii, Nimco way ka tagtay iyada oo la socdaan labadiisi wiil naagahoodii. Ruut iyo Corfahna. Lbadaaa gabdhoodba waxay ka soo jeedeen reer Moo'aab.KILIYON, ELIIMELEK, MAXLOON Nimco, iminka waa carmali/garoob, waxayna maqashay in Rabbiga dadkiisa soo booqday, oo cunto siiyey, waxayna go'aansatay inay dib ugu noqoto dalkeedii. Laakiin maxay ku samaynaysaa hablihii? Nimco waxay ku waanisay ++ iyagii inay iska joogaam Moo;aa boo ay dib isaga guursadaan. Corfah waxay isaga noqotay reerkoodii. Laakiin Ruut wey diidday. Ruut waxy tirisay gabay jacal ah oo ballanqaadaya inaysan marnaba waligeed ka tageen sodohdeeda. Nimco saaxiibadeedna aad bay ugu riyaaqeen/farxeen inaay dib ugu soo laabato Beytalaxam. Laakiin waxay weyddiisatay inay ugu yeedhaan "Maara" intay ugu yeedhi lahaayeen Nimc (maqsuudin). "Qaadirka wuxuu iila macaamilooday si qdhaadh." Nimco wuxuu sii celiyey iyada oo madhan – Ruut mooyaane. Inkasta oo ay Ruut caabudi jirtay sanamyada sidii dadka intiisa badan reer Moo'aab ay samayn jireen oo kale, way ka soo noqotay taasi oo waxay caaabuday Ilaaha nool ee reer Binu Israa'iil. Ruut waxay aad uga shaqaysay inay hubiso Nimco cunto ku filan inay cunto.Maalin walba waxay raaci jirtay beer gooyayaasha beerta oo waxay ka soo

xaabxaabsan jirtay hadhuudhka ay ka daato oo ay kaga tagaan dhulka. Bocas ninkii beerta lahaa, ayaa maqlay sida ay ugu wanaagsan tahay sodocdeeda. Markii uu la kulmay iyadiina, Bocas wuxuu ku caawiyey inuu amro beergooyayaashii inay uga tagaan hadhuuddh iyada si ula kac ah ama qasdi xambaarsan oo ujeeddo leh. Bocas wuxuu bilaabay inuu ka helo Ruut. Markii Ruut uga sheekeysay Nimco waxyaalo ku saabsan Bocas iyo naxariistiisa, islaantii weyneyd Ilaah bay amaantay. "Ninka waa noo dhow yahay oo waa xigaalkayo." Wakhtigaa kolkuu dhaafay ka dib, Bocas wuxuu doonay inuu Ruut guursado oo uu ilaaliyo Nimco iyo dhulkii reerku lahaa. Lakiin mid kale oo ka xigay ayaa fursadda koowaad lahaa.. Ninkan dhulka ayuu doonayay – laakiinse ma uusan dooneyn Ruut inuu dumaalo oo ay noqoto xilo. Sharciga wuxuu leeyahay ma haysan karo mid keliya kan kale la'aantii. Maalmahaa, dadku iskuma aysan gacan qaadi karin inay gaadhaan heshiis. Bocas wuxuu iska saray kabtiisa oo si muuqata oo dadka hortooda ah ayuu ku siieyey ninkii kale. Sidaas bayna arrintii ku dhamaatay oo uu heshiiskii ku dhacay.  Ruut na sidaas waxay ku noqotay afadiisii. Iminka iyadii iyo Nimco waxay ka mid noqdeen qoyskii Bocas. Bocas iyo Ruut waxay u bixiyeen Coobeed wiilkii ugu horreeyey ee ay dhaleen. Oo wagii dambe noqday Daa'uud awowgii, boqorkii weynaa ee reer Binu Israa'iil. Laakiinse waxaa aad cajiib u ah, ilmahaa Coobeed faraciisa waxaa ka soo jeeda Rabbi Ciise Masiixa. Oo abtirsiinyadiisuna gasho qoyska Daa'uud inay u ahaaatay boqorka boqorada ahna Badbaadiyah dunida.

BOQORKA BOQORADA. (*Ruut)*

## **Samuu'eel, Inankii Ilaah – Adeegihii**.

Xannaah waxay ahayd gabadh wanaagsan, qabayna Elqaanaah, ahaana nin wanaagsan. Labadooduba waxay caabudi jireen Ilaah oo dadka kalena way roonaan jireen. Laakiinse Xannaah nolosheeda waxbaa ka maqnaa oo ay tabaysay. Waxay dooneysay inay ilmo dhasho.Alla, siday u doonaysay ilmo! Wey sugtay, oo ay Alla-bariday oo sugtay in badan. Ilmo ma aysan dhalin!  Sanad walba, Xannaah waxay tagi jirtay Macbudka Ilaah si ay u soo cibaadaysato. Sanad bay axdi ama ballan la gashay Ilaah oo hadduu Isaga siiyo wiil, iyadu inay siiso wiilkaa inuu u ahaado adeego Ilaah weligii iyo weligiiba adeege. Odaygii ahaa wadaadka Ceelii ayaa arkay Xnnaah oo baryootamaysa. Markaaasuu mooday inay khamri ku sarkhaansan tahay sabataoo ah bushumaheda keliya ayaa dhaqdhaqaayay, laakiin codkeeda lama maqlaynin. Ceelii na wuu canaantay! Laakiinn Xannaah axay u sheegtasy Ceelii waxyaalo ku saabsan baryaydeeda iyo ballanta ay la galayso Ilaah. "Nabad ku tag," Ceelii baa sidaa ugu jawaabay. "Ooo Ilaaha reer Binu Israa'iil ha ku siiyo baryaadaadii aad weyddiisatay . Ereyadii Ceelii Xannaah waxay siiyeen rajo" Durbadiiba farxad weyn baa ka buuxsantay qalbiga Xannaah. "Rabbiguna iyadii wuu xusuustay" wuuna u aqbalay baryadeedii. Iyada Elqaanah ilmo yar baa u dhashay oo waxay u bixiyeen magaciisa Samuu'eel (Oo la micne ah "Ilaah baa maqlay"). Laakiin Xannaah ma xasuusnaysaa ballantii Ilaah? Xannaah waxay joojisay aadiddii ay sanad kasta tagi jirtay macbudka. All, gacaliso! Miyeyse jabisay ballantii Ilaah? Maya, Xannaah waxay sugeysay intuu samuu'eel soo korayay si uu ugu noolan karo macbudka oo uu uga caawin karo howlaha adeega Ilaah Ceelii. Dabadedna waxay keentay ama geysay macbudka isagii. Ilaahay Xannaah wuxuu ku xurmeeyey iimaankeedii weynaa. Samuu'eel ka dib Ilaahay wuxuu siiyey saddex wiil iyo laba

gabdhood oo dheeraad ah. Sanad walbana, Xannaah waxay tagi jirtay macbudka oo ku caabudi jirtay oo u keeni jirtay khamiis cusub oo ay Samuu'eel u soo samaysay. Samuu'eel keligii ma ahayn kan keliya ee caawiye Ceelii. Ceelii wiilashiisa, Hofnii iyo Fiiexaas, xitaa meesha ayay ka shaqayn jireen. Laakiin way sharaf ridi jireen Ilaah oo waxyaalo xun xun bay sameyn jireen, oo xitaa markii uu Aabbahood Ceelii uu baryo iyaga. Ceelii waxay ahayd inuu ka eryo howlaha adeega macbudka. Laakiin sidaasi ma aysan dhicin. Habeen baa waxaa dhacay, in Samuu'eel maqlay cod u yeedhaya isaga. Wiilkii wuxuu mooday inuu Ceelii u yeedhayo. "Waa i kan," ayuu yidhi. "Kuuma aan yeedhin" buu ugu jawaabay Ceelii. Tani waxay dhacday saddex jeer. Dabadeed Ceelii wuxuu gartay Ilaah inuu doonayo inuu la hadlo Samuu'eel. Ceelii wuxuu Samuu'eel ku yidhi, "Hadduu kuu yeedho inaad ku tidhaahdid, 'Rabbiyow ila hadal, waayo anoo addoonkaaga ah waan ku maqlayaaye" Oo Ilaah baa u yeedhay kol kale, oo u sheegay farriin cajiib ah. Aroortii markii la gaaray ayaa Ceelii yu yeedhay Samuu'eel."Waxa Rabbiga kuu sheegay waa maxay?" ayuu weyddiiyey.Kuraygii Samuu'eelna wuxuu u sheegay waxwalba. Waxay ahayd farriin aad u naxdin badan. – Ilaah wuxuu doonayay inuu baabi'iyo Ceelii reerkiisa oo idil sababtoo ah Hofnii iyo Fiiexaas xumaantooda darteed. Digniintii Ilaah run bay noqotay. Wakhtigii lagu jiray dagaalkii Falastiin, labdiisii wiil ee xumxumaa Ceelii waxay hor wadeen sanduuqii axdiga ciidankii reer binu Israa'iil. Cadowgii waxay qabadeen sanduuqii axdiga oo Xofnii iyo fiinexaas wey dileen iyo qaar badan oo reer Binu Israa'iil ah. Markii uu maqlay Ceelii arrintii, kursigii buu ka dhacay, oo qoorta ayuu ka jabay deedna wuu dhintay isla maalintaa. Sanduuqii Ilaah dhibaato ayuu u keenay reer Falastiin. Waxayna geeeyeen oo dhigeen macbudkii sanamka Daagoon, Ilaahoodii beenta ahaa. Aroortii waxay arkeen Daagoon oo wajiga ugu dhacay sanduuqii Rabbiga hortiisa. Falastiiniyiintii

kor bay u qaadeen daagoon laakiin aroorti dambe waxay arkeen inuu haddan hoos u dhacay.. Wakhtigan Daagoon wuxuu u kala jajabay qayb qayb.Cuduro iyo dhimasho baa aad ugu badatay reer Falatiin dhexdoodii. Waxayna u arkeen haddiiba inuu Ilaah iyaga ciqaabayo, falastiiniyiintii waxay xidheen laba sac oo jiidda kareetada (gaari dameer) sanduuqa Ilaah. Laakiinn waxay u daayeen weylihii. “Haddii lo’da aado xagga sare ee reer Binu Israa’iil, oo ay isaga tagaan weylahooda, waannu garan doonnaa inuu Ilaah sidaa sameeyey,” oo lo’dii xaggii sare ayay aadday. Deedna Samuu’eel, oo iminka nin weynaaday ah, ayaa la hadlay dadkii reer Israa’iil. “Haddii aad ugu soo noqotaan Rabbiga qalbiyadiina oo dhan …….. Wuxuu idinka samatabixinayaa gacanta reer Falastiin.” Dadkii wey addeeceen Ilaah iyo nabigiisii daacadda ahaa. Oo gacantii Ilaahna waxay ku dhacday reer Falastiin maalmihii Smuu’eel oo dhan. (*1 Samuu’eel 1-7)*

**Boqrkii Quruxsanaa Ee Nacaska Ahaa**.

Samuu’eel, xaakinkii iyo hoggaamiyihii Israa’iil wuu gaboobay.wuxuu sameeyey in wiilashiisa xaakino u noqdaan Israa’iil, oo ay la wareegaan jagadiisi u adeegidda Ilaah.. laakiin wiilasha Samuu’eel aad bay u xunxumaayeen.waxay aad u jeclaayeen lacagta oo awoodooda waxay u isticmaali jireen inay ku helaan lacag si xushmadarra ah. Dadkii reer binu Israa’iil aad bay u dhibaatoodeen sababta oo ah xumaantii wiilasha dartood. Maxkamadaha waxaa ka jiray cddaalad darro. Dadkuna wxay ahayd inay lacag siiyaan wiilashii Samuu’eel mar walba oo ay doonaan caawimaad. Waa inay wax dhacaan. Maalin baa, waxaa isu soo ururay odayaasha ree4r binu Israa’iil oo caawimaad weyddiistay Samuu’eel. “Na sii boqr na xukuma” Odayaashii baa ka dalbaday. Ma aysan dooneynin wiilasha xun xun ee Samuu’eel inay xukumaan

iyaga. Waxayna doonayeen sida boqor xukuma quruumaha kale oo dhan. Samuu'eel wuu cadhooday. Israa'iil horay bay way u lahaayeen boqor! Ilaaha Qaadirka ah, Midka abidiyanka ah!, xukumay Israa'iil. Waagii horena ka soo samatabixiyey addoonsigii Masar, una furay badda cas inay ka soo baxsadaan halkaa. Dabadeedna siiyey reer binu Israa'il dhulkaa quruxda badan. Markii uu Samuu'eel baryay Ilaah, Rabbig wuxuu ku yidhi, "Adigu kuma ay diidin, laakiinse anay i diideen, inaanan iyaga u ahaan boqor. Taasoo ahayd iney iga tagaan oo u adeegaan ilaahyo kale. Oo codkooda dgegeyso oo u samee boqor xukuma iyaga." Ilaah wuxuu u sheegay Samuu'eel inuu uga digo dadka boqorkooda dunida inuu ka qaadi doonno lacag canshuur ah Laakiinse dadku waxay doonayeen si walbaba boqor. BOQRTOOYADA BEERTA CANABKA ISKA JIR. Ilaah wuxuu ku hoggaamiyey Samuu'eel inuu wiil dhalinyara ah oo aad u wanaagsan, xishood badan, oo dheer – oo madax walba ka dheer dadka intiisa kale. m agaciisana wuxuu ahaa Saa'uul. Markii Samuu'eel arkay, Rabbiga wuxuu yidhi, "Kan qudhiisa ayaa Dadkayga u talin doonna."Si buuxda oo addeecinimo ku jirta ayuu Samuu'eel u caleema saaray Saa'uul inuu boqor u noqdo reer binu Israa'iil

Markii uu u soo bandhigay Saa'uul reer binu Israa'iil waxay ku dhawaaqeen "Cimrigiisa ha dheeraado boqorka!" Durbadiiba markii la tijaabiyey boqor Saa'uul, Reer Cammoon, kuwii necbaa reer Binu Israa'iil, waxay isku wareejiyeen magaalooyinkii reer Binu Israa'iil ay deganaaye, oo way cabsi galiyeen nin walba indhihiisa hortooda. Muxuu yahay qorshan naxariista daran! Hanjabaaddii cagajugleynta cabsida lahayd waxay gaarta boqr Saa'uul. Ciidankiisiina wuu diyaarsanaa. Markii labdii ciidan ay iska hor imaadeen. Saa'uul wuxuu burburiyiyey ciidankii reer Cammoon oo samata bixiyey magaalooyinkii. Boqor Saa'uul Ilaah buu xurmad iyo sharaf iyo muunadba siiyey, isagoo leh "maanta Rabbiga wuxuu dhamaystiray

badbaadada" Ilaah guul weyn buu siiyey maalintaa Saa'uul. Laakiin Saa'uul marwalba ma xurmeyn jirin Ilaah. Maalin baa, intuusann la dagaalamin Falastiiniyiinta, Saa'uul wuxuu bixiyey allabari Ilaah. Wuxuu ogaa oo uu garanaya shaqadii SAmuu'eel. Isagu wuxuu ogaa Ilaah inuu ka doonayo isaga inuu sugo ilaa uu ka yimaado Samuu'eel inuu sameeyo taa iyada ah. Laakiinse Saa'uul wuu adeeci waayay Ilaah. Markii Samuu'eel yimidna, wuxuu u sheegay Saa'uul "Waxaad samaysay wax nacasnimo ah, oo ma aadan dhowrin amaradii Rabbiga Ilaahaaga ah. iminka boqortooyadaadu ma sii jiri doonto." Saa'uul laga yaabe inay la ahayd dembi yar. Laakiinse caasinimada Ilaah waa wax daran. Wakhti kale oo waxaa jiray, Inn Ilaah Saa'uul amar ku siiyey inuu baabi'iyo dadkii xumxumaa reer Camaaleq. Laakiin saa'uul iyo dadkii way reebeen boqor Agag nolol ku ahaaday Camaaleq. Xitaa wali way qabsadeen waxwalboo qiimo lahaa,, idihii iyo dibiyadii. Saa'uul wuxuu yidhi waxay u qabsadeen wayaalahan oo dhan in ay ku allabaryaan Rabbiga. Samuu'eel wuxuu ku yidhi Saa'uul, "Adeecidda waa ka wanaaggsan tahay allabariga. Waxaad iska diiday ereyga Ilaah, Isna wuxuu kuu diiday inaad boqr u ahaatid reer binu Israa'iil" Saa'uulna aad buu uga xumaaday dembigii. Lakiinse wuu la soo daahay. Intii ka hadhsanayd noloshiisa oo idil ma faraxsanayn, sababtoo ah isagu ma ussan adeecin Rabbig. (*1 Samuu'eel 8-16)*

### Gabadhii Nooleyd Labada Jeer

Yayros wuxuu ahaa mid ka mid odayaasha diinta Yuhuudda oo Ilaah caabudo oo dadka kalana baro Ereyga Ilaah. Maalin baa, waxaa la soo gudboonaatay dhibaato Yayros. Gabadhisii uu jeclaa, oo da'deedu laba iyo toban sanado jir keliya ahayd ayaa aad u buktay. Waxayna u muuqatay inaysn jirin cid caawin karaysa iyad. Aad

bayna u buktay, Yayros wuu ogaa inay dhimanayso. Qof keliyaata ayunbaa caawin kara gabadhiisa Yayros. Waxaa u suurta gashay Yayros inuu helo Ciise oo uu keeno gurigiisa. Yayros laga yaabaa inuu saaxiibadisii culimada diinta inaysan aqoonsanayn Ciise, laakiinse Yayros waxba kama galin taasi. Waxaa u drnayd inuu helo caawimaad degdeg ah inta aysan dhiman gabadhiisa.

Yayros wuxuu Ciise arkay Isagoo dad badan ku hareeraysan yihiin. Cagahiisii ayuu isku riday. “Gabadheedii yarayd waa sakaraaad” Ninkii rajo la’anta ahaa baa ku baryootamay sidaa. “Kaalay oo gacmahaaga saarinay bogsato oo noolaato.”

Ciise wuxuu raacay Yayros. Laakiin dadkii badnaa dartoood ma aysan uga dhakhsan sababta oo ah meeshaa waxaa ka jiray saxmad weyn oo cidhiidhi badan baa jiray. Naag baa ilaa laba iyo toban sanadood xanuunsanayd, oo dhakhtar walba way u tagtay (oo lacag badan bay ku bixisay) wax caawimaad ama dawo ah na kama aysn helin. Alla, sida ay u doonaysay inay Ciise aragto!

Maxay samayn kartaa naagtaa? “Haddii aan dharkiisa iska taabto uun, waan bogsanayaa,” Naagtii sidaa bay ku guryaantay ama ku guuxday. Iyadoo siqeyso ayay Ciise ugu timid meel ay ka gaari karto. Dabadeed intey gacanteda fidisay, ayay taabatay khamiiskiisii.

Waa mucjiso! Waa MUCJISO! Naagtii way bogsootay! Si buuxda ayay u garatay ama u ogaatay inay caafimaaday oo xoogeysatay gabi ahaanba. Laakiin dabadeed cod dheer lagu hadlay. “Yaa i taabtay?” Ciise ayaa weyddiiyey dadkii ku xoonsanaa isaga. Laakiin garatay inay bogsootay ayuu doonayay Isaga inay u sheegto waxyaalah ku saabsan. Isala saacaddiiba way u sheegtay Isaga sheekadii oo idil.

Isla markii, shaqaalihiii gurigii Yayros baa yimid. Wajigoodana waxaa ka muuqday murugo inta aysan hadlin ka hor. “Gabadhaadii waa dhimatatay!” ayay u dheegeeen Yayros. Dhimatay! Waxay ahayd wax soo raagay. Laga yaabaa, haddii naagtii ayna daahinin

arrinta …… laga yaabee, haddii ….. Dhimato! Yayros gabadhiisii yareyd qiimaha lahayd way tagi lahayd.

Markii Ciise maqlay taa iyada ah, ayuu ugu jawaabay, "Ha baqin ee iska rumeyso, oo caafimaad bay heli doontaa." Sida ay ugu adagtahaya Yayros inuu runtii rumeysto Ciise. Gabadhiisii way dhimatay.
Gurigiina, qofwalba wuu ilmeynayay oo waxaa loo murugeysnaa geerida gabadha. "Gabadhu ma dhiman, waase huruddaa," ayuu Ciise ku yidhi iyagii. Iyaguna aad bay ugu qosleen. Wey ogaayeen oo hubeen inay gabadhu dhimatay oo maydkeeda yaalo. Ciise kulligood dibadda ayuu isaga saaray, gacantii gabadha yaryad ayuu qabtay oo ku yidhi "Gabadha yareedey waxaan ku leeyahay kac" Yayros meesha wuu joogay, naagtiisa wey joogtay. Saddex ka mid ah xertii Ciise na way joogeen. Dhamantood wey maqlayen ereyadii Ciise gabadhii yareyd miyey maqleysay iyadana?
Gabadhii dhimatay way maqashay amarkii Ciise. Ruuxeediina wuu soo noqday, oo durbadiiba way kacday. Ciise wuxuu ka soo sara kiciyey dhaimashadii. Waalidiintii gabadhana wey amkaageen oo yaabeen. Ciise wuxuu ku yidhi gabadha siiya wax ay cunto. Bal eega sid ay u farxeen, iyo siday ugu mahad celiyeen Ciise. Jacaylkiisa cajiibka ah iyo xoogga uu gabadhooda uga soo celiyey geerida.
Markos 5, Luukos 8

## Ciise Wuxuu Bogsiiyey Nin Indha la'

Bartimayos (bar-ti-ay-us) wuxuu ahaa nin indha la', wuxuu ag fadhiyey jidka geeskiisa meel u u dhow Yeroxoo. Wuu dawarsan jiray. Dadka qalbiga jilicsan waxay u ekaayeen inay siiyaan waxoogaa lacag sanuud ah ama inyar oo cunto ah kolkay meshaa marayaan. Bartimayos ma uusan shaqaysan karin sabata oo ah

waxba ma uusan arkayn. Wuu dawarsan jirey un. Maalin baa, waddada weyn maalin ay mashquulsanayd. Bartimayos wuxuu maqlay sawax iyo dhawaaqa caged badan. Wax aan caadi ahayn baa dhacaya. Durbadiiba ninkii indhaha la’aa waxa uu ogaadaya waxaa wax ay yihiin.
Ciishii reer Naasaret baa magaalada joogay. Dadkiina waxay isugu sii ururuyeen inay arkaan Ciise, oo maqlaan Isaga. “Ciise, ina Daa’uudow, ii naxariiso.” Maxaa wacay inuu ugu qayliyo Bartimayos? Maxaa wacay inuu ku fikiro inuu isaga caawin karo Ciise? Lagayaabee inuu maqlay kuwa kale inuu bogsiiyey Ciise. Qaar wey dhaga la’aayeen, qaar way carrab la’aayeen, qaar curyaamiinnbay ahaayeen, qaarna wey indha la’aayeen, sidiisoo kale. “Ciise, Ina Daa’uudow, ii naxariiso,”Bartimayos sidaasuu ku qayliyey. Codkiisana ku celceliyey si rajo leh. Bartimayos hal shay buu hubay. Hadda haddii uusan caawimaad helin, isaga fursaddan oo kale ma heli doonin. Laga yabee inuusan mar kale soo mari lahayn jidkan Ciise.

Bartimayos wuxay ahayd inuu gaaro Ciise. Laakiin dadkii maysan dhaqaaqin “Ssssshhh” bay ku yidhaadeen. Waxayna ugu dageen inuu aamuso. Laakiinse Bartimayos ma uusan aamusin. Wuuu sii kordhiyey qayladii. Durbadiiba wuu istaagay! Maqlay! Wuxuuna amar ku bixiyey in loo keeno ninka indhaha la’! “Kalsoonow,” ayay ku yidhaahdeen dadkii. “ Kac wuu kuu yeedhayaa”

Intuu maradiisii iska tuuray, ayuu kacayoo u yimid Ciise. “Maxad dooneysaa inaan kuu sameeyo?” Ciise ayaa weyddiiyey. Sidee baad ugu jawaabi? Ma waxaad weydiisanaysaa lacag fara badan ama dhar cusub? Ma sidaa buu Bartimayos doonayay? Maya, Indhoolihii Bartimayos ma uusan weyddiisan dahab iyo dhar cusub toona. Waaad taqaanaa waxa uu doonayo isagu. “Sayidow, inaan wax

arko.” Bartimayos wuxuu doonayay inuu wax arko! Inuu arko geedaha iyo shimbiraha iyo wax walboo quruxsan ee uu Ilaah abuuray. Wuxuu doonayay inuu wax arko si uu isu ilaaliyo/daryeelo isaga qudhiisa oo uusan baryootimin.
Deedna Ciise ayaa ku yidhi Bartimayos: “Hel aragaagii. Rumeysadkaaga ayaa ku bogsiiyey”
Mar unbuu aragiisii helay, oo raacay Ciise. Waxa keliya uu yidhina waxay ahayd “ Ilaahay waa cajiib”
Dadkii oo idil, markii arkeen taa iyada ah, Ilaah bay amaaneen. Mar labaad, waxay arkeen mucjisada awoodda xoogga Wiilka Ilaah, Ciise, uu araga ugu keenay miskiinkii indhaha la’aa ee dawarsan jiray. (*Markos 10, Luukos 18, Yooxanaa 9)*

## Ciise wuxuu Cunto Siiyey 5000 oo Qof

Qaar badan oo ahaa hoggaamiyayaasha diinta (Faarisiin) been bay ka sheegayeen waxyaalaha ku saabsan Ciise. Qaarkood xitaa waxay isku dayeen inay dilaan Isaga. Mana aysan aaminsanayn Isagu inuu yahay Wiilka Ilaah. Iyagu ma aysan aqbalin xitaa inkasta oo uu mucjisayaal fara badan tusay oo ku caddeeyey inuu yahay Wiilka Ilaah. Maalin baa, Ciise u soo gudbay dhanka kale ee badda Galili. Lagayaabe, inuu doonayay inuu kaga yara nasto dadkii badanaa ee mar walba ku ag hareersanaan jiray Isaga. Laakiin dadkii badnaa durbadiiba wey heleen meesha uu joogay. Waxayna ogaayeen inuu sameeyey mucjisooyin waaweyn. Waxay doonayeen iniay la joogaan. Ciise wuxuu u hoggaamiyey xertiisa buurtaa cidlada ah dusheeda meeshaasuu la fadhiyey, waxna ku barayey. Tartiib tartiib bay dad badan u imnayayeen. Durbadiiba waxaa la gaaray xilligii wax la cuni lahaa. Cidwalbana gaajaa qabatay.

Ciise wuxuu eegay dadkii badnaa. “Xaggee baan kibis ka so iibanaa kuwan ay cunaan” ayuu weyddiiyey Filib. Meel raashin lagu iibiyo kama dhowa meeshan. Muxuu yahay qorshah uu Ciie samayn karo. “Xagee baan kibis ka so iibanaa kuwan ay cunaan,” Filibb wuu u jawaabay Ciise. Ciise iyo xertiisa lacag ku filan ma aysan haysanin. Mid kaloo xerta ka mid ah, Andros (Butros walalkii) ayaa yidhi. “Halkan waxaa jooga wiil qaba shan kibsood oo shaciir ah iyo laba kaluun...” “..Laakiinse maxayse u tarayaan dad sidan u badan?” Andro ma uusan u arkeen qadadan in dad badan lagu quudin karo – xitaa haddii uu doono wiilka yar inuu siiyo qadadiisa Ciise.

Ciie wuxuu yidhi, “Dadka fadhiisiya.” Dadkii way fadhiisteen, qiyaasta tiradoodana waxay ahayd ilaa iyo sahn kun. Hayaay! SHAN KUN! Xitaaa taasi tirade kuma jiran dumarka iyo caruurta ee meesha jooga.
Waxaana ku xigay, Ciise inuu kibistii qaado, wiilkii yaraa wuu rumeysanaa Ciise. Mana uusan garanaynin sababta Ciise u doonayo qadadiisa, ama waxa Ciise uu ku samaynayo. Laga yaabee isagu inii ku fikiray, “Haddii aan qadayda bixiyo maxaan cunaa” laakiin siday ahataba wuu wuu siiyey Ciise.
Deedna, Ciise wuu salad buu ugu mahad naqay Ilaah. Shantii shaciir ee kibista ahayd iyo labdii kalluun? Haa! Ciise yidhi “Mahadsanid” Ilaahow oo wuxuu weyddiistay inuu barakadeeyo cuntadan.
Saladdii ka dib, Ciise kibistii iyo kalluunii qaaday oo kala jajabiyey oo siiyey xertiisii inay u qaybiyaan dadkii badnaa. Taasi bayna ahayd dadkii markay arkeen mucjisada Ciise ku sameeyey mid walba oo cunto doonayey inuu cuno. Haayoo kibistii iyo kalluunkii wey ku filaatay.

Markii qof walba la quudiyey, waxaa soo hadhay kibis iyo kalluun hamba ah. “Waa la ururiyey jajabkii hadhay si aysan waxba u

hallabin" Ciisena wuxuu ku yidhi xertiisii. Waxay buuxiyeen laba iyo toban jajabkii hambada shanti kibisood ee ka soo hadhay dadkii cunay. Maalintaa, wuxuu ku quudiyey in ka badan dad 5000 oo qof qadadii wiilka yaraa watay. Waa kalana 4000 oo qofood buu ku quudiyey toddoba kibsood iyo inyaroo kalluun ah.Markii ay daka caadig ah arkeen calaamooyinkan. Mayna ka cadhoonin sida Faarisiinta. Waxayna yidhaahdeen, "Runtii kanu waa nebiga dunida iman lahaa." Weyna granaynayeen inuu Ciise yahay Badbaadiyaha Kii ku imnayay ballantii Ilaah eek u jirtay Ereyga qudduuska ah e Ilaah. (*Yooxanaa 6)*

**Daa'uud Wiilkii Idejireha ahaa**

Wakhti sii horreeyey, maalmihii Saa'uul Israa'iil boqrka u ahaa, waxaa jiray wiil magaciisa la odhan jiray Daa'uud oo caawin jiray toddoba ka mid ah walaalihii oo xoolaha raaci jiray. Inkasta oo ahaa kii caruurta ugu yaraa, Daa'uud xoog buu lahaa, wiil geesi ah oo jecel oo aaminsan Ilaah. Wuxuu ku noolaan jiray magaalada Beytalaxam. Mar alla markii uu libaaxa soo weeraro idaha oo uu qabsado nayl yar si uu ugu casheeyo. Wiilkii yaraa ee Daa'uud wuxuu isna weerari jiray kan wax soo weeraray. Oo afkiisa ayuu kala soo bixi jira, oo intuu ku boodo ayuu gadhka ku dhago ayuu dili jiray. Daa'uud wuxuu garnayay inuu Ilaah caawiyo. Samuu'eel, nabigii Ilaah, weli wuu ka xumaa in Saa'uul six un uga dhacay Ilaah. "War ilaa goormaad Saaa'uul u ooyeysaa" Ilaah wuxuu xaarxaadhay Samuu'eel. "Waxaan kuu dirayaa Yesay ….., Waayo boqr baan wiilashiisa ka dhex doortay." Yesay wuxuu ahaa Daa'uud Aabbihii. Xitaa inkastoo uu Samuu'eel ogaa Boqor Saa'uul laga yaabo inuu dilo isaga si uu u helo boqr kale, nabigii wuu adeecay Ilaah. Markii uu yimid Samuu'eel, Yesay toddobadiisii wiil buu soo hor mariyey Samuu'eel. Oo Samuu'eel Yesay wuxuu ku yidhi,

“Weli waxaa hadhay Daa’uud.” Kii ugu yaraa.oo iduhuu ilaalinayaa, waxay keeneen Daa’uud oo Rabbigana wuxuu yidhi, “kac oo subag isaga, waayo, kanu waa isagii.”
Qasrigii Saa’uul dhexdiisii, Ruuxii Rabbiga wuu ka dhex baxay Saa’uul oo wuxuu noqday nin dhibaateysa. Adeegayaashiisii waxay is yidhaahdeen malaha maskaxdiisa waxaa dajin kara in loo garaaco miyuusik halaasan. Mid ka mid ah wuxuu garanayay wiil dhalinyara ah oo si wanaagsan u tuma xargaha qalabka muusikada lagu tumo. Miyaad qiyaas ahaan garan kartaa ninkaa dhalinyarada ah? Haa, Daa’uud.
Muusikadii Daa’uud way dejin jirtay Saa’uul oo wey ka caawin jirtay inuu si hagaagsan u fikiro. Saa’uul wuxuu weyddiistay Yesay inuu Daa’uud joogo oo ka mid noqdo adeegayaasha boqorka. Hadba kolkii Saa’uul uu isku buuqo ama cabsi ay soo wajahdo, Daa’uud baa u garaaci jiray muusikadiisa halaasiga ah ee xargaha lagu tumo. Weyna caawin jirtay.

Ka dib markii Daa’uud uu aqalka aaday, Saa’uul waxaa soo wajahay dagaal weyn oo ay lala dagaalamayo reer Falastiin. Daa’uud walaalihii waxay ka qayb ka ahaayeen ciidmadii Saa’uul. Yesay baa Daa’uud u diray jiidda hore ee dagaalka si uu cunto ugu geeyo walaalihii oo soo ogaado xaaladooda.
Cimlaaqi (Nin) aad u weyn oo ah Falastiini ah, Goli’at, oo ay ka cabsadeen ciidankii Israa’iil oo dhan.
“Nin iska soo doorta ii soo baxa aniga, oo ha soo dhaadhaxco” Ayu Goli’at ku qayliyey. “Oo hadduu awoodo inuu i dilo, markaas waxaad noqoneynaa addoomadiina. Laakiin haddaan dilo isaga, markaa waxaad noo noqoneysaan addoomadeena.” Raggii dhamaaq ree binu Israa’iil. Markii ay arkeen ninkan cimlaaqan weyn ah, wey ka carareen isagii, oo aad bay uga cabsadeen.

Dabadeed Daa'uud wuxuu ku yidhi Saa'uul, "nina yyusan u cabsan; anoo addoonkaaga ah Ayaan u tagi doonaa oo la diriri doonaa midkan rer Falastiin ka ah." Saa'uul wuxuu doonay inuu u labiso dharkiisii askarta, seeftiinii ugu xidhay. Taas bedelkeedii Daa'uud iska qaatay ushiisii yareyd wuxuuna dhulka ka gurtay shan dhagxood oo ku ritay koleygiisii. Goli'at wuu ku qoslay, markii uu arkay Daa'uudkan yar oo xitaa soo xidhan karin dharka dagaalka. "Hilibkaaga haaadka hawada iyo dugaaga duurka Ayaan siin doonaa!" ayuu ku dhawaaqay. "Anigu se waxaan kuula imid magaca Rabbiga ciidamada!" ayuu Daa'uud ugu jawaabay. "Maanta Rabbiga gacanteyduu ii kaa soo galin doonaa …..Waayo dagaalku waa kii Rabbiga." Deedna Daa'uud wuxuu si toos ah ugu orday meeshuu joogay Goli'at. Wuxuuna ku riday hal dhagax oo uu kala soo baxay koleygiisii. Wajiga fooddiisa ayuuna kaga dhacay. Goli'at na gadaal-gadaal ayuu dhulka ugu dhacay! Daa'uud durbadiiba seeftiisii weyneyd ee Goli'at ayuu ka soo saaray oo madaxa kaga jaray. Markii ay arkeen Falastiiniyiintii Goli'at oo dhintay, naftoodii bay la careen.
Boqr Saa'uul ma uusan xasuusanayn inuu yahay Daa'uudkan kii u garaaci jiray muusikada kabanka ahayd. Oo tilye wuxuu uga dhigay ciidamadii – deedna wuu ka hinaasay markii dadkii ay maamuuseen guushii Daa'uud. "Iminka maxaa intaas ka badan oo uu heli lahaa boqrtooyada mooyaane?." Saa'uulm baa sidaa ku fikiray. Oo Saa'uul maalintaas dabadeed Daa'uud si xun buu fiirin jiray. Mar kale, Boqor Saa'uul maskaxdiisi wey isku buuqday. Oo Daa'uud baa u tumay muusikadii isagoo isku dayayo inuu dajiyo isaga. Saddex jer buu Saa'uul waran ku tuuray Daa'uud, laakiin Daa'uud marwalbaba wuu ka baxaday. Saa'uul wuxuu ka cabsaday Daa'uud, sababtoo ah wuu ogaa inuu Rabbigu la jiro isaga, laakiin wy ka maqnayd taasi Saa'uul qalbigiisa. Laakiin Yoonataan wiilkii Saa'uul, wuxuu u jeclaa Daa'uud sidii walaalkii oo kale. "Aabbahay

Saa'uul wuxuu doonayaa inuu ku dilo" ayuu uga digay Daa'uud. Deedna Daa'uud wuu baxsaday. Naagtiisii ayaa sanam dad u eg sariirtiiisii saartay, oo Daa'uud daaqadda ka dajisay habeen badhkii. Markii raggii Saa'uul aroortii yimaadeen, Daa'uud ma joogin.
Daa'uud wuu ka baxsaday Saa'uul. Intii uusan wax samayn, isaga iyo Yoonataan waxay wada galeen oo dhigteen axdi. Waxayna ku ballamaeen inay mar walba is caawiyaan midba midka kale.
Si muruge leh, bay labadii saaxiibo isu yihdahdeen nabadey oo kal tageen, Daa'uud wuxuu iska aaday meel uu ugu noolaan karo cabsi la'aan oo ciidanka Saa'uul ayna ka soo heli karin. (*1 Samuu'eel 16 -20)*

## Boqor Daa'uud

Daa'uudkii dhalinyarada ahaa baxsad buu ku jiraa. Saa'uul baa doonaya inuu dilo. Daa'uud wuxuu ku nool yahay cidlada, god weyn baa waxaa kula jira afar boqol oo wiil. Marar qaa, Saa'uul ciidankiisa inta badan wey helaan iyaga. Laakiin Daa'uud wuu ka warwareegaa. Adeehigii Saa'uul, Doo'eeg ayaa u sheegay boqorka in wadaaddada ay caawiyeen Daa'uud inuu baxsado. Saa'uulna amar buu ku bixiyey in la laayo. Laakiin Do'eeg keligii ayaa doonayay inuu taa sameeyo! Si xun buuna u gumaaday shan iyo sideetan wadaad iyo xaasaskoodii seeftiisa marsiiyey. Wax aad u xun bay ahayd.
Maalin baa, Saa'uul oo raadsanaya Daa'uud soo maray meel aad ugu dhow godkii - meeshuu Daa'uud iyo raggisiii isku qarinayeen. Saa'uul keligii buu ahaa! Godkii gudihiisa, Daa'uud si sahlan buu u dili karayey Saa'uul. Intii uu sidaa samayn lahaa, intuu aad ugu dhowaaday ayuu hoos ahaan aayar ka goystay darafka Saa'uul khamiiskiisii. Markii u ka tagay meesha Saa'uul, Daa'uud wuu Daa'uud wuu ka daba qayliyey isagii. "Waxaan gooyey daqrafka

khamiiskaaga, kumana dilin, haddaba ogow inaynan gacantayda ku jirin shar xadgudub toona ……” Saa’uul wuxuu sheegay inuu ka xunt yahay isku daygii waxyeelada Daa’uud. Laakiin isla kolkiiba, cadhadiisii gaamurtay baa dib ugu soo laabatay oo saddex kun oo nin buu u diyaarshay inay Daa’uud soo dilaan. Habeen baa waxaa dhacday, intii ay ciidankii hurdeen, Daa’uud iyo Abiishay, mid ka mid ahaa askartiisii, u duseen xeradii meeshuu Saa’uul hurday. “Maanta Ilaah wuxuu kuu soo gacan geliyey cadowgaagii,” Abiishay ayaa sidaa yidhi. “Fadlan ii daa aan waeemo mar keliya aan dhulka ku qodbee: oo mar labaad ku dhufan mayo.” Wuu ka diiday Daa’uud. Wuxuunna ka qaatay warankii Saa’uul iyo kusadii biyaha ee Saa’uul, wuuna ka tagay xeradii. Dhanka kale intuu u gudbay ayuu istaagay buur iyaga in yar ka fog waddadeeda, Kolkaasaa Daa’uud dhawaaqay ilaa uu ka maqlo isaga codkiisa.Markii mar kale arkay inuu Daa’uud dili karay isaga, laakiin uu sidaa samaynin. Markii mar kale, Saa’uul yidhi inuu ka xunyahay isku daygii waxyeelada Daa’uud dilkiisa. Laakiinse Daa’uud wuu ogaa inuusan aaminayn erayga Saa’uul.

Wakhtigaa Samuu’eel wuu geeriyooday. Wuxuuna ahaa nabigii Ilaah u sheegay inuu subko Saa’uul, ka dib Daa’uud boqorka Israa’iliyiinta. Markii Falastiiniyiintii ay soo weerareen Israa’iliyiinta, Saa’uul wuxuu sameeyey wax xun, wax Rabbiga uu xaarantimeeyey. Wuxuu amar ku bixiyey in loo soo kiciyo Samuu’eel meeshuu uu ku dhintay, habeenkas, Saa’uul wuxuu helay farriin. “Oo Rabbiga kaa tagay oo u col kuu noqday ….. Rabbiga boqortooyadaadii gacantaada wuu ku dildilaaciyey oo wuxuu siiyey deriskaaga, kaasoo ah Daa’uud. Oo berito adiga iyo wiilashaadaba anigaad ila joogi doontaan. Oo weliba Rabbiga wuxuu adig iyo reer binu Israa’iilba u gacan gelin doonaa reer Falastiin.” Markii uu taas maqlay Saa’uul, wuxuu la suuxay cabsi aawadeed. Falastiiniyiintii

waxay la dagaalameen Israa'iliyiintii, oo raggii Israa'iliyiinta way kala baxsadeen. Falastiiniyiintii waxay dileen wiilashii Saa'uul, oo uu ku jiro Yoonaatoon, Daa'uud saaxiibkiisii wanaagsanaa. Saa'uul qaansooleydii aaawadeed ayuu dhib badan ula kulmay. Wuxuuna ku yidhi kii hubka u siday, "War seefta la soo bax oo igu mudhbixi, waaba intaasoo buuryaqabkii intay seef iga mudhbixiyaan i caayaan." Laakiin kii hubka u siday wuu diiday, waayo, aad buu u cabsaday. Sidaa daraadeed, Saa'uul wuxuu qaatay seeftiisii, markaasuu ku dul dhacay.

Heliddii maydkii Saa'uul iyuo wiilashiisii, Falastiiniyiintii waxay dhigeen maydkiisii magaaladii laga qabsaday Israa'iliyinta derbigeeda, qaar dhiiran oo ka mid ah raggii Israa'iliyiinta ayaa maydkii ka soo furtay meeshaa, una qaaday xaafaddii deedna ku gubay oo ku aasay wixii ka soo hadhay deegaankii Israa'iil. Markii uu Daa'uud maqlay warkaa xun, wuu u murugooday oo ilmeeyey oo soomay ilaa gabal dhicii Saa'uul, wiilkiisii Yoonatoon, iyo dadkii Ilaah, sabata oo ah waxay ku dhaceen oo ku dhamaadeen seef. Xitaa inkastoo Saa'uul isku dayay inuu dilo Daa'uud, haddana Daa'uud wuu xurmeeyey Saa'uul sidii Ilaah u subkaday mar un ilaa ugu dambeyntii. Iminka Ilaah baa sharfay Daa'uud, kana dhigay isaga boqor meeshii Saa'uul ku bedelay. (*1 Samuu'eel 24-31, 2 Samuu'eel 1-2)*

## Boqor Daa'uud (Qaybta 2)

Daa'uud wuxuu ahaa boqorla Yuhuudda, dhanka koonfureed ee Israa'iil. Intii kale eek a hadhsanayd Israa'iil waxaa qaatay Iishbosheet oo ahaa wiilkii boqr Saa'uul. Dagaal sokeeya ayaa qarxay oo socday toddoba sanadood. Laakiin xoog aad iyo aad buu u sii korayey oo xoog u yeelanayay. Ugu dambayntii IIshboshet waxaa dilay laba askari oo ka mid ahaa ciidankiisii. Intaa dabadeed,

dhamaan qabaa'iiladii reer binu Israa'iil baa u wada yimid Daa'uud oo u caleemasaartay - (u subkay) inuu isaga boqor u ahaado. Waxayna ku soo biyo shubatay, in Daa'uud boqor u noqday qarankii oo idil. Wixii ugu horreeysay ee uu qabto boqor Daa'uud waxay ahayd inuu qabsado magaalada Yeruuussaalem. Oo noqotay in loogu yeedho caasimaddii Daa'uud. Dib u dhis buu ku sameeyey inay saldhig lagaga hortago cadowga u noqoto. Waxayna noqotay Yeruusalem, meel ciidanka Daa'uud ay kaga weeraraan Falastiin iyo cadowyada oo kale oo dhan. Waxaa ku xigay, boqor Daa'uud inuu Sanduuqii Axdiga Rabbiga keenay Yesruusaalem. Sanduuqa axdigii Rabbiga waxaa ku jiray nuquladii Tobankii Amar ee Ilaah iyo sharciyo Ilaah Muuse siiyey. Sanduuqa Axdiga Rabbiga reer binu Israa'iil wuxuu xasuusinayay qudduusnimada Ilaah iyo muhiimadda in la addeeco Isaga. Daa'uud dagaalo farabadan buu galay sanadihi ugu horreeyey xukunkiisa. Wuxuuna ahaa askari xigmad leh oo ah nin ishooseysiiya oo hoggaamin Ilaah ka baryo. Waxaa arbushay Daa'uud naftiisa inuu isagana ku jiro guri aad u qurux badan oo uu ku noolaado, halka sanduuqii axdiga ee Ilaah iska sii yaalay teendhadii. Daa'uud wuxuu go'aansaday inuu macbud u dhiso. Naataan, nabigii Ilaah, ayaa u sheegay inuu sidaa sameeyo. Habeenkaa, uu Ilaah farriinta u soo diray Daa'uud. "Adeegahayga Daa'uud,, Rabbiga aqal buu kuu dhisi doonaa. Kolkii maalmahaada dhamaday waxaad la nasan doontaa aabbayaashada, waxaa ilmahaaga ka dhigi doonaa boqor adiga ka dib, wuxuu dhisi doonaa guriga sababta Magacayga oo waxaan askumi doonaa kursiga boqortooyada weligeed ah" Daa'uud wuxuu doonayay inuu caawiyo intii ka hadhay ee noolayd qoyskii Saa'uul. Wuxuuse helay oo kaliya inan uu dhalay Yoonatoon, Mefiiboshet, oo curyaan ah. "Isagu miiskayguu had goor wax ku cuni doonaa sidii wiilasha boqorada," Daa'uud baa sidaa yidhi. Daa'uud aad buu ugu roonaaday Mefiiboshet sababtoo ah Yoonatoon ayaa saaxiibkii

lilaahiga ahaa. Intii hore ee uu Daa'uud Ilaah aaminsanaa oo uu addeeci jiray, Ilaah Daa'uud wuu caawin jiray oo taajir buu ka dhigay. Laakiin maalmaha maalin ka mdi ah baa waxaa hadheeyey dhibaato ku dhacday nolosha Daa'uud. Ciidankiisii buu dibadda u diray inay soo dagaalamaan, Halka uu isaga Yeruusaalem iska joogay. Habeen buu intuu hurda waayay, u baxay xagga sare ee aqalkiisa inuu ka daawado caasimadda.

Daa'uud wuxuu arkay naag qurux badan oo maydhanaysa. Magaceeda waxaa la odhan jiray Batshebac Daa'uud wuu ku dambaabay Batshebac xitaa inkastoo uu ninkeedu, UUriyaah ahaa askarta Daa'uud kan ugu geesisnaa. Ka dib markii ay Batshebac u sheegtay Daa'uud inau ilmo u sido isaga, Daa'uud wuxuu gartay inuu sii abuuri karo dhibaatooyin kale oo dheeraad ah. Halkii uu Ilaah uga qiran lahaa, ayuu Daa'uud ikudayay inuu qariyo dembigiisa. Taa weligeed ma shaqaynayso!
Wuxuu u yeedhay Uuriyaah inuu ku soo noqdo gurigiisa oo uu ka soo baxo goobta dagaalka, isagoo filayay Uuriyaah sida fikirkiisa ahaa inuu ilmaha dhalanayay uu noqdo kiisa. Laakiinse Uuriyaah kuma soo hoyan gurigiisa inta ay askarta ciidamadiisa ku jiraan dagaalka. Uuriyaah wuxuu iska seexday albaabka aqalka boqortoyda hortiisa. Haddaba Daa'uud wax ka sii daran buu ku kacay. Uuriyaah wuxuu u diray goobtii dagaalka oo warqadna wuu u sii dhiibay. Warqadu waxay u sheegeysay generaalka inuu hubiyo Uuriyaah inuu ku dhinto jiidda hore ee dagaalka. Markii Uuriyaah la dilay, Daa'uud wuxuu qaatay oo uu guursaday Batshebac inay naag u noqoto. Ilaah wuxuu u soo diray adeegihiisa, Naataan, inuu tuso Daa'uud dembigiisa. Naataan wuxuu u sheegay Daa'uud sheeko ku saabsan nin taajir ahaa iyo nin faqiir ahaa oo miskiin ah. Ninka taajirka ah wuxuu haystay boqol neefoo ido' ah. Laakiin ninka miskiinka ahaa wuxuu lahaa nayl yar qudha, oo uu ugu

xisaabtamayay sidii gabadhiisa. Markii ay socotadii u timid ninkii taajirka ahaa, ninkii taajirka ahaa uma uusan qalin hal neef oo ido’hiisa ka mid ah kumna quudin mrtidii, intii uu saas yeeli lahaa, wuxuu ka soo qaaday oo u qalay ninkii miskiinka ahaa nayshiisii. Daa’uud wuu ka cadhooday axmaqnimadii ninkii taajirka ahaa. Wuxuuna ku qayliyey, “ninkan waxakawn sameeyey wuxuu istaahilaa dhimasho.” “Ninkaas waa adiga” geesigii Naataan baa sidaa ku yidhi Daa’uud. Wixii Daa’uud sameeyey baa aad uga sii xumaa wixii ninka taajirka sameey ee sheekada ku jirtay. Ilaahay Daa’uud wuxuu tusay inta ay la’egtahay xumaantii uu sameeyey. Oo Daa’uud aad buu uga xumaaday dembigii. Wuxuu ku yidhi Ilaah “Adiga keliya ayaan kugu dembaabay, oo waxaan sameeyey wax hortaada ku xun.” Oo Ilaah wuu ka cafiyey dembigii Daa’uud. Laakiin ilmihii Batshebac aad buu u bukooday, oo durbadiiba markii uu dhashayba wuu dhintay. Ilaah wuu ka cafiyey Daa’uud dembiyadiis darnaa. Batshebac ilmo kale ayay uuraystay, oo kii kolkii dambe noqday boqor weyn tii Daa’uud ka dib. Laakiinse boqor Daa’uud caruur badan oo kale ayuu lahaa, qaar ka mid ahna dhibaato weyn oo laga xumaado ayay isaga u keeneen.
*(2 Samuu’eel 1-12)*

## Ciise iyo Laasaros

Maryan iyo Maarta wey welweleen. Walaakood Laasaros ayaa bukay. Gabdhihii walaalalaha ahaa waxay ogaadeen in Laasaros lagayaabe inuu dhakhso u geeriyoodo. Dabadeen ciise ayay farriin u dirsadeen. Wuun ajeclaa qoyskan yar ee ka yimid reer Beytaniya. Markii Ciise maqlay waxyaalihii ku saabsanaa Laasaros xertiisii wuxuu u sheegay, “Bukaankanu ma aha kii dhimashada” inkastoo Ciise fogaan maylo badan u jiray meeshaas, Isagu wuu ogaa sida ay tahay iyo waxa meeshaa ka jira oo ku dhacay Laasaros.

Ciise laba cisho ayaa la sugayay intuusan tagin Beytaniya. Deedna xertiisii waxuu ku yidhi wax ay ku wareereen inay fahmaan.Laasaros waa dhintay. “Laasaros waa dhintay. Aniga waan ku farxsanahay aawadiin inaan halkaas joogin si aad u rumeysataa” Maxay yihiin hadalada qalafsan micnahooda? Maxayse tahay qorshaha Ciise damacsan yahay inuu sameeyo? Markii uu yimid Ciise Beytaniya, Laasaros afar cisho buu mootanaa. Maydkiisi, karfan baaa lagu duuduubay oo iilka qabriga ayaa la dhigayba.
Maarta waxay u tagtay Ciise. “Walaalkaa waa la soo sara kicin doonaa” ayuu Ciise ku yidhi. “Waan garanayaa in maalinta ugu dambaysa la isa soo sarakicin doono,” Maarta ayaa sidaa ugu jawaabtay. Waxay ku fikirtay in ilaa iyo yoomal aakhiro maalinta ugu dambeysa dunda ay arki doonto Laasaros mar kale.
Laaakiin Ciise wuxuu ugala jeeday micno wax ka duwan micnahaas “Anigu waxaan ahay sarakicdda iyo nolosha,” Ciise ayaa sidaa ku yidhi Maarta. “Kii i rumeystaa, in kastoo uu dhinto, wuu noolaan doonaa.” Maarta wey rumeysnayd Ciise. Weyna ogaydIsagu inuu yahay Wiilka Ilaah. Laakiin siday bay ku dhici kartaa inuu caawiyo Laasaros? Cidwalba way murugeysneayd sababta oo ah geeridda Laasaroos. Walaashii Maryan wey ooynaysay, haddaba saaxiibadeeda la joogay ayaa isku dayayeyinay qalbi qaboojiyaan iyada. Ciise na wuu la ooyay isna.Ciise wuxuu aaaday qabuurtii isaga iyo dadkii kaleba. Dhagac weyn baa saarnaa qabriga meesha laga galo.

“Dhagaxa ka qaada,” ayuu Ciise amar ku bixiyey. “Sayidow,” bay Maarta ugu jawaabtay, “Hadda wuu urayaa, afar maalmood buu mootanaa.” Sidii uu ahaa amarkii Ciise ayay raggii uga qaadeen dhagaxii saarnaa. Dabadeedna Ciise wuxuu baryay Aabihiisii samada ku jiray.  Ciise waxay u ahayd bandhigaasi mucjisada ahaa wax weyn oo ay dadkii ku garan karaan in Ilaah soo diray Isaga.

“Laasaros!” ayuu Ciise ku dhawaaqay. “Soo bax!” Dadkii godka joogay wey la amakaageen. Ma Ciisaa nin dhintay nooleysiiyey? HAA! Laasaros godkii buu ka soo baxay, meel walbana kafan kaga xidhan tahay – NOOLYAHAY!
“Fura Isaga,” Ayuu Ciise yidhi. “Ha socdeen” Farxad noocee ah ayaa ka dhacday halkaa! Baroortii oohintana waxay isu bedeshay qosal. Ciise wuu fuliyey ereygiisii. Wiilka keliya ee Ilaah baa siin kara nolol ninkii dhintay. Dad badan oo arkay mucjisadaa ayaa rumeystay Ciise. Laakiin qaar kale waxay u warbixiyeen cadowyadiisii – hoggaamiyayaashii macbudka. Hinaasahoodii waxay u qorsheeyeen inay dilaan Ciise. Markii uu taasi maqlayna Ciise wuu isaga tagay in mudda ah. (*Yooxanaa 11)*

## Ciise iyo Sakhayos

Maalin baa, Ciise soo maray Yerixoo. Magaaladii burburiyey waayihimii sii horreysay ee Yashuuca. Iminka dib ayay u dhisantay oo dad farabada baa ku nooleyd halkaasi. Waxaana ka mid ahaa ninkan la yidhaahdo Sakhayos. Inta badan dadka magaalada aad uma aysan jecleen Sakhayos sababta oo ah cnshuur qaade ayuu ahaa lacagta ka qaada iyaga. Sakhayos qaar lacagta uu qaado wuxuu u diri jiray dowladda-laakiin qayb badan buu kala hadhi jiray. Inuu cnshuurqaade yahay Sakhayos hodan bay ka dhigtay. Aqalkiisana laga yaabe inuu midka ugu weyn xaafadda ahaa. Laakiim isagu wuxuu ahaa aad u gaaban. – ma aha in xagga lacagta ka gaaban yahay, laakiim xagga dhererka qof ahaanayd. Weligiina ma korin dherer ahaan dadka kale. Markii uu maqlay Sakhayos in uu yimid oo uu joogo Yerixoo, canshuurqaadihii yaraa wuxuu doonay inuu arko Ninkan ka yimid Naasaret ee sheeganaya inuu yahay Wiilka Ilaah. Laakiin dadkii badnaa aawadood way adkayd …. Dadkuna way dhaadheeraayen. Sakhayos fikrad buu la yimid! Haddii horay

uga ordo dadkan badan …. Oo wuxuu fuulay geed jidka geeskiisa ku yaala … si uu u arko Ciise.

Wuxuu fuulay geed sukomoor ah, Sakhyos meel fiican buu ka helay ka helay laamihii oo uu ku fariisan karo inuu ku sugo Ciise. "Si fiican baan u arki karaa," laga yaabee inuu ku fikirayay. "Waan arki doonaa isaga iyadoon la i arkin kareyn" "Sakhayosow, dhaqso u soo deg." Canshuurqaadihii yaraa dhegehiisa ma aysan rumaysan. Ciise wuxuu istaagay geedkii hoostiisa. Ciise wuu fiirinayay isaga. Ciise ayaa u yeedhaya isaga! Haddii Sakhayos uu la yaabay inuu maqlo yeeridd Ciise, wuu amkaagay markii Ciise ku yidhi, "Maanta waa inaan gurigaaga joogo." Sakhayos wuu si dhaqso ah ayuu halhaleel uga soo degay oo wuuba dhici gaaray. Sakhayos farxad ayuu Ciise ugu soo dhoweeyey gurigiisii. Laakiin dadkii ma aysan jeclaanin. Waxay ku ganuunaceen in aysan ahayn Ciise inuu booqdo dembiilayaasha sida Sakhayos oo kale.

Ciise wuxuu u keenay noloshii cusbayd oo idil Sakhayos. Sakhayos wuxuu yidhi, "Sayidow, maalkayga badhkii Ayaan masaakiinta siinayaa. Oo haddii aan nin wax ka dulmay, waxaan u celin doonaa afar laab."

Ciise raalli buu ka noqday nolosha cusub ee Sakhayos. Isagu wuxuu jeclaa inuu arko dadka ka soo noqonaya dembiyada oo samaynaya waxa ku quman ee hagaagsan. Ciise wuxuu yidhi, "Wiilka Aadanah wuxuu u yimid inuu kii hallaabay doondoonno oo badbaadiyo." (*Luukos 19)*

## Dhalashadii Kaniisadda

Markii Ciise dhintay, xertiisii cabsi baa ku dhacday oo qudhooda wey isqariyeen. Mrkii uu Ciise geerida ka soo sarakacay, wuxuu istusay xertiisii oo isu muujiyey. Ciise wuu noolyahay! Laakinse Ciise waxa u qorshaysnaa inuu ka tago iyaga, oo uu dib ugu laabto samada meeshuu weligiiba kula noolaa Ilaah, Aabbihii. Intii uusan ka tagin, wuxuu kula ballamay Ciise xertiisii Isaga inuu u soo diri doono Quuxa Qudduuska inuu qalbi qaboojiyo oo uu gargaaro iyaga. (Yooxanaa 15:26). Saacaddu wey dhowdahay! Maalmo yar ka dib markii Ciise ka tagay, Ilaaha Ruuxa Qudduuska ah baa yimid. Sidan bayna u dhacday. Ilaa iyo 120 raacsanayd Ciise oo wadajir u tukanaya guri dhexdiisa ayaa si lama filaan ah, gurigii ka soo buuxsamay sanqadh cod dabayl weyn wata. Olol dab oo kale sidii carrabo u kala qaybsama ayaa ku dul fadhiistay mid kasta. Kolkaasaa kulligood waxaa ka wada buuxsamay Ruuxa Qudduuska horey siduu Ciise ugu sheegayba. Wadooyinka dibadda ah, ayay Ciise xertiisii afaf ku hadleen oo aysan weligood horey u baran. Dadkii ajaanibka ahaa ee booqanayay Yersaalem ayaa maqlay xertii waxay ku hadlayeen ee ku saabsanaa shaqadan cajiibka ah ee Ilaah luqadaheeda badan. Wey yaabeen dadkii. “Tani micneheeda waa maxay?” bay isweyddiiyen. “Kuwani waxaa ku buuxa khamri cusub” Qaar kalena way ku qosleen oo ku majaajiloodeen. Laakiin Butros baa wuxuu yidhi, “Kuwani ma sakhraansana …. Waa wixii lagaga dhex hadlay nebi Yoo’eel …” Haddaba Butros wuxuu soo xusuusiyey snado badan ka hor, Ilaah ballantiisii ahayd Ruuxa Qudduuska inuu u iman doono oo barakayn doono oo gargaari doono dadka.

Butros dadkii wuxuu u sheegay waajib ku tahay iney ka soo noqdaan debiyada oo deedna lagu babtiiso magaca Ciise Masiixa. “…Oo waxaad heli doontaan haddiyadaha Ruuxa Qudduuska,” Butros baa

sidaa ku yidhi. Abbaaraha 3000 qof ayaa aqbalay. Waxayyna ku soo biireen xertii caabudayaashii Ciise. Kolkaa ka dibna, dad badan baa baa ku soo biiray kaniisadda Ilaah bilaabay maalintii Ruuxa Qudduuska yimid.
Ruuxa Qudduuska awood iyo xoog buu u keenay noloshii dadkii Ilaah. Maalin baa, Butros iyo Yooxanaa macbutka tageen wakhtigii salaadda. Niin curyaan ah oo dawarsada oo la ag - dhigi jiray albaabka macbudka. Lacag weyddiistay Butros iyo Yooxanaa. Deedna Butros ayaa yidhi, “Lacag iyo dahab midna ma haysto, laakiin waxaan heystaan ku siinayaa. Magaca Ciise Masiixa, kii reer Naasaret, ku soco.” Markaasuu intuu gacantya midigta ku dhegay ayuu sara kiciyey: oo markiiba cagahihiisii iyo anqowyadiiisiiba waa xoogeysteen, intuu kor u booday ayuu istaagay oo socod bilaabay; markaasuu iyaga macbudka la galay – isagoo socda oo boodboodaya oo Ilaah amaanaya. Maalintii xigtay, Butros iyo Yooxanaa ooh or taagan sirkaalkii taliyaha macbudka. “Xooggee ama magacee baad waxan ku samayseen?” Taliyayaashii baa weyddiiyey. Ruuxa Qudduuska oo ka buuxa, ayuu Butros ugu jawaabay si dhiiranaan ku jirto. “ .. magaca Ciise Masiix, kii reer Naasaret, oo aad iskutallaabta ku qodobteen, oo Ilaah ka soo sarakicyey kuwii dhintay, daraadiis ninkanu isagoo bogsaday halkan hortiina ku taagan yahay.”

Butros mar buu ka cabsaday inuu garab istaago Ciise. Laakiin waxay ahayd intuusan Ruuxa Qudduuska iman. Iminka cidna ma cabsin karto isaga. Butros iyo Yooxanaa waxay ku jawaabeen, “Idinku kala xukuma inay Ilaah hortiisa ku quman tahay inaannu idinka idin maqalno intaannu Ilaah maqli lahayn, iyo inkale.”
Ka dib markii aad loo cabsiiyey, taliyayaashii sii daayeen Butros iyo Yooxanaa. Adeegayaaha dhiiran ee Ilaah waxay u sheegeen dadkoodii dhamaan wixii ku saabsanaa ee ka dhacay xabsigii iyo

maxkamadii. Dabadeed waxay isugu yimaadeen kulan salaad weyn iyo amaan Ilaah ah. Mar kale, ayaa Ruuxa Qudduuska ee Ilaah ka buuxsamay dadkiisii oo xoog u yeelay – oo sidaa bay ku sii kortay oo kortay kaniisaddii yareyd (Sabida ahayd). (*Falimaha Rasuullada 1-4)*

**Boqorkii Xikmadda Lahaa Ee Sulaymaan**

Boqor Daa'uud nin Ilaah oo weyn buu ahaa. Xiligii xukunkiisa lagu jiray, Reer Binu Israa'iil toban jeer bay laba jibaarmeen oo tarmeen markii loo eego boqrtooyadii boqor Saa'uul xiligeedii. Laakiin iminka waxba ma sii xukumi karo. Daa'uud wuu gaboobay. Wuuna daalay! Wuuna bukay, noloshiisa dunidana way soo gabagabowday oo wakhtigiisii baa soo dhowaaday. Wiilashii badnaa ee Daa'uud mid ka mid ahaa, Adoniiyaah, ayaa dadkii reer binu Israa'iil u sheegay hadda inuu boqor u noqon doono. Inkasta oo magaciisa la micne ahaa Daa'uud xaaskisii Batshebac way ogayd inuu wiilkeeda Sulaymaan boqor noqon doono. Waxayna Daa'uud u sheegtay waxyaalo ku saabsan qorshaha Adoniiyaah. Daa'uud wuxuu isug yeedhay odayaashii reer binu Israa'iil oo wuxuu si waadax ah ugu dhawaaqay inuu Sulaymaan ahaado boqorka reer binu Israa'l. Sulaymaan wax dhib ah sii fog kuma qabo Adoniiyaah, sababta oo ah dadkii reer binu Israa'iil waxay aaminsanaayeen Daa'uud. Daa'uudna wuxuu u sheegay iyaga in kan uu Ilaah u doortay inuu noqdo boqorkooda yahay Sulaymaan. Inyar ka dibna wuu dhintay Daa'uud.

Intii uusan dhiman ka hor Daa'uud, wuxuu la hadlay oo uu u sheegay Sulaymaan waxyaalaha ku saabsan addeecidda daacadnimada Ilaah iyo inuu noqdo boqor wanaagsan. "Jidadka Ilaah ku soco, inaad ku liibaanto waxa aad samaynaysid oo dhan." Daa'uud baa sidaa ku yidhi wiilkiisa. Taasi waano fiican bay ahayd!

Deedna Sulaymaan wuxuu ku fadhiistay kursigii saldanadii Aabbihii, Daa'uud, oo boqrtooyadiisii baa loo xaqiijiyey uskankeedii. Habeen baa, Sulaymaan riyooday. Riyadiisana, Ilaah baa ugu muuqday oo ku yihdi isaga, "I weyddiiso wax aan ku siiyo?" Maxaad weyddiisan lahayd ka adiga ahaan?
Sulayman wuxuu weyddiistay xikmad waxgarasho oo uu ku noqdo boqor wanaagsan. Boqorkii dhalinyarada ahaana codsigiisii waa la yeelay. Wakhti bandanna ma aysan sii qaadeen kolkii ay dadkii garteen xikmadda Sulaymaan. Maalin baa, labo silaamood oo hooyooyin ah iyo ilmo keliya horyimadeen Isaga. "Naagtan ilmaheedii habeenkii buu dhintay, Maxaa yeelay iyadaa ku dul seexatay," Naag baa sidaa tidhi. "Maya Saas ma aha! Laakiinse kan nool waa wiilkayga, kan dhintayna waa wiilkaaga," Naagtii kale ayaa sidaa tidhi.  Sidee boqorkii ku u sheegay hooyada runta ah tay tahay? Dabadeed boqorkii baa wuxuu yidhi, "Bal seef ii keena" deedna waxay u keeneen seef boqorkii. Maxaad u malaynaysaa inuu qorshaha uu damacsan yahay seefta wuxuu ku samaynayo? Oo boqrkii wuxuu yidhi, " Ilmaha nool laba u kala qaybiya, oo middood badh siiya," dabadeed hooyadii ilmaha noolaa ayaa tidhi, "Sayidow wiilka nool iyada sii, laakiinse sinaba ha u dilin isaga."

Laakiin tii kale waxay tidhi, "Aniga yeelan mayo, adna yeelan maysid ee qaybi."
Deedna boqrkii wuxuu yidhi, "Wiilka nool naagtii hore siiya, waa hooyadii." Oo dadkii dalka Israa'iil oo dhamuna way wada maqleen xukunkii boqorka wax ku xukumay, wayna ka baqeen boqorkii. Maxaa yeelay, way arkeen in igmaddii Ilaah ku jirto si uu wax u xukumo. Dadkii dalka Israa'iil ma aysan lahayn macbud ay Ilaah ku caabudaan. Kolkii uu Daa'uud qorsheeyay inuu mid u dhiso, Ilaah baa ku yidhi, "Wiilkaagaa dhisi doona guri magacayga dartii." Deedna Sulaymaan wuxuu bilaabay dhismo macbud cajiib ah inuu

ka dhiso Yerusaalem. Waxayna ku qaadtay toddobo sanadood oo dhan inuu dhiso macbud. Laakiin maalintii weyneyd markay timid dadkii oo idil baa isku soo ururay inay maqlaan Sulaymaan u huridda macbudka Ilaah. Salaad qurux badan dabadeed, boqrkii iyo dadkisii si farxad lehn bay u bixiyeen waaqdhaacyo iyo waxaa dhacday xaflad weyn in wax lagu cuno muddo laba toddobaad gaaraysa.
Kolkaa ka dib, Ilaah baa u muuqday Sulaymaan marlabaad oo ballan ku siiyey inuu barakadeeyey isaga iyo Israa'iilba inta ay iyagu sii wadaan adeecidda Rabbiga. Nasiib darrese, ha nodo Sulaymaan ama dadkiisa Israaiil toona ahayd inay adeecaan marwalba Ilaah. Boqorkii wuxuu guursaday naago badan oo uu Ilaah doonaynin inuu guursado. Naagihiisi cawaanta majuusiyiinta ahaa ayaa qalbigiisa u qaatay Ilaahyadii qalaad, oo qalbigiisa daacad uma noqon Rabbiga Ilaahiisa ah, sidii qalbigii Aabbihii Daa'uud. Markii uu Sulaymaan lumayay fursadii uu Ilaah ku addeeci lahaa, mid ka mid aha saraakiishiisii oo lagu magacaabi jiray Yaaraabcaam ayaa haystay waaya aragnimo cajiib ah. Nabi baa wuxuu u sheegay isaga in Ilaah kala qaybinayo boqortooyada boqr Sulaymaan oo Yaaraabcaam xukumi doona toban ka mid ah laba iyo tobanka qabiil ee reer binu ISraa'iil. Durbadiiba Yaaraabcaam wuxuu u baxsaday dalka Masar. Wuuna garanayay haddii uu joogo inuu Sulaymaan dili doonay karay. Ugu dambayntii, Sulaymaan wuu dhintay. Wiilkiisii Rexabcaam, ayaa canshuuray dadkii oo waliba si ka sii daran tii Sulaymaan ku sameeyey. Tobankii qabiilood wey ka hor yimaadeen - oo waxay doorteen Yaaraabcaam inuu hoggaamiye u noqdo. Sulaymaan boqrtooyadiiisii waxay u kala qaybsantay laba garab, si la mid ah sidii nabiga Ilaah sii sheegay. Ilaahay ma barakeeyo kuwa aan addeecin. (*Boqoradii Koowaad 1-12)*

Maalin laga xmado bay u ahayd Manaseh. Aabbihii, boqor Xisqiyah kolkaa unbuu dhintay. Iminka, wiil da'diisu tahay laba iyo toban jir keliya, Manaseh ayaa boqr u cusb u noqday dadkii Ilaah ee Yuhuudda. Taana ma uusan garnaynin, laakiin Manaseh waxay ahayd inuu boqr u haado 55 sanadood. Manase Ilaah caawimaad buu uga baahnaa si uu u noqdo boqr wanaagsan. Laakiinse Manaseh wuu iska dhaga tiray taasi oo wuxuu sameeyey wax Rabbiga hortiisa shar ku ahaa. Manaseh wuxuu dib u dhisay oo dayactray meelihii allabariga ee sanamyada lagu caabudi jiray. Xitaa wuxuu sameeyey sawiro la xardhay oo dhigay Macbudkii quddduuska ahaa ee Ilaah! Ilaah oo taas ku yidhi Muuse, "Waa inaadan samaynin sawir sanamo la xardhay. Waa inaadan u sujuudin kuwaas oo aadan u adeegin." Manaseh wuxuu ku dhaqmay isticmaalka sixir iyo faal. Dadkiina wuu ka fogeeyey Ilaah. Xitaa boqrku wuu gubay wiilashiisa si u qurbaan gu bixiyo sanamyada. Si weyn bayna cadhadii Ilaah ugu sii korodhay. Markii ii dadkiisii ku caasiyeen, Ilaah wuxuu u ogolaaday iyaga in la ciqaabo. Taasi weeye waxa qabsaday oo ku dhacay Manaseh iyo dadkii uu xukumayayba. Rabbiga wuxuu u soo diray ciidankii Ashuur inuu qabsado. Mnaseh waa la qaatay isagoo silsilado iyobircago ku xidhan yihiin oo Baabiloon baa loo kaxaystay. Oo intuu dhibaataysnaa buu Rabbiga bayay, Ilaahiisii. Aad buuna isu hooseysiiyey Ilaah Awoowayaayiisha hortiisa, oo Isagii buu baryay, oo Isna wuu aqbalay isaga. Ma sii jireyso baryada sanamyada! Laakiinse Ilaaha nool ma u jawaabi doonaa sharkii Manase ka dib. Haa! Wuu maqlay Ilaah baryadii boqorka oo wuxuu dib ugu soo celiyey Yerusaalem. Kursigii boqortooyada, dadkiii uu xukumayay. Dabadeed markaasuu Manaseh ogaaday in Rabbiga Ilaah yahay. Boqr Manseh iminka waa qof cusub. Wuxuuna dibadda uga saaray macbudkii Ilaah sanamkii iyo ka soo ururiyey

sanamyadii Ilaahyada qalaad dhamaan magaaalada Yerusaalem yiilay. Kulligoodna wuu ka bixiyey. Wuxuuna dayac tiray meeshii allabariga ee Rabbiga oo wuxuu ku dul bixiyey qurbaanno nabaadiino ah iyo qurbaano mahadnaqid ah. Deedna wuxuu ku amray dadkii inay u adeegaan Rabbiga Ilaaha Israa'iil. Bal eega isbedelka ku dhacayManaseh.

Markii Manaseh dhintay, willkiisii, Aamoonna, ayaa ku soo noqday sanam caabuddii. Laakiinse isagu iskuma hooseysiin Rabbiga hortiisa sidii Aabbihii oo kale. Boqrkii kale eek u xigayna, Yoosiyaah, waxay da'diisa ahayd oo keliya siddeed sano. Wuxuuna wadaanka xukumayay muddo ku siman 31 sanadood oo wuxuu sameeyey wax Ilaah hortiisa ku quman oo wanaagsan. Wuxuuna dhamaan dumiyay meelihii Ilaahyada beenta ah lagu caabudi jiray iyo weliba macbudyadii beenbeenta ahaa.

Boqrkii wanaagsanaa ee Yoosiyaah wuxuu nadiifiyey oo dayactiray Macbudkii Ilaah. Iyo wasakhdii dhextiilay oo idil wadaad baa helay kitaabkii sharciga ee Ilaah siiyay Muuse.

Markii uu boqorkii maqlay erayada sharciga Ilaah, isagu dharkisii buu jeexjexay ka xumaasho darteed. Yoosiyaah wuxuu gartay inta ay la ekeyd xumaantii ay awooyayaashiisii sameeyeen oo ay ku caasiyeen sharcigii Ilaah. Nabi la yidhaahdo Xuldaah Ilaah u soo dhiibay farriin ku socota Yoosiyaah. “Raabbigu wuxuu leeyahay. Bal eeg, belaayayaan ku soo dejin doonaa meesha iyo dadka degan ba, taas oo ah kulli habaarada ku qoran kitaabkii boqrka Yuhuudda hortiisa lagu akhriyey oom dhan, maxaa yeelay, iyagu way iga tageen.” Laakiin Yoosiyaah wuu ishooseysiiyey oo daacad buu yahay, tani kuma dhacayso ilaa ka dib uu isaga dhinto mooyaane.

Ilaah wuxuu ku caawiyey Yoosiyaah dadkiisa hogaaminta dadkiisa inay u soo noqdaan Ilaah. Maalin baa, isaga oo ciidankiisa hoggaan dagaal u haya, ayuu six un ugu dhaawacmay fallaarihii cadowga ku

soo ganayeen. Adeegayaashiisii baa gaari fardood ugu qaaday aqalkisiisoo oo Yerusaalem buu ku dhintay. Dadkiisii oo idilna way u baroorteen tacsidiiisii, oo gabayo iyo heeso bay ka tiriyeen waxyaabihii ku saabsanaa maamul wanaagii boqor Yoosiyaah. Inyar ka dib markii lga joogay wakhtigaa, wey idlaatay boqrtooyadii. Laakiinn qof baa, boqor baa u talin doonay Israa'iil. Magaciisana waxaa la odhan jiray BOQRKII BOQRADA, IYO RABBIGA RABBIYADA. Markii Ciise Markii Ciise Masiix yimid markeedii ugu horreysay, Isaga waa la diiday oo la qodbay. Markii mar labaad uu yimidna, ma uusan ahayn oo keliya boqorka Israa'iil, laakiin idil dunida oo dhan. *(Taariikhda Labaad 33-36)*

## Ninkii Dabka

Wax walba waxay u ekaayeen wax xun xagga Israa'iil. Boqorka iyo boqoraddaba Ilaah bay nebcaayeen. Tusaale mid xun weeye! Isla kolkaa dadkii weliba Ilaaj bay nabcaadeen oo waxay caabudeen ilaahyo been ah. Ma jiraa mid Ilaah jecel? Haa, waxaa jiray inyar oo caabudayaal daacad ah. Maalinbaa, Ilaah la hadlay mid iyaga ka mid ah, oo la yidhaahdo Eliiyaah. Eliiyaah wuxuu u sheegay boqrkii sharlowga haa ee Axaab, "Waxaan Rabbiga ah Ilaaha reer Binu Israa'iil ee aan hortiisa taaganahaya noloshiisa ugu dhaartay inaan dharab iyo roob midna sanadahan la arki doonayn, sidaan leeyahay mooyaane." Tan micnaheedu waxaa weeyaan Abaar! Ilaah ma uusan u ogalaanin karayn in dadkiisa reer binu Israa'iil ku sii socdaan sharka.

Ka dib markii loo digay boqorkii, Ilaah Eliiyaah wuxuu u diray meel cidla ah oo wadanka ahayd. Meeshasi, oo tog - durdur biyo leh, Eliiyaah meeshaa buu ku sugayey. Ilaah wuxuu u soo diray tukayaal quudiya isaga. Waxayna u keeneen kibis iyo hilib, subaxdii iyo fiidkiiba. Oo Eliiyaah wuxuu ka cabi jiray durdurkii biyaha ahaa.

Kolkiiba wuu engagay durdurkii, sababta oo ah waxaa arlada ka jirin roob. Ereyga Rabbiga ayaa run noqday. Dalkoo idilna biyo la’aan baa ka dhacday. Mirihii beerahana way bix waayeen. Dadkiina wuu gaajooday. Lagayaabe, Elliiyaah inuu la yaabay waxa ku dhici doona isaga maadama aysan jirin biyo uu cabo. Ilaah baa la hadlay Eliiyaah, “Kac, oo waxaad tagtaa Sarefta, halkaasna iska deg. Oo bal eeg, waxaan amray naag carmal ah oo adiga ku quudin doonto.” Ilaah wuu garanayay baahida adeegihiisa. Laakiin maxay tahay sida acajiibka ah ee uu u wax u siiyey.. Si ishooseeysin ah ayuu Eliiyaah u adeecay Ilaah. Markii uu yimid Sarefta, naagtii carmalka ahayd waxay joogtay magaalda iriddeeda oo xaabo ayay guranaysay. “Waan ku baryayaaye, waxoogaa biyo ah weel iigu keen aan cabbee.” Ayuu naagtii weyddiistay Eliiyaah. “Waan ku baryayaaye waxaad gacanta iigu soo qaadddaa in yar oo kibis ah.” Carmashii waxay ugu jawaabtay. “Waxaan heystaa sacab muggiis oo jidhiidh ah iyo in yar oo saliid ah oo kusad ku jirta.” Waxaa ka sii darnayd, naagtii markii ay nabiga ku tidhi markii ay intan idlaato, iyada iyo wiilkeedaba la dhiman doonaan gaajo. “Ha cabsan. ii samee marka hore in yar oo kibis ah, oo dabadeedna u samee adiga iyo wiilkaaga,” Eliiyaah baa sidaa ku yidhi. “Weelka jidhiidha ahu idlaan mayo, kusada saliidda ahna idin gabi mayso ilaa maalinta Rabiga dhulka roob ku soo daayo.”Iklaah wuu karaa hawshaa mucjisada ah inay sidaa u dhacdo. Oo wuu sameyey! Naagtii iyo wiilkeedii maalmo badan bay wax cunayeen, welkii jadhiidha ahaana ma idlaan, oo kusadii saliidda ahaydna ma aysan engag gabin.

Eliiyaah maalmo badan buuna la noolaa iyaga. Maalin baa wax laga xumaado dhaceen. Wiilkii carmasha ayaa dhintay. Eliiyaah baa maydkii wiilka qolada qolka xagga sare u qaaday. Markaasuu RAbbiga u qayshaday, isagoo leh, “Rabbiyow, Ilaahayow, Waan ku baryayaaye, wiilkan naftiisa mar kale ha ku soo noqoto.” Ma tahay

baryo aan suurtagal ahayn! Rabbiga wuxuu dhageystay codkii Eliiyaah iyo nafsayadii caruurtii u soo noqtay Isaga. Wuuna aqbalay. Markii Eliiyaah ilmihii intuu soo qaaday ayuu u dhiibay hooyadii waxayna tidhi, “Haatan waan garanyaa inaad tahay nin Ilaah, iyo inuu run yahay erayga Ilaah. ”
Saddex sanadood ka dib, Ilaah wuxuu u diray Eliiyaah inuu ku noqdo boqorkii, Isagoo leh, “Roob baan u soo diri doonaa dhulka” U tag Axaab! Naagtiisii Yesebeel kol horeba waxay dishay ilaa afar boqol oo nebiyadii Ilaah ahaa. Laakiinse Eliiyaah lama murmin. Wuxuu aaday Boqor Axaab. Markii ay labadan nin kulmeen, Eliiyaah wuxuu ku xidhay Axaab shuruud ah inuu isukeeno reer binu Israa’iil iyo 850 kii nebiyadii beenbeenta ahaa. Meeshaasina waxay ahayd buurtii Karmal

Eliiyaah labadii dibi buu soo diyaarshay in allabariga bixintiisa loo isticmaalo. Laakiin ma aysan jirin dab baxaya oo la isticmaalo. “Idinku u yeedha magaca ilaahiina, anna waxaan u yeedhanayaa magaca Rabbiga,” ayuu yidhi. “Oo Ilaah baa dab ku soo jawaabaa, ha ahaato.” “Kaasu waa hadal wanaagsan” bay dadkii bay dadkii ku jawaabeen. Intii ka soo bilaabata aroortii ilaa galabtii nebiyadii beenbeenta ahaa waxay u yeedhanayeen ilaahyadooda. Iyagoo boodboday oo cayaaraya oo mindiyo isku jarjaraya ilamaa dhiig ka soo burqado. Wax dab ah na ma jirin. Dabadeed Eliiyaah baa soo urursaday xaabadiisii oo biyio ku qoyan. “Rabbiyow i maqal, oo I maqal, inay dadkanu ogaadaan inaad Adigu Ilaah tahay Rabbiyow….” Oo markaasaa dabkii soo dhacay. Oo waxaa wada gubtay allabariga la gubo, dibigii, iyo qoryihii iyo dhagxantii meeshii qurbaanka! Markii dadkii taas arkay ayay ku qayliyeen, “Rabbigu, Isaga waa Ilaah.” Oo Eliiyaah wuxuu yidhi “Nebiyada Bacal qabta oo midna yuusan ka baxsan!” Eliiyaah wuxuu sameeyey wixii hadda ka hor uu boqor Axaab sameeyey oo kale. Wuu wada

laayay gabi haan nebiyadii beenbeenta ahaa. Deedna adeegihii Ilaah wuxuu u sheegay Axaab inuu iminka roobku soo socdo oo uu da'I doono. Durbadiiba waxaa soo muuqday daruur yar. Ma roob baa? Ka dib in ka baadan saddex sanadood oo geeri badan jirtay abaarta darteed! In yar ka dib cirkii baa soo madoobaaday, daruur dabayl wadatan wey soo curatay, oo roob mahigaan ah baa da'ay. Ilaah baa keenay nimcada roobka. Ilaah dadkiina wuxuu tusay inuu Eliiyaah waxa uu iyaga u sheegyay inay run ahayd. Ilaah wuxuu tusay in Isaga keliya yahay Ilaaha runta ah. Maxaad u malaynaysaa inuu boqor Axaab sharfo Ilaah iyo adeegihiisa Eliiyaah? Maya! Sida runta ah, Yesebeel waxay isku dayday inay disho Eliiyaah, laakiinse wuu ka hor baxay. Ugu dambayntii, Axaab wuxuu ku dhintay dagaal oo addoomadii baa Yesebeel saaray gidaar sare meel ah. waxayna ku burburtay dhimashadeedii dhagax weyn hoostii. Maxaa ku dhacay Eliiyaah? Maalin baa waxaa loo soo diray gaadhifardoodka dabka ee fardaha; oo Eliiyaah, Ninkii Ilaah ee dabka ahaa, waxaa lagu qaaday dabbayl cirwareen samada. (*Boqorada Koowaad 17-19, Boqorada Labaad 2)*

**Dhibaatay La Kulantay Kaniisaddii**

Kontan maalmood ka dib Wiilkii Ilaah wuxuu ka sarakacay geeridii, Ruuxa Qudduuska baa yimid oo ku dhex noolaaday xertiisii. Inkasta oo ay xertii aysan fahamsanayn siduuu Ilaaha Aabbaha, Ilaaha Wiilka iyo Ilaaha Ruuxa Qudduuska ay isku wada yihiin Mid keliya, waxayse ku faraxsanaayeen Ilaah inuu iyaga la joogo. Ilaahna aad buu uga caawiyey rasuuladii inay dadka wax uga sheegaan waxyaalihii ku saaabsanaa Ciise. Dadkii rumeystay oo idil way wada jireen oo wax walbana waa ka wada dhexeeyey oo ku masaakiinta ahna way dhaqaalayn jireen. Laakiin hal qoys oo

isqabay oo lagu magacaabi jiray Ananiyas iyo Safira ayaa wax xun sameeyey. Waxy iibiyeen qaar ka mid ah hantidoodii oo waxay iska dhigeen oo jileen inay lacagtii oo idil u keeneen rasuuladii. Si qarsooni ah ayay inkale oo lacag ah u qarsadeen.
“Maxaa Shaydaanak qalbigaaga u geliyey inaad Ruuxa Qudduuska ah been u sheegtid …?” Butros ayaa sidaa ku yidhi ananiyas. Oo nimankii dhalinyarada intay kaceen ayay isagii duuddubeen markaasay qaadeen oo soo aaseen. Inyaroo saacado ah ka dib, Safira ayaa soo gashay ama timid, iyadoo aan ogayn wixii dhacay iyo inuu ninkeedii dhintay. Iyada qudheeda been bay ka sheegtay lacagtii – oo waxbaa iyana ku dhacay. Oo kuwii taas maqlay oo idil cabsi weyn baa gashay. Ilaaha Ruuxa Qudduuska wuxuu rasuuladii gacamhooda ku sameeyey calaamooyin iyo yaabab badan. Tusaale ahaan, dadkii bukay waa la bogsiiyey markii Butros dul maray iyaga. Waxay ahayd wakhtigii yaababka waaweyn jireen, xaadirnimada Ilaahna la muujiyey. Dad badan baan rumeystay Ciise. Taasi aad buu uga cadhooday wadaadkii sare. Rasuuladii xabis buu ku riday!
Laakiin malaa’igtii Rabbiga ayaa habeenimadii albaaabadii ka furtay, oo intay dibaddda u soo saartay, ku tidhi, “Taga oo macbudka isdhex taaga, oo waxaaad dadka kula hadashaan ereyada oo dhan ee noloshan.” Rasuuladii intay dibada u soo baxeen ayay bilaabeen dadkii inay ku wacdiyaan waxyaalihii ku saabsanaa Ciise. Aroortii, raggii wadaaddadii sare waxay arkeen jaylkii oo madhan. Markii ay soo heleen ugu dambayntii, Wadaadkii sare ayaa canaantay rasuuladii. “Miyaanu idinku amrin inaydan magacan dadka wx ku barin?” “Waa inaannu Ilaah addeecno intaannu dad addeeci lahayn.” Baa Butros iyo rasuuladii baa sidaa ugu jawaabay” oo markii ay taasi maqleen, way ka xanaaqeen, oo waxay ku tashadeen inay laayaan. Taasi bedelkeeda intay garaaceen bay iska daayeen. Iyaga oo ku jira xiqdi nacayb xun, ayay rasuuladii iska sii wateen inay

dadka ku wacdiyaan Ciise Masiixa. Maalin baa waxaa la xiray nin lagu magacaabi jiray Stefanos. Stefanos wuxuu jeclaa Rabbi Ciise. Ruuxa Qudduuska ayaa u isticmaalay inuu dadka u sheego waxyaalaha ku saabsan Ciise. Dad baa ka been abuurtay, oo leh Stefen wuxuu ku hadlayaa waxyaalo ka soo horjeeda oolidda ku ah Ilaahay. Ka idb markiii ay ku jeesjeeseen oo ku majaajiloodeen oo silciyeen ayay dhagax ku dileen sababtoo ah Ciise rumeysadkiisa uu rumeysan yahay. Intii uusan dhiman ka hor, waxaa ka buuxsamay Ruuxa Qudduuska, ayuu samada aad u fiiriyey, oo wuxuu arkay ammaanta Ilaah iyo Ciise oo midigta Ilaah taagan. Dadkii isu soo ururay ayaa Stefanos dhagxiyey isagoo u yeedhanaya Ilaah oo ku leh, "Rabbi Ciisow, ruuxayga qaado," Deedna sidii Ciisen markii uu iskutallaabta saarnaa, ayuu ninkan geesiga ah ku sameeyey isaga oo sii dhimanaya Ilaah ka baryay inuu dembiyadooda cafiyo dilaayaashiisa.

Dhimashadii Stefanos waxay bilowday mowjado dhibaatoooyin silicyo cusub ah. Wiil dhalinyara ah oo la odhan jiray Sawlos, oo ka mid kuwii wax ka caawiyeydilayaashii Stefanos, ayaa xidhxidhay masiixi walba oo uu helo. Qaar badan baa ka kala yaacay guryahoodii oo u baxsaday meelo kala duwan sida Samaariya iyo Yudeeya. Yerusaalem wxaa joogay oo keliya rasuuladii keliya. Inkasta oo uu cadowyadooda iksu dayayeen inay laayaan oo dilaan iyaga, kuwii kala firdhayday ee cararay meeshay tagaan ba dadka waxay ku wacdin jireen Ciise Masiixa. Mana aysan jirin wax ka hor istaaga kuwii raacay Ciise – sababtoo ah Ruuxa Ilaaha Qudduuska ah baa ku dhex noolaa iyaga oo ka sii dhex shaqaynayay iyaga.
*(Falimaha Rasuullada 5-7)*

## Butros iyo Xoogga Ducada

Rasuul Butros wuxuu socdaal ugu baxay waddanka oo idil si uu dadweynaha ugu soo sheego waxyaabaha ku saabsan Ciise. Maalin baa, isagoo maraya magaalo la yiraahdo Ludda, ayuu la kulmay nin sariir saaran, curyaan buu ahaa. Siddeed sanadood sariir saarnaa. “Ciise Masiix baa ku bogsiinaya adiga” Butros baa sidaa ku yidhi. “Kac oo sariirtaada gogol.” Oo markiiba ninkii wuu kacay. Dadkii arkay tani waxay u soo noqdeen Rabbiga. Magaaladii u dhaweyd ee Yaafaa dadkii aad bay tiiraanyasnaayeen. Naag Masiixiyad ah oo la odhan jiray Dorkas ayaa dhimatay. Si murugo leh, saaxiibadeed waxay u diyaariyeen in maydkeeda la xabaalo, deedna waxay dhigeen qoladdii sare oo ahayd meeshii oo wey murgoonayeen. Laakiinse Dorkas saaxiibadeeda waxay maqleen inuu Butros ka aga dhowyahay meesha ay joogaan. Waxayna u yeedheen Butros inuu yimaado iminka Yaafaa. Kolkii uu yimidna carmaladii waxay tuseen isaga garbagaliyaashii iyo dharkii samaysay inay la joogi jirtay iyaga. Qofwalbana wuu ooyay. Laakiinse Butros dhamaantood dibadda ayuu u saaray, markaasuu jilba joogsaday oo duceeyey. Oo intuu meydkii xaggiisa u soo jeestay ayuu yidhi, “Dorkas kac.” Oo markaasay indhihii kala qaaday; oo markay Butros aragtay wey fadhiisatay.

Kolkaas dabadeed, markaasuu gacanta siiyey oo kiciyey, oo markuu u yeeray qudduusiintii (Masiixiyiintii) iyo carmaaladiiba, iyada oo nool ayuu hortaagay. Taasna waa laga wada ogaaday Yaafaa oo dhan; kuwa bandanna waa rumeysteen Rabbiga. Butros wuxuu la joogay maalmo badan Yaafaa, guri badda dhinaceeda ku yaalay. Nimankan waxay ahaayeen shaqaalihii sarkaal ka mid ahaa ciidankii Roomaanka oo lagu magacaabi jiray Korneeliyos oo ahaa nin Ilaah caabuda. Korneeliyos wuxuu diray shaqaalihiisii iny u yeeraan

Butros sababta oo ah waxaa isaga muuqaal ugu sheegay malaa'ig. Butros buu u diray, wuxuu raadinayay Simoon, megdeeyihii gurigiisa badda dhinaceeda ku yiil.Wuu idiin sheegi doonnaa waxa waajibaka idinku ah inaad samaysaan. Intii uu Butros ku tukanayay guriga dushiisa, Ilaah baa riyo u soo diray isaga. Wuxuu arkay wax u ek weel shiraaq weyn ah ku soo dagaya dhulka. Oo waxaa ku jiray jinsi kasta oo xayawaan afara lugood leh iyo waxa dhulka guurguurta iyo haadda circa. Butros wuxuu yidhi weligey ma cunin wax xaaraan ah. Taas oo la micne ah dadka diinta Yuhuudda haysta looma ogalayn inay cunaan.Markiiba, cod baa u yimid. "Kac Butros soo gowrac oo cun." "Saas yaynan noqon Rabbiiyow!" Butros sidaa Ilaah ku yidhi. "Weligey ma aan cunin wax xaaraan ah oo aan nadiif ahayn. Mar labaad codkii baa u yimid isagoo leh, Wixii Ilaah nadiifiyey xaaraan ha ka dhigin." Taasina waxay dhacday saddex goor. Markiiba weelkii waxaa loo qaaday samada. Butros ma uusanm fahmin waxa ay ahayd riyadii uu arkay micnaheeda ahayd. Wuuna ka fikirayay taa iyada ah waxay ku saabsanayd. Ilaah baa ku yidhi isaga saddex nin baa ku doondoonaya oo waa inaad raacdaa iyaga.

Markii saddex nin u sheegeen Butros in Malaigta Rabbiga ku tidhi Korneeliyos cid u dir isaga. Ayuu gartay Butros in Ilaah halkaa ku hagayo isaga. Maalinti xigtay, isaga iyo lix kaloo saaxiibadii ah waxay aadeen Korneeliyos. Laga yaabaaye, intii uu ku sii socday waddadii gurigii ninkii aan Yuhuudda ahayn, Butros wuxuu bilaabay inuu fahmo jacaylka uu Ilaah u qabo dadkiisa – In Ilaah doonayo quruumaha oo idil gartaan Ciise inuu yahay Badbaadiyaha dunida. Butros markii meeshii yimid, Korneeliyos lugihiisuu ku dhacay oo waa caabuday. Laakiin Butros baa kiciyey Korneeliyos oo ku yidhi "Istaag, aniga qudheyda nin baan ahaye." Deedna dadkii guriga joogay oo idil wuxuu ku yidhi, "Idinka qudhiina waad

ogtihiin inay xaaraan u tahay nin yuhuudi ah inuu ku darmado ama u dhowaado nin quruun kale ah."

Hase ahaatee, Ilaah baa I tusay aniga inaan nina ku sheegin nin xaaraan ah ama aan nadiif ahayn.

Butros baa u sheegay dadkii aan Yuhuuda ahayn in Ciise Wiilka Ilaah uu ku dul dhintay iskutallaabta dusheeda oo haddana u soo sarakacay inuu badbaadiyo dunida. Deedna Ruuxa Qudduuska ayaa ku soo degay dadkii oo waxay bilaabeen inay Ilaah amaanaaan. Butros iyo lix Yuhuuda oo saaxiibadii ahaa way la yaabeen. Waxayna u ekeyd sidii maalintii Bentekost. Haddiayddii Ruuxa Qudduuska ayaa ku soo shubantay dadkii aan Yuhuudda ahayn xitaa. Deedna Butros wuxuu ku Babtiisay magaca Ciise rumeystayaal cusub Yerusaalem dhexdeeda, Butros Masiixyiintii baa ku canaantay inuu booqday dad aan Yuhuud ahayn. Haddaba Butros wuxuu u sheegay riyadii la tusay isaga iyo weliba aqbaliddii ducadii Korneeliyos in la yeelay. Markii taasi maqlayn waxyaalahaa oo idil, Masiixiyiintii Yersuaalem way aamuseen. Oo waxay amaaneen oo maamuseen Ilaah, kuwii rumeystay, oo tukaday, waxaa la tusay Kaniisaddda Masiixiyiinta in Ilaahn jecel yahay qof walba. (*Falimaha Rasuullada 9-12)*

## Ka Timid Silic Ku Wacdiye

Ilaah waxyaalo waaweyn buu ka dhex sameeyey dadkiisi ka tirsanaa Kaniisaddii hore. Nin ka mid ah dadkii, oo la odhan jiray Filibos, ayaa ku mashquulsanaa dad badan oo isu soo urururay inuu u sheego waxyaalo ku saabsan Ciise. Laakiin Ilaah wuxuu u diray saxarihii lamadegaanak ahaa. Sababtu maxay tahay? Ilaah baa ogaa inay joogaan safar saxaraha lamadegaanka, wuxuu ahaa Wasiir amar

weyn ka hoos hayay boqoraddii Kandake ee Xabashida. Wuxuun aku jiray waddadii uu dib ugu sii noqonayay wadankiisii oo wuxuu akhrisanayay kitaab gaar ah. Ma garanaysaa waxaad akhrineysid? Markii Filibos adeecay Ilaah, Ilaah baa ku hoggaamiyey isaga wasiirkii oo akhrinaya Ereyyga Ilaah isagoon garanaynin ama fahmaynin. Wuxuu ku soo dhaweeyey Filibos meeshii uu saarnaa. “Waa maxay waxan micnihiisa?” wasiirkii baa Filibos weyddiiyey, Intii ay saarnaayeeen gaahifardoodkii waddadii saxara dhexdeeda, Filobos baa afkiisa furay oo bilaabay inuu wax ka sheego Qorniinka, kuna wacdiyey Ciise isagii.

Wasiirkii Afrikaanka ee Itoobiyaanka ahaa markiiba wuu rumeystay farriintii Kitaabka Qudduuska, in Ciise Masiix yahay Wiilka Ilaah. Biyo ayuu arkay, oo wuxuu yidhi, “Maxaa iga celinaya in la i babtiiso?”
Filibos baa yidhi, “Haddaad qalbigaaga oo dhan ka rumeysatid, waa suurtowdaa.” Wuuna u jawaabay oo yidhi “Waxaan rumeysanahay in Ciise Masiix yahay Wiilka Ilaah” Filbos biyihii buu geeyey oo wuu babtiisay isagii. Imanka markii ay ka soo baxeen biyihii, Ruuxa Rabbiga ayaa dhuftay Filibosmar dambana ma arkin ninkii Afrikaanka ahaa. Jidkiisii ayuu iska qaaday isaga oo faraxsan! Laakiin dadka qaar wey necbaayeen Masiixiyiinta. Stefanos, midkaloo Filibos saaxiibkii ahaa, ayaa waxaa dilay dad caraysan oo aan doonaynin in lagala hadlo waxyaabaha ku saabsan Ciise. Ninka la yiraahdo Sawlos oo ahaa reer Tarsas ayaa wax kaa caawiyey diliddii Stefanos. Sawlos wuu nebcanaan jiray Masiixiyiinta oo idil. Sawlso, wuxuu ku dhaartay oo cabsiiyey inuu dili doono Masiixiyiinta, wuxuu u tagay wadaadkii sare oo weyddiistay inuu warqad siiyo si uu u soo xidhxidho rag iyo dumarba wixiii Masiixa raaacsan. Miskiin Sawloskii Tarsos! Ma uusan in markii la wax la yeelo dadka Ilaah, inuu run ahaantii – xaqiiqdii uu waxyeelayo

Rabbi Ciise Masiix qudhiisa. Ilaah waa inii ka joojiyaa Sawlos. Laakiin sidee dee? Ilaah baa "xidhay" intuu waddada ku sii jiray waddada caasimadda Dimishiq, Ilaah wuxuu ku ifiyey iftiin smada ka yimid. Markaasuu dhulka ku dhacay. Deedna wuxuu maqlay cod. "Yaa tahay Sayidow?" Sawlos baa sidaa ku qayliyey. "Waxaan ahay Ciisha aad silcineysid" wuu cabsaday oo gariiray, wuxuuna weyddiistay Sawlos, "Sayidow maxaan sameeyaa?" Rabbigana wuxuu ku yidhi isagii, "Kac oo magaalada gal, oo waxaa laguu sheeegi doonaa wixii kugu waajib ah inaad samaysid." Nimankii la socdaalayayna wey maqleen codkii, laakiin ninna ma aynan arkin. Sawlos markaasuu dhulk aka kacay – oo wuxuu ogaaday inuu waxba arkayn oo uu indha belay! Markaasay gacantaq kau hageen oo keeneen Dimishaq. Magaaladii, Sawlos saddex maalmood ayuu arag la'aan joogay oo waxba cunin cabinna. Laga yaabee inuu wakhti siiyey inuu Rabbi Ciise Masiix baryo. Kii uu kula kulmay jidkii Dimishaq. Ilaah wax walba wuu u qorsheeyey. Dimishaq dhexdeeda waxaa joogay xerow la odhan jiray Ananiyas. Rabbiga ayaa u diray inuu caawiyo Sawlos.. Ananiyas wuu cabsaday. Laakiin wuu addeecay Ilaah. Maerkii uu gacmaha saaray Sawlos dushiisa, indhihii way u furmen – Sawlosna waxaa ka buuxsamay Ruuxa Qudduuska ee Ilaah Sawlos waa la babtiisay. Deedna waxbuu cunay. Oo markii uu helay cuntadii, wuu xoogeystay oo tamartii baa u soo noqotay. Sawlos xoog buu u baahnaa. Wuxuu haystay wax aad muhiin u ah inuu sameeyo.

Durbadiiba Sawlos Masiixa buu ku wacdiyey macbudkii Yuhuudda, inuu yahay Wiilka Ilaah. Dabadeedna dadkii maqlay oo idil way la yaabeen, oo waxay yidhaahdeen, "Kanu sow ma aha kii Masiixiyiinta layn jiray?" oo qaar baa ku tashtay inay dilaan Sawlos. Sawlos waa ogaaaday cadowyadiisii inay taagan yihiin irdaha magaalada oo ay doonayaan inay Sawlos dilaan haddii uu isku dayo

inuu ka tago magaalada. Laakiin saaxiibadiisii cusbaa ee Masiixiyiinta ahaa ayaa qaaday oo habeen derbiga ka sii daysay iyaga oo dembiil ku dejinaya. Oo wixii intaa ka bilowday, Sawlos silciyihii Masiixiyiinta wuxuu la mid noqday rumayste la jira Sayidkii cusub, Ciise Masiix. (*Falimaha Rasuullada 8-9)*

## Eliishaa, Ninki Mucjisooyinka

Ma aysan jirin dibiyo ku filan jiididda harqoodka dhulka lagu falo. Mid dheeraad ah baa loo baahnaa. Taasi kama aysan joojinin wiil dhalinyaro ahaa oo la odhan jiray Eliishaa! Si sahlan buu isugu biidhiyey kooxdii ka dibi ahaa isaga qudhiisa, galayna meeshii ka banaanayd kii maqnaa meeshiisii. Waxayna ahayd inuu xoog leeyahay, yahay nin caqli badan-hawlkarna ah. Isla intii uu Eliishaa dhulka qodayay, nebigii Ilaah Eliiyaah baa u yimid oo u yeedhay isaga.wiilkii dhalinyarada haa wuxuu ka tagay beertiisii si uu ugu adeego Ilaah. Maalin baa haddaba, Ilaah Eliiyaah samada dabayl cirwareen ah ugu qaaday. Haddase Eliishaa waxaa weeye nebi Ilaah oo reer binuu Isra'iil ah. Inkasta oo uu ka xumaaday sababta Eliiyaah u tagay, wuxuu Ilaah ka baryay inuu awood siiyo sida Elliyaah oo kale. Markaasaa Eliishaah qaaday duuduubaygo'ii Eliiyaah , oo biyihii wabiga ee socday ku dhuftay. Oo biyihii baa kala qaybsamay! Hadda Eliishaa wuxuu gartay inuu Ilaah la jiro isaga. Intii uu Eliishaa ku sii socday magaalo la yidhaahdo Beytel, ayaa caruur yar yar magaaladii ka soo bxday oo ku majaajilootay isagii. Wax laga naxo ayan ku dhacay iyagii. Markaasaa dhirtii waxaa ka soo baxay laba Orso oo dheddig ah oo waxay dildilaacsadeen laba iyo afartankii caruurta ka mid ahaa. Maalin baa Eliishaa la kulmay carmali oo aan iska bixin karaynin deyn lagu lahaa. Ninkii daynta ku lahaa lacagtii bedelkeeda wuxuu doonay inuu u qaato labadeedii wiil addoon ahaan. "Tag oo weelal

weyddiiso derisyadaada …… weelal madhan,” Eliishaa ku yidhi. Ilaah wuxuu doonayaa inuu naagtan wax cajiib ah u sameeyo. Naagtii carmasha ahayd waxaa guriga u yaalay dheri saliid oo yar keliya. Laakiin dherigaa yar wuxuu ku filnaa inuu wada buuxiyo dheryihii kale oo idil! Maxaad u malayn lahayd haddii ay jiraan dhuumo tubooyin ah maalmahaas, may kuu ahaan lahayd Ilaahay inuu buuxiyo kuwaa, in badan? Naagtan Carmalk ahayd way iibisi saliiddii wiilasheediin way badbaadisay.

Naag kale iyo ninkeedii baa ka sameeyey gurigooda qol u gaar ah Eliishaa inuu joogo maraca uu halkaa soo marayo. Qolkii waxay dhigeen sariir, miis, kursi iyo laambad. Qolkaa mar walba wuxuu u xidhnaa oo u diyaarsanaa Eliishaa. Eliishaa wuxuu la yaabanaa sidii uu ugu abaalgudi lahaa qoyskan naxariista leh. Markii uu ogaaday inaysan caruur lahayn, wuxuu yidhi wax ay ku adag tahay fahmideeda naagtii inay rumaysato. “Markii wakhtigan soo wareego xiligan oo kale wiil baad laabta ku qabsan doontaa.” Waa la hubaa, sanad ka dib wiil baa dhalanaya. Dhawr sanadood ka dib isla ilmihii oo beerta la jooga aabbihii. “Madaxayga, madaxayga,” ku qaylliyay wiilkii. Markii ay u keeneen wiilkii hooyadiisii, wuxuu ku fadhiistay jilbaheedii ilaa iyo duhurkii, ka dibna wuu dhintay. Naagtii wiiilkii waxay dhigtay sariirtii taalay qolkii Eliishaa. Kee baad ku fikiraeysaa inuu caawin karo? Ma waxaad leedahay Eliishaa? Sax weeye taasi! Markaasay dameer kooreysatay oo dhaqso u aaday inay hesho isaga. Gurigedii buu yimid Eliishaa, keligii baa jaran jaradii aaday oo Rabbiga ayuu baryay. Ilaahay noloshii wiilka buu u soo celieye. Eliishaa wuxuu u yeedhay naagtii oo ku yidhi, “Wiilkaaga qaado.” Qiyaas siday bay ahayd farxadeeda!

Meel u dhow dhulka Suuriya waxaa ku noolaa sarkaal xukuma ciidan oo la odhan jiray Nacamaan. Wuxuu ahaa geesi xoog badan, laakiin waxaa hayay cudurka xun haragga ku dhaca ee loo yaqaano baraska.

Nacamaan naagtiisa waxay haysatay gabadh yar oo addoomad ah oo laga qabsaday Israa'iliyiinta. Gabadhii yarayd baa ku tidhi, "Haddii keliya Namacaan u tagi lahaa nebiga jooga Israa'iil! Wuu ka bogsiin lahaa baraskan." Namacaan markiiba wuxuu isu siduu ku arki lahaa nabigaa. Wuxuu qaaday lacag, dahab, iyo dhar qurxoon haddiyad ahaa. Midiidinkii Eliishaa ayaa u soo baxay oo ku yidhi, "Tag oo ku mayro webiga Urdun toddoba jeer ku maydho, jidhkaaga mar kaluu kuu soo noqon doonaa , oo nadiif baad ahaan doontaa." Nacamaan wuu cadhooday oo tagay. Miyuuna isaga ku maydhan karin oo nadiifin karin, biyaha wabiyada isaga dhulkiisa, Suuriya, wuu ka soo noqday oo horay buu u sii beegsaday halkii degaanka uu u lahaa.

Nasiibwanaagga Nacmaan, addoomadiisii ayaa kala hadlay inuu addeeco amarka Ellishaa. Haddaba Nacamaan wuxuu u dhaadhacay muquurtay webigii Urdun min toddoba jeer. Oo Nacamaan baraskii waa ka bogsaday! Dabadeed Nacamaan wuxuu caabuday Ilaaha runta ah, Ilaaaha Eliishaa, Rabbigii isaga ka bogsiiyey baraska. Ilaah wuxuu sii isticmalay addoonkiisa Eliishaa xitaa isagoo dhintay. Maalin baa nin la aasayey qabuuraha meel ku agtaal meeshii waagii hore lagu aasay Eliisha. Markii ninkii dhintay maydkiisii taabtay lafahii nebiga ee horey u aasnaa, ninkii wuu soo noolaaday oo ku istaagay lugihiisii. Runtii, Ilaah baa muujiyey xoog weyn toos addoonkiisa daacadda lahaa ee Eliishaa. (*Boqorradii Labaad 2-13)*

## Yoonis iyo Kalluunkii Weynaa

Sanado badan ka hor, waxaa jiray nin ku noolaan jiray waddanka Israa'iil.Maalin baa, Ilaah wuxuu u sheegay inuu aado magaalada weyn ee Nineweh oo ka mid ahayd caasimadaha ug awoodda badan dunida.

Yoonis wuxuu uga digay dadkii oo idil ee meeshaa joogay in Ilaah ogyahay heerka uu gaarsiisan yahay xumaantooda. Yoonis wuu diiday Ilaah! Halkii uu ka aadi lahaa Nineweh, Yoonis wuxuu raacay dooni u socotay degta kale ee ka soo horjeeday meeshaa oo la odhan jiray Tarshiish. Rabbiga Ilaaha ah ayaa wuxuu baddii ku daayay dabayl weyn. Waxaa jiray duufaan xoog badan. Baxriyiintiina aad bay u abqeen inay doonida kala dilaacdo oo degto. Duufaantii way ka sii dartay oo ka sii dartay. Waa la cabsaday, badmaaxayaashii way baryeen ilaahyadoodii oo alaabtii doonida saarnayd way ka rogeen si ay doonida u fududaato. Laakiinse waxba ma aysan u tarin. Yoonis wuxuu ahaa qofka keliya ee doonta saaran oo haddana aan Ilaah baryeen. Halkii uu taas ka samayn lahaa, wuxuu iska hurday xagga hoose ee doonta, wuxuuna ku jiray hurdo weyn. Naakhuudihii (Kabtankii) doonta ayaa halkaas ugu tagay isaga. "Hurdahayow, maxaad u jeedaa? Kac! Oo Ilaahaaga bari! Waaba intaasoo uu inaga fikiraa inaannu haligmine." Baxriyintii (Badmaaxayaashii) durbadiiba waxay go'aansadeen in dhibaatada jirta uu ku lug leeyahay Yoonis. Wuxuuna u sheegay iyaga inuu ka soo cararary Ilaah. Waxayna weyddiiyeen, "Si badu nooga degto aawadeed haddaba bal maxaannu samaynaa?" "Kor ii qaada oo badda igu dhex tuura," Yoonis baa sidaa ugu jawaabay. "Waayo, waxaan ogahay in duufaankanweynu daraadeey idiinku soo kacay."

Baxriyiintii ma aysan doonayn inay badda ku tuuraan Yoonis. Haddaba waxay ku dadaaleen iney xeebta ku soo noqdaan, laakiinse wey kari waayeen. Waxaa jiray oo keliya hal shay inay sameeyaan! Ka dib baryo cafis weyddiin, baxriyiintii intay Yoonis kor u qaadeen oo waxy ku dhex tureen baddii. Kolkaasay baddii joojisay cadhadeedii, mowjadihiina hoos u dahceen, oo dabayshiina tartiib u degtay. Isbedel degdeg ahna baana ku dhacay cimiladii oo badmaaxayaashii aad bay u cabsadeen si ka sii badan markii ay

dabaysha kacsanayd ka daran. Waxayna ogaadeen in Ilaah keliya waxaasi samayn karo. Baqdin iyo yaab, waxay caabudeen Rabbiga Ilaah ah. Ilaa intii laga gaarayay, addeecid la'aanta farriinwadihii wuxuu la kulmay layaab weyn. Moolkii guntii hoose ee badda ayuu hoos ugu degay, Yoonis waxba iscaawin karin degiddiisii. Hoos buu u degay, aad --- laakiin Ilaah qorshe kale ayuu lahaa.

Rabbiga wuxuu Yoonis u diyaariyey kalluun weyn oo isaga liqa. Kalluunkii isla wakhtigaaba wuu diyaarsanaa! Oo hal cantuugo oo Yoonis uu kaga baddii oo uu ku galay calooshii kalluunka.Yoonis wuxuu calooshii kalluunka ku dhex jiray saddex habeen iyo sddex maalmood. Wakhti bandanna isagaoo fikiraya ayuu Ilaah baryayay. Saddex malmood ka dib, Aakhirkii ballan buu ku galay inuu addecayo Rabbiga. Si toos ah, Ilaah wuxuu la hadlay kalluunkii, oo waxaa lagu soo mantagay xeebta Yoonis. Kol labaad, baa Ilaah la hadlay Yoonis oo ku yidhi aad Ninewah oo ku wacdi ereyga Ilaah. Markan Yoonis wuu aaday oo dhex-galay magaaladii, isaga oo ku qaylinaya, "WAlin waxaa u hadhay afartan maalmood, dabadeed Ninewah waa la afgambi doonaa." Dadkii reer Ninewah way rumeysteen Ereygii Ilaah. Oo waxay ku dhawaaqeen in la soomo, oo la xirto dhar jooniyada ah oo ay Ilaah ku tusayaan inay ka xun yihiin dembiyadiiay galeen. Xitaaa boqrkii baa Ilaah hortiisa isku hooseysiiyey. Oo kursigii carshigiisa intuu ka soo kacay ayuu xidhay dharkii jooniyadaha ahaa, oo lu dul fariistay dambas. Oo wuxuu dadakii ku amray in qof walba uu ka soo noqdo dembiyadiisii xunxumaa iyo rabshadihii, oo halaga baryo Rabbiga inuu cafis u fidiyo iyaga. Ilaah Ma cafin doonaa iyaga! Waxay u ahaan doontaa dadka reer Ninewah maalint layaab leh – cajiib u ah farxad leh markii ay dadkii ogaal hubsadeen in Ilaah cafiyey iyaga ,….. Laakiin hal qof baa aad u cadhooday. Yoonis! Maxay tahay sababta uu Yoonis u xanaaqay? Wuxuuna ku yidhi Ilaah, "Waan

ogaa inaad tahay Ilaah nimco miidhan ah, oo raxmada ka buxdo, oo cadhada u gaabiya, oo naxariis badan." Haddii aan hadalka si kale u dhigno, Yoonis wuu ogaa in marwalba uu Ilaah cafiyo dadkiisa kuwa ka xumaada dembiyadooda oo addeeca Ereyga Ilaah. Waxay u ek-tahay inuusan jecleen dadkii reer Ninewah.Ma uusan dooneyn in la cafiyo iyaga. Yoonis aad buu ugu xanaaqay Ilaah oo wuxuu yidhi, "Nafta ga qaad, waayo intii aan noolaan lahaa waxaa iiga roon inaan dhinto." Yoonis wuxuu fadhiistay magaalada banaankeedii, oo wuxuu sugayay maalinta maalintaa xigta waxa uu Ilaah samayn doono. Rabbiga Ilaah ahna wuxuuu diyaariyey geed ubbo ah, dhaqsuu u koray, hoos siiyey Yoonis inuu kaga hadhsado kuleylka qoraxda. Subaxdii dambe, Ilaah wuxuu u soo diray dixiri, ii isna geedkii buu dilay. Deedna, Rabbiga wuxuu ku soo daayay kuleyl xad dhaaf ah, oo hanfi daabayl kulul ah wadata ayaa gubay Yoonis ilaa uu u maleey-doonay inuu dhinto. Dabadeed, Rabbiga wuxuu ku yidhi Yoonis, "War inaad geedka ubbada u cadhootid ma lii wanaagsan tahay? Waxaad u jixijixday geedka ubbada ah, oo aad u howshoon oo aadan korinin oo habeen iska soo baxay oo habeen ku baaba'ay." So iima eka inaan u jixinjixo magaalada weyn ee Ninewah, taasoo ay gudaheeda ku nool yihiin dad badan? (*Yoonis)*

**Ishacyaah Baa arkay Mustaqbalka**

Ishacyaah nebi buu ahaa. Shaqadiisana waxay ahayd inuu dadka u sheego waxa Ilaah ku soo yidhaahdo. Dadkase marwalba ma aysan jecleeyn inay maqlaan Ereyga Ilaah, laakiinn Ishacyaah weligii Ilaah ma quudhsan. Ishacyaah wuxuu dadka wacdin jiray wakhtigii ay wadanka kala xukumayeen afarta boqrtooyo oo kala duwan. Cusiyaah, Yootam, Axaas, Xisqiyaah.

Boqor Cusiyaah ayaa xukumay dhulkii Yuhuudda inta ka soo rogan Yerusaalem. Markii hore, Ilaah wuu barakeeyey Cusiyaah sababtoo

ah wuxuu sameeyey wax ku quman Rabbig hortiisa. Laakiin Cusiyaah wuu kibray oo wuxuu joojiyey inuu addeeco Ilaah. Wuxuuna noqday nin baras leh oo kelinimo ku noolaa ilaa u ka dhinto. Boqor Cusiyaah wuxuu wadanka xumumayay in ka badan 60 sanadood. Markii uu dhintay, wiilkiisii Yootaan ayaa meeshiisii galay oo xukunkii sii hayay ilaa iyo toddoba iyo toban sanadood. Ilaah wuu baraakdeeyey Yootam sabatoo ah wuxuu dhageystay waxa uu Ilaah u soo sheego Ishacyaah iyo nebiyadii kale Boqor Yootam wiilkiisa wuxuu ahaa Axaas. Axaas labaatan jir buu ahaa markii uu xukunka la wareegay, wuxuuna Yerusaalem xukumayaya lix iyo toban sanadood. Axaas Ilaah dan kama lahayn. Wuxuuna caabvudi jiray sanamyo iyo ilaahyo been abuur ah, oo in badan buu u horseeday dadkii Ilaah inay sameeyaan sidiisii oo kale. inkastoo IShacyaah uga digay, Axaas ma uusan maqlin digniinta Ilaah. Wuxuuna dhintay isaga da'diisu tahay 35 Jir keliya. Ilaah wuu barakadeeyey boqorkii xigay, Xisqiyaah, sababta oo ah wuxuu meesha ka saaray sanamyadii iyo ilaahyadii beenbeenta ahaa, oo wuxuu baryay Ilaah runta ah. Markii ciidankii cadowga soo weeraray Yuhuudda, Xisqiyaal wuu ogaa ciidankiisa inay aad daciif u yihiin in laga adkaado. Wuxuu IShacyaah weyddiistay inuu ka baryo caawimaad Ilaahay. Ishacyaah farriin buu u diray boqorkii. "Ha ka cabsan cadowgan …. Aniga ayaa ridi doonno …" inyar ka dib, Ilaah wuxuu sameeyey ciidankii cadowga inay iska tagaan iyagoon xitaa la dagaalamin Xisqiyaah. Inkast oo dadka ku hareereysnaa isaga aysan aad uga fikireyn waxyaabaha Ilaah ku saabsan, Ishacyaahse aad buu uga fikiri jiray waxyaabaha ku saabsan Ilaah inbadan. Maalin baa, wuxuu helay manaam, oo la mid ah noocyada u ek sida riyo la riyoodo adoo soo jeeda. Aragtidaa waxay ahayd, Ishacyaah oo arkay ammaan iyo qudduusnimada Rabbiga uu leeyahay. "Yaan diri doonaa?." Ilaah baa ku dhex weyddiiyey manaamkii. "Waa ikan. Aniga i dir," Ishacyah baa sidaa

ku jawaabay. ISagu doonistiisu wxay ahayd inuu sameeyo waxwalba oo uu Ilaah weyddiiyo, oo uu aaado meelwalba oo uu u diro isaga. Lagayaabee Ishacyaah inuuku fikirayay Iklaah in uu u dirayo isaga dad meelo fogfog jooga oo aan maqlin waxyaabaha ku saabsan Ilaah. Laakiinse maysan ahayn, Ilaah ma uusan samayn taas. Ilaah wuxuu u sheegay Ishacyaah inuu la hadlo dadka degan dalkiisa. Oo ahayd inuu u sheego iyaga in Ilaah ka cadhooday dembiyadooda. Waxaa jiray waxyaalo kale oo ahayd inuu Ishacyaah dadkiisa u sheego- waxyaalo la yaab leh oo ku saabsan Qod xoog weyn leh oo ka soo samata bixin doona in uu u iman dooono kan badbaadin doono dembiyadooda iyo cadowgoodaba. Dadka Yuhuudda ah waxay ugu yeedhaan Qofkaasi “Masiix” Xitaa inkastoo iyaga ay ka filayeen Ilaah inuu u soo diro Masiix, dad badan baa u noolaa sidii inuusan weligii imanayn. Wax walba oo uu kaga hadlay Ishacyaah eek u saabsanaa Masiix waxy ku qornaayeen buugiisa. Inasta oo uu qoray. Inksasta oo waxyaalahan kla qoray boqolaal sanadood ka hore intii aysan dhicin, waxwalba oo ku saabsan waxyaalihii uu ka sheegay Masiix way rumoobeen. Ishacyaah baa wuxuu yidhi Ilaah qodhiisa ayaa calaamad idin siin doono. Oo wuxuu kale oo uu yidhi, “Bal eega, bikrad baa wiil dhali doonto oo waxaa loogu yeedhi doonaa Cimmaaanuu’eel.” Dadku waxay ogaayeen Ishacyaah waxyaalaha uu ku hadlayo ee ku saanbsan Masiixa Ilaah sababtoo ah naagtu bikrad maysan ahayn oo ilmo ayay haysatay. Oo weliba micno micnaha ereyga Cimmaanuu’eel waxay la mid tahay Ilaah baa inala jooga!

“Waayo, waxaa inoo dhashay ilmo, waxaa Layna siiyey wiil, oo boqrnimadu garbihiisey saarmi doontaa, oo magaciisa waxaa loo bixin doonaa Ka yaabkaleh, iyo Ilaaha xoogga leh, iyo Aabbaha daa’imka ah, Amiirka Nabadda.” Ishacyaash aad buu u hubay inay ballanta Ilaahay rumoobi doonto, wuxuuna wax u sheegay sidii

iyadoo wixiiba ay dhaceen. Taasina waxaa la yidhaahdaa waxsii sheegidda. Ishacyaah wuxuu yidhi Masiix wuu weyn yahay oo wax weynna wuu samayn doonaa. Ilaah haddana Idahcyaah wuxuu u sheegay inuu dadka u sheego Masiixaa inuu silci doono oo uu la dhimn doono dhibaatadaa. Lagayaabe inuu IShacyaah la yaabay sidee buu Masiix u ahaan karaa qof weyn oo xoog leh haddan islamarkaas u taag darnaanayaa oo u dhaawacmayaa. Laakiin IShacyaah lama uusan murmi karayn Ilaah - waxa ayn keliya ay ahayd inuu ku soo celceliyo wixii Ilaah u sheegay un. Ilaana wuu hubaa waxsii sheegiddiisa inay run atahay. Masiix wuu iman doonay – Dadka Yuhuuda keliya ma aysan ahayn, Ilaah wuxuu u sheegay Ishacyaah in Masiix yahay "Iftiinka dadka aan Yuhuudda ahayn". Dadka aan Yuhudda ahayd ee dunida jooga oo idil inaysan ahayn Yuhuudd. Ilaah wuxuu jecel yahay qof walba oo Masiix iyo Masiixiisa wuxuu u iman doonay inuu barakadeeyo qof walba oo uu badbaadda u keeno xitaa meesha ugu dambeysa dunida ha ahaato hadday doontee. *(Ishacyaah 1,6,7,9,53)*

## Yeremyaah, Ninkii Ilinta:-

Yeremyaah wuxuu ku dhasahy guri diimeed oo ku yaalay boqortooyada Yuhuudda. Aabbihii, Xilqiyaaah, wuxuu ahaa wadaad. Reerkooda waxay ku noolaayeen magaalo la yidhaahdo Canaatoot, aadna uga sii fogeyn Yerusaalem. Laga yaabee inay waallidiintii Yeremyaah ku fikirayeen inuu wadaad noqon doono - laakiinse Ilaah qorshe kale ayuu u hayay.
Wakhtigii Yereyaah dhashay, Dadkii Ilaah ma aysan ku nooleyn si waafaqsan Ereyga Ilaah. Ugu badann qofwalba, boqorka ayay ku hoos jireen iyagoo shaqaale ishooseysiiya u ah, waxayna caabudi jireen ilaahyo beenbeen ah – xitaa macbudka Ilaah dhexdiisa!

Markii uu dhalinyarada ahaa Yeremyaah, Ilaah baa la halay isaga. “Waxaan ku iqiin itaadadan dhalan.” Ilaah wuxuu ku yidhi Yeremyaah, “Oo waxaan qorsheeyey kolkaa ka dib inaad adiga iila hadahsid dadka.”
Yeeritaanka Ilaah waxay ula muuqatay Yeremiyaah wax laga cabsado. “Alla, Rabiyow Ilaahyow” ayuu ku qayliyey, “Aniga ma hadli karo, waayo dhalinyaraa ahay.” Caruur ma uusan ahayn, oo labaatan jir buu ahaa. Laakiinse Yeremyaah ma uusan ku xisaabtameen inuu hadalka Ilaah kula hadli karo kana soo horjeeda xumaanta ku hareersan isaga.
“Ha ka baqin,” ayuu Ilaah ku caymiyey Yeremyaah. “Tag meel walba oo aan kuu diro. Dheh waxwalba oo aan kuu sheego. Aniga waan kula jiraa inaan kaa samato bixiyo.” Deedna Ilaah baa wax gaar ah u sameeyey. Ilaah wuxuu taabtay carrabkii Yeremyaah.
Ilaah wuxuu siiyey Yeremyaah, tabar, dhiirrigelin iyo xigmadba. Wuxuu kor ugu hadlay si geesinimo leh, oo xusuusiyey dadkii inuu Ilaah jecel yahay oo uu doonayo inuu caawiyo iyaga. Laakiin cidna ma ysan dhegeysan. Xita ilaa boqorkii.
Xitaa wadaaddadii baa ka cadhooday oo ku yidhi ka aamus waxyaalaha ku saabsan Ilaah. Waxaa kale oo jira nebiyo been ah oo dadak au sheegi jiray inuu wax aan jirin dadka u sheegayo oo runt ka fog.
Yeremyaah dadkii wuxuu xusuusiyey inay ahaato, waxyaale ku saabsan boqolaal samadood ka hor, boqrtooyadii woqooyiga ee Israa’iil ka guuray Ilaah. Cadowyadoodii, Suuriyiintii, inay qabsadeen iyaga oo u ka kaxaysteen dhamantood Israaa’iiliyiintii meel fog.
Hadda dadkii Yuhuudda, boqrtooyadii koonfureed, Ilaah wuu ka guuray. Ciidamadii cadowgooda baa ku soo dhaqaaqay! Ilaah ma uu u ogaal doonaa in la qabsado oo iyaga sidii qaxooti ahaan ahaadaan iyagana?

Dadku waxay aaminsanaayeen sanamyada. Sanamyada ma badbaadin karaan iyaga? Maya! Ilaah keliya ayaa badbaadin kara. Dadkii aad bay ugu cadhoodeen Yeremyaah, waxay u sameeyeen shirqool lagu dilo isaga. Laakiin Ilaah baa difaacay addoonkiisii.

Ugu dambayntii, Ilaah baa waxyidhi inay waajib tahay oo uu ka naxay YEremyaah. "Dadkan waxba ha u baryin. Anigu ma dhegeysanayo iyaga markii ay ii soo qayliyaan inaan caawiyo"
Yeremyaah wuxuu uga digay boqrkii in lagaga adkaan doono dagaalka lagula jiro ciidanka Baabiloon. Boqrkii wuu cadhooday oo xabsi buu ku tuuray Yeremyaah. Xitaaa xabsig dhexdiisa Yeremyaah wuxuu sii wady wacdintiisii iyo rumaysadka Ilaah.

Ka dib markii uu ka soo baxay xabsiga Yeremyaah markale ayuu wacdiyey boqorkii iyo dadkiisii inay waajib tahay u soo noqoshada Ilaah iyo inay rumeystaan. Wakhtigan, boqorkii hoos buu u dhaadhiciyey oo wuxuu sii geliyey dhiiqada gunteeda ee alambaqada.
Laakiin Ilaah baa ka dhex shaqeeyey qablbiga boqorka. Si qarsoon buu ugu tagay YEremyaah oo weyddiiyey isaga waxa uu Ilaah ka doonayo boqorka inuu sameeyo. "Tag qafaalka, oo Ilaah wuxuu leeyahay waad noolaan doontaa." Sidaa bay jawaabtu ahayd.
Ciidankii Baabiloon way qabsadeen Yerusaalem iyo Yuhuudiya oo idil. Way dumiyeen derbiyadii iyo dhismooyinkii oo idil, way gubeen waxwalba. Ilaah wuxuu yidhi dadkiisa waxay qafaalnaan doonaa oo la haysan doonaa toddobaatan sanadood, oo Isagaa dib ugu soo celin doono dhulkii ballanta. (*Yeremyaah)*

## Yexesqeel: Ninkii Aragtiyada

Wakhti aad u sii horreeyey, Ciidan awood leh baa soo weeraray Yuhuuda, dadkii Ilaah oo badan baa maxbuus ahaan loo kaxaystay. Meel aad uga fog waddankoodii, Yuhuudan waxay ku noolaayeen meel wabiga oo ay joogeen wabi keebaar. Waxaa iyaga ka mid wuxuu ahaa adeege Ilaah, Nabi exesqeel.
Maalin baa, Ilaah wuxuu siiyey Yexesqeel aragti. Ammaanta Ilaah baa ugu muuqatay sidii wax u eg afar xayawaan. Midwalba afar waji buu lahaa iyo afar baal. Xaggooda sare way qurux badnayd widhwidhaysa, waxaa la buuxay iftiin u eg dhuxul caddaatay falaaraheeda qaanso roobeed oo kale ah. Markii uu Yexesqeel waxaa arkay, wuxuu u dhacay wajigiisa. Ilaah baa la hadalay. “Waxaan kuu dirayaa reer binu Israa’iil oo ah dad caasiyiin ah oo igu caasiyoobay.” Gacan baa u soo muuqatay, oo waxaa ku jira qorniin duuduuban.n “cun qorniinkan duuduuban” Ilaah baa sidaa yidhi, “Tag waxaad la hadashaa guriga reer binu Israa’iil.” Muxuu yahay amarkan oo kaler! Laakiinse Yexesqeel wuu yeelay, wuu cunay qorniinkii oo wuu tagay.

Ruuxii Ilaah baa dhftay Yexesqeel oo u qaaday isaga degta kale ee degtii kale ee maxaabiistii Yuhuudda ku noolaayeen ee webigii Kebaar. Toddobo maalmood buu fadhiyey meeshii ay iyagu fadhiyeen. Wuuna ka yaabay wuxuu ku arkay meeshaa. Deedana Ilaah gaarhaye (Waardiye) ayuu ka dhigay Yexesqeel.
Yexesqeel wax badan oo la yaab leh ayuu ku sameeyey Ereygii Ilaah oo masaxy dadkii. Wuxuu xardhay sawirka Yerusaalem jab yaroo sayn dhooba ah. malaha dadkii garbihiisa ayay dul taagnaayeen markii uu sawirayay ciidamadii xoogga badbnaa oo ku hareereysan Ilaaha qudduuska magaaladiisii oo u ahaan doonto goor dhow in la burburiyo.

Israa'iil, boqrtooyadii woqooyi, waxay Ilaah caasi ku ahaayeen muddo gaaraysa 390 sanadood, oo  Yuhuudana, boqortooyadii koonfureed muddo gaaraysa 40 sanadood iyana. Sababtaas bayn ahayd sababtii loo burburiyey oo u ahaatay inay Yuhuda degdegto dhiciddeeda oo dunto. Ilaah wuxuu u sheegay Yexesqeel inuu dhigo dhinaciisa bidixda 390 maalmood, deedn dhiniciisa midigtana dhigo 40, inuu soo xusuusiyo dadka sanadahoodii dembiga.
Laga yaabee inay dadkii ay bilaabeen inay fikiraan inuu Yexesqeel yahay nin qalaad oo la yaab leh. Wuxuu sameeyey waxwalba oo uuIlaah ku yidhi inuu sameeyo. Maalin buu timaha xiirtasy, oo saddex qeybood qayb wuu gubay. Middani waxay tusaysayin saddex qaybood qayb ka mid ah dadkii Yerusaalem la dhiman doonaan cudurro iyo macluul markii ay soo weeraraan ciidanka Baabiloon caasimadda.
Yexesqeel wuxuu qaaday qaybtii saddexaad ee timihiisii oo ku jaray seef, tani waxay tusaysaa in saddex meelood meel dadka ku dhiman doonaan seefta cadowga. Saddex meeloodka ugu dambeeyan, Yexesqeel inay la carari doonto dabayl. Laakiin wuxuu ku toli doonaa inyaroo tiimhiisii ah dacalka marada si Ilaah calaamo ugu noqoto.inuu ku dhowro Dadkiisa nabdoonaa iyo inuu ku soo celiyo dhulkii ballanta.

Nebigii geesiga ahaa maxaabiistii Yuhuudda wuxuu u sheegay iany arrintu sii xumaan doonto oo ay ka sii dari doonto, aysan ahayna kana wanaagsanayn sida ay rajaynayaan, dadkii way ku cadhoodeen Yexesqeel, laakiin waxuu iska sii watay inuu ku hadlo Ereygii Ilaah. Macbudkii dhexdiisa, Yexesqeel, Ilaah wuxuu ku tusay waxyaalo faalasho, bahalo aan daahir ahayn, iyo sanamyo. Waxyaalahan mayna u ahaateen weligeed Macbudka Ilaah.

Hoggaamiyayayashii baa ku caabudi jiray waxyaalahan intii ay ahayd inay caabudaan Ilaah. Weliba Ilaah Yexesqeyaal wuxuu tusay ammaantiisa inay ka tagtay Macbudka oo la burburiyey. Markii ii minaamkan dhamaaday, Yexesqeel wuxuu u sheegay Yuhuuddii waxyaalaha waxay ahaayeen.
Wax walboo Ilahay sii sheegay run bay noqdeen. Yerusalem waa la burburiyey. Dad badan baa halaagamay. Markii ay Yuhuudda kuwii maxaabiis ahaanta loogu kaxaystay Baabiloon ay maqleen, waxay la yaabeen haddii Ilaah iska daaya dadkiisi weligood.

Laakiin Ilaah wuxuu siiyey farriin kale Nebigiisii. Wuxuu Yexesqeel ku hagay dooxo ay lafo bani'aadan ka buuxaan. Wiilka Aadanahow, lafahan may nool yihiin? Ilaah baa Yexesqeel weyddiiyey. "SAYIDOW Ilaahow, waa ogtahay," Yexesqeel baa sidaa ku jaaabay. Waa sida ay tahay lao engagay dib dambe uma noolaan karaan.
Sayidka wuxuu leeyahay, "Wax sii sheegidda lafahan, oo leh, lafaha ingegeanow, maqla ereyga Rabbiga! Waad noolaan doontaa." Markii uu addeecay, Yexesqeel wuxuu maqla cod sawaxan ah. Maxaad u malaynaysaa waxa sababay taa iyada ah? Isla intii uu nebigu eegayay tacajabkaa, jidhkii baa isku yimid oo lafahii baa mid ba lafteedii kale doonatay. Deedna, jidhkoodii baa soo noqday. Oo diirkii haragooda ayaa dul saarmay iyagii, laakiin neefi maysan ku jirin iyaga.

Sayidku wuxuu yidhi, "Wax sii sheegidda, wiilka aadanhow waxaan ku leeyahay "La imow afarta neefood oo neefso. Ku neefso ama afuuf halkan yio halkaas inay nooladaan iyagu." Markii uu Yexesqeel sidaa sameeyey, neeftii baa soo gashay iyaga. Weyna noolaadeen, oo ku istaageen cagahoodii. Ciidan weyn baa iminka buux dhaafiyey dooxadii. Ilaahay wuu ogaa inay Yuhuudda

Baabiloon ay rajo dhigeen markii Yerusaalem dhacday. Isagu wuxuu farriin kula hadlay Yexesqeel muujintiisii. “Lafahan waxaa weeye gurigii reer binu Israa’iil,” Ilaah baa sidaa yidhi. “Ruuxaygaan galin doonaa, oo waxaan ku gaynayaa dhulkaad lahayd.” War maxay tahay farriintan weyn ee rajada leh ee ka timid Ilaah! Ballantii Ilaah ee YExesqeel so martay waxay rumowday markii dambe ee Yuhuudda ku soo noqdeen dhulkoodii. Waxay garteen inuu Ilaah ku soo celiyey guryahoodii. Ereyga Ilaah weligii waa run. (*Yexesqeel*)

## Socdaaladii Layaabka Lahaa Ee Bawlos

Bawlos iyo Silas, Addoomada Ciise, waa la xabisay. Maya, Wax khalad ah ma aysan samaynin – waxay jinni ka sareen qof dumar ah. Waxay tuseen dadkii sanam caabudayaal ah oo ku noolaa Filibos xoogga Ilaaha runta ah iyo Wiilkiisa Ciise. Sabataa aawadeed baa loo xabisay, la uleeyey oo qol lagu xidhay.
Laga yaabee inaad ka filayso Bawlos iyo Silas inay cadhoodaan oo kharaaraadaan. Laakiin sidaa maysan ahayn. Sida runta ah, saqdii dhexe ee habeenimo ayay la soo fadhiisteen qaadista qasiidooyin Ilaah amaan ah! Maxaabiistii kale oo idil iyo waardiyaashii jaylka way maqlayeen iyaga.

Durbadiiba, heesihii baa istagay. Ilaah wuxuu u soo diray dhulgariir gilgila xabsigii. Albaabadii oo idil way furmee. Silsiladihii ku xidhnaa qof walba way ka furmeen.
Hayaay, hayaay! Xabsi ilaaliyihii wuxuu garanayay in maxaabiista oo idil ay baxsanaayaan dhibna kai man karo. Xitaa haddii hal maxbuus baxsado, xabsi ilaaliyahu ciqaab dileed buu mutaysanayaa. Waxaa ka sii darnayd, markii askarigii xabis ilaaliyaha ahaa uu la soo baxay seeftiisii si uu isku dilo oo sheekada meeshaa ku idlaato.

Laakiin bawlos baa ku qayliyey isagoo leh, "Waxba ha isyelin, maxaa wacay, kulligayga halkaana wada joognaa." Xabsi-hayihii markii uu arkay waxa dhacay, wuxuu yidhi, "Maxaa igu waajiba ah inaan yeelo inaan ku badbaado?" Oo waxay ydhaahdeen,"Rumeyso Rabbi Ciise, waadna badbaadi doonta, adiga iyo dadka gurigaagaba." Farxad badan, Xabsihayihii wuu rumeystay.
Subaxdii dambana waa la daayay, Bawlos iyo Silas waxay u dhoofeen magaalooyin badan oo kal duwan, dadkan u sheegayay waxyaabaha ku saabsan Ciise. Dadka qar baa rumeystay, qarna waxay isku dayayeen inay waxyeeleyaan iyaga. Laakiin Ilaah baaa la jiray adeegayaashisa. Habeen baa waxaa dhacay, Bawlos inuu saacado badan wacdinayay. Oo wiil yar oo meesha daaqadda ku aadan fahdiyey baa intuu lulmooday hurdo la tagtay. Bal miyaad qiyaasi kartaa kolkaa dabadeed wixii dhacay.

Cidwalbana way ogaatay wiilkii yaraa inuu dhintay. Laakiin Bawlos ayaa hoos u dhaadhacay intuu laabta saray isku duubay oo yidhi, "Ha buuqina; maxaa yeelay, naftii waa ku jirtaa." Waxay ku soo celiyeen wiilkii dhalinyarada haa isaga oo nool, oo aad bay u faraxeen. Bawlos iyo Silas safari badan bay galeen oo waxay u socdaaleen Yurub. Mid ka mid ah safaradii ugu weynaa ee uu galo Bawlos waxa dhacday markii uu doonida saarnaa. Ma aysan ahayn sida maraakiibta casriga ah oo kale, laakiinse waxay ahayd doonyaha shiraaca, oo si fudud ay dabaylaha uga weecn karaan khadka ay ku socoto. Bawlos wuxuu saarnaa dooni sababtoo ah isagumr kale ayaa la xidhay. Iminka sae waa inuu hor tagaa boqrka Rooma hortiisa. Caasimadii dunida waagaas. Dabayll aad u weyn baa joojisay socodkii doontii. Waxayna u ekeyd in hortooda ay jirto duufaan. Wuxuu ahaa safara dhib badan oo soo food saaray BAwlos iyo maxaabiistii kale ee weheshay iyo weliba naakhuudyaaashii. "Nimanyahow, waxay ila tahay dhoofkanu lahaan doono waxyeelo

iyo khasaare badan.” Bawlos baa si ku digay. Naakhuudihii ma dhegeysan. Oo xaggoo badweynta bay u sii baxeen. Markii dabayshii weyneyd ee duugaanta qabsaday iyaga, waxah xargo waxtara ku wareejiyeen doonidii iyagoo rajaynayay inay wax u tarayso inay joojinayso. Haddii doonida kala jabot, biyaha ayaa wada harqinaya waxa oo idil. Doonidii way liiclicday oo naakhuudihii ayaa amar ku bixiyey in la fududeeyo. Maalintii saddexaad, waxay gacmahooda ku tureen allaabtii doonida. Lagayaabee inay taasi caawiso. Xilli habeenimo ah, ayaa malaa’ig hor istaatay Bawlos oo u sheegtay isaga arrimuhu inay si wanaagsan u shaqaynayaan oo waxwalba fiican yihiin. Intii kalel way dhiirigelisay markii uu Bawlos yidhi, “Nimanyahow kalsoonaada, waayo, anigu Ilaah waan rumeysnahay inay noqon doonto sidii la ii sheegay. Habase yeeshee waa inaynu ka dhacno gasiiradd.” Maalmo yar dabadeed, doonidii waxay ku burburtay meel u dhow jasiiradda Malta. Waxaa ku dhacday meel dhagaxyo oo laba qaybood bay u kala jabtay. Qaarna waxay saarnaayeen doonta, qaarna waxy dhinicii jajabay ee doonta.
Malta, Ilaah wuxuu ku tisay awooddiisa. Intii ay xaabada dabka soo gurayeen, jilbis baa qaniinay Bawlos. Dadkii waxay isyidhaahdeen wuu dhimanayaa. Laakiinse jilbiskii qaniinay BAwlos waxba unma dhimin. Deedna dadkii waxay isyidhaahdeen Bawlos waaba ilaah. Dad badan oo bukay baa u yimid, oo Ilaah baa boksiiyey iyagii ka dib markii uu Bawlos ilaah u baryay iyaga.

Ugu dambayntii, Bawlos wuxuu yimid Rooma. Waxayna qaadatay maxkamadiisii in la dhageysto kiiskiisa laba sanadood ku dhan. Kolkii lagu jiray wakhtigaa, Bawlos wuxuu kireystay qol uu ku qaabilo dadka soo booqda isaga. Ma garan kartaa Bawlos wuxuu kala hadli jiray dadka soo booqda? Boqortooyada Ilaah! Rabbi Ciise

Masiix! Bawlos wuxuu ahaa addoon Ilaah oo jooga Rooma, sida ay wada ahaayeen dhamaan dadkii kale eek u weheliyey safarkiisa. “Dagaal wanaagsan baan ku dagalaamay, waxaan dhameeyey tartankii, waxaan ilaaliyey rumeysadkii,” Bawlos ayaa ka soo qoray sidaa Rooma. Kitaabka Quduuska inooma sheego halkii ay ku dambaysay noloshiisii, laakiin waxyaalo uu qoray boqorkii Rooma ayay ku caddahay inuu boqor nero amar ku bixiyey in qoorta laga jaro Bawlosna sidaa ayuu ku dhintay intii uu noolaana – wuxuu ahaa addoon rumaysadka Ilaah leh, dadkana sheegana waxyaabaha ku saabsan Ciise Masiix.(*Falimaha Rasuullada 16,27,28)*

## Boqoraddii Quruxda Badnayd Ee Esteer

Waxaa jiray gabadh qurux badan oo la odhan jiray Esteer. Markii aabbaheedd iyo hooyadayba ay dhinteen, Esteer ina adeerkeed baa soo koriyey. Esteer aad by u xusheem jirtay ina adeerkeed Mordekay oo way addeeci jirtay sida gabadh wanaagsan. Esteer axay ku noolaan jirtay Faaris (Bershiya). Laaakiin, Esteer uma aysan dhalanin Faarisi, waxay ahayd Yuhuudad. Oo faraceedii baa yimid Faaris iyagoo maxaabiis dagaal ahaan ah. Waagii maalmihii Esteer, Yuhuud badan baa ku noolayd Faaris oo hadda loo yaqaano Iran. Boqorkii Faaris ayaa u ameeyey diyaafad xaflad weyn ah Amiiadii dunida ka kala yimid. Ragii waxbay ku cuneen meel ka fog meeshii dumarka oo ahayd barxaddii beertii boqorad Washti. Boqrkii sarkhaansanaa ayaa amar ku bixiyey inay Boqorad Washti soo xirato taajkii boqornimada si quruxdeeda loo arko. Boqorad Washti wey diiday inay timaaddo. Dumarka in la tuso awgeed inay xurmaayeen ragga qaba, boqorkii wuxuu soo saaray sharci ka xayuubinaya taajka boqortooyada Washti. Mana sii ahaan doonto boqorad.

Baaritaan baana lagu sameeyey boqorad cusub in la helo. Dumarkii quruxd badnaa ee ku noolaa wadanka ay ka taliso boqortooyada oo idil, boqorkii wxuuu xushay Esteer inay noqoto xaaskiisa. Wuxuuna madaxeeda saaray taajka boqortooyada. Esteer ma aysan u sheegin inay tahay Yuhuudad sababta oo ah ina adeerkeed ayaa u sheegay inaysan sidaa odhan. Ina adeer Morkeday inta badan wuxuu fariisan jiray albaabka weyn ee laga qasriga boqrtooyada si uu dhagadhageeyo wararka ku saabsan Esteer. Maalin buu dusha ka dhagadhageeyey oo maqlay laba nin oo addoomada boqorka ka mid ah oo qorshaynaya inay dilaan boqorka. Mordekay digniin buu diray lagu badbaadinayo nolosha boqorka. Shaqaalaihii addoonta ahaa waa la daldalay, oo magacii Mordekay waxaa lagu qoray buuggii boqortooyada.

Ninka ku xiga boqorka waxa uu nin taajir ah oo la odhan jiray Haamaan. Qof walbana way u foorarsan jirtay oo u sujuudi jirtay Haamaan markii meeshaa albaabak ah marayo. Cid walba – mid mooyee. Yuhuudda sidooda, Mordekay wxuuu caabudi jiray oo keliya Ilaah nool. Haamaan wuu necbaa Mordekay si aad ah oo wuxuu go'aansaday inuu dilo isaga iyo Yuhuuddda degan wadanka Beershiya dhamaantood. Sidee bay u xuntahay oo cabsi u leedahay! Xumaanfalihii Haamaan wuxuu ku khiyaanay boqorkii saxiixa sharci wakhtiyada gaar ah meelmari karo oo Yuhuudi walba oo ku hoos nool boqortooyada la dili doono.

Waa sharci aad u arxan daran. Yuhuuddii iyo Faarisiintiiba way murugoodeen. Laakiin xusuuso – Ilaah wuxuu heystaa boqorad Esteer. Oo Yuhuudiyad ah. Miyey ka qarin kartaa sirteeda boqorka? Ama, khatar bay galin kartaa nolosheeda si ay dadkeeda u badbaadiso?

Ilaah Esteer fikrad fahma leh (Xariifnimo) buu siiyey. Waxay soo ku wada casuuntay barxadeeda boqorkii iyo Haamaan. Halkaa boqorkii wuxuu ballan ku galay inuu yeelayo wax walba oo ay weyddiisato.. “Adiga iyo Haamaan kaalaya martiqaad aan idiin diyaarin doono berito,” Esteer ku jawaabtay. Dabadeed, iyadu way u sheegi doontaa boqorka waxa ay doonto. Ilaa iyo wakhtigaas intii laga gaarayay, Haamaan wuxuu diyaarinyay tiirweyn oo lagu daldalo Mordekay.
Habeenkaa boqrkii wuu seexan kari waayay. Akhrintii buugga taariikhda wakhtigaas ayaa lagu arkay Mordekay inaan weligiiba laga abaalmarin badbaadadii nolosha boqorka uu badbaadiyey isaga. Subaxdii xigtay boqrkii Haamaan buu weyddiiyey, “Ninka boqrku ku farxo inuu maamuso maxaa loo yeelaa?” Haamaan aad buu u farxay. Isagoo moodaya inuu boqrku isaga ula jeedo!
Haamaan wuxuu u yimid inuu weyddiisto boqorka fasax lagu daldalayo Modekay. Tiirkii daldalaadana waa u diyaar. Iminka taa baa la sugi karaabaa. Si farxadaysan, waxaa ka soo baxay go’aankiisii. “Ninkaa dharka boqorka xargaha lahaa ha loo soo labiso iyo taajka.”
“Ku fariisiya isaga faraska boqorka. Amarna sii Amiirada inay ninkaa la mariyo magaalada oo idil si loo wada arko.” “Waxaasoo dhn aad sheegtay u samee Mordekay Yuhuudiga,” Ayuu boqorkii ku amray Haamaan. Sidee baad u malaynayaa inuu dareemayo Haamaan intuu isagu wado Mordekay oo maamuusan magaalada dhexdeeda? Wuu sii nacay in ka badan nacaynkii hore ee uu u qabay. “Inyar iska sug,” Haamaan laga yaabee inuu ku fikirayay. “ Mar dhowba inuu la dhiman doono Yuhuudda kale oo idil.”

Maalintii maalintaa ka dambaysay, Haamaan iyo boqrkii waxay yimaadeen barxadii boqrodda Esteer. “Muxuu yahay codsigaaga?” boqrkii baa weyddiiyey. Mana uusan ilaabin ballantisii. Haamaan

baa farta lagu fiiqay, Boqoraddii Esteer waxay u sheegtay waxwalba oo ku saabsanaa xumaantii sharka ee uu Haamaan qorsheeyey. “Daldala isaga!” ayuu boqorkii yidhi. Dabadeed boqorkii wuxuu meel mariyey sharci kale oo u ogalaanayo Yuhuudda inay iyaga qudhooda isdifaacaan. Iyagu waa la badbaadiyey! Mordekay wuxuu noqday ninka labaad ee ku xiga boqorka oo wey wada farxeen Yuhuuddii oo dhan oo hadiyado ayay isu geeyeen midb midka kale. Xitaa maantadan, Dadka Yuhuudda ah way xusuustaan sidii Ilaah ugu soo badbadiyay gabadhan quruxda badan ee Esteer darteed.
Danyeel iyo saddex saaxiibadii ahaa waxay ku noolaayeen Israa’iil. Maalin baa waxaa yimid boqor weyn waddankoodii oo dhamaan wuxuu u kaxaystgay dalkiisa dhalinyaradii caqliga lahayd oo idil. Boqrkaa wuxu8u lahaa magac dheer oo ahaa Nebikadnesar – wuxuuna ku nool waddan fog oo la yiraahdo Baabuloon. Nimankan dhalinyarada ah si fiican baa loola macaamilooday xagga Baabuloon. Boqrku wuxuu xushay dhalinyarada ugu firfircoon ee caqliga leh ee ka kala yimid dunida daafaheeda. Wuxuuna ku tababarabaray barashada luqaddda reer Baabuloon deedna si ay u noqdaan addoomadiisa ka caawiya hawlaha maamulka boqrtooyada.

Raaashinka la siiyo aad buu u fiicnaa. Dhalinyaradu waxay cuni jireen waxa uu boqorku cuno.Laakiinse Daanyeel iyo saaxiibadii ma aysan cuni jirin raashinkaa sababta oo ah waxay gaar u ahayd caabuddida ilaahyada beenbeenta ah. Daanyeel wuxuu nidar ku galay inuusan weligii samaynin wax ka gees ah Ilaahiisa.Ilaah Israa’iil wxuuu amar ku siiyey dadkiisa inaysan waxba ku darsan ilaayahda beenbeenta ah.
Daanyeel wuxuu weyddiistay qofka horjooga u ah tababarka inuu fasax u siiyo inuusan waxba ka cunin raashinka boqorka. Hadddii

uu boqrku ogaado, aad buu u caroonayaa. Laakiin Ilaah baa Daanayeel ugu roonaaday ninkan. Wuxuu ku raaaca inuu Daanyeel iyo saaxiibadii tijaabiyo. Toban cisho waa inay cunaan oo keliya khudaar oo cabaan biyo. Maalintii ugu dambaysay Daanyeel iyo saaxiibadii way ka aragti iyo caafimaad wanaagsanaadeen dhamaan dhalinyaradii kale e cuntada boqorka cuni jirtay. Dabadeena waxaa loo ogolaaday inay iska sii wataan cunidda khudaarta iyo cabidda biyaha.

Dhalinyaradii Ilaah bay amaaneen. Oo Ilaahna raalli buu ka noqday iyaga. Ilaah garasho iyo xirfado ayuu siiyey wixii ay baranayeen, oo Daanyeel wuxuu lahaa xigmad uu ku fahmo manaamyada iyo riyooyinkaba.

Ka fdib saddex sanadood oo ay ku jreen dugsigii (Iskuulkii) Babuloon, dhamaan dhalinyaradii oo idil waxaa la horgeeyey boqor Nebukadnesar. Wuxuu ka soo dhex saartay Daanyeel iyo saddexdii saaxiibadii ahayd oo noqday kuwa ugu fiican. Sida runta ah, boqrku waxaa u soo baxay in Daanyeel leeyahay xigmad dheeraad ah oo ka saraysa dhamaan caaqilada la taliyayaasha u ah boqortooyada.

Haben buu boqrku ku riyooday riyo xun. Wuxuu u yeertay saaxiriintii, xiddigiye iyo faalalowyada inay hortiisa yimaadaan. Boqorkiina wuxuu ku yidhi, “Riyaan ku riyoody, waxaanan la argagaxsanahay inaan ogaado waxa riyada micnaheeda yahay.” Nimankii waxay ugu jawaabeen, “Boqorow waligaab noolow! Bal riyadaada noo sheeg anagoo addoomadaada ah, oo annagana waxaan kuu caddeyn doonaa fasirkeeda.”

Boqorkii baa u jawaabay, “May! Waa inaad ii sheegtaan riyadii waxa ay ahayd iyo micnaheedaba. Haddaydaan ii caddeyn, waa la idin googooyn doonaa oo gurihiina waa la gubi doonaa! Laakiin haddii aad ii sheegtaan riyadii iyo micnaheeda waxa uu ahaa,” boqo wuu sii watay hadalkiisii, “Waxaan idin siin doonaa haddiyado iyo abaalgud iyo ciso weyn.” Runtii, midkoodna nimankaa ma aysan u

sheegi karayn boqorka riyadiisa. La taliyayaashii boqrka waxay waxay ku yidhaahdeeen boqorkii, “Dhulka ma joogo nin caddeyn karaa xaalkaaga. Ilaahyada mooyaane, kuwaasoo hoygoodu bani-aadan la jirin.” Boqrkii aad buu u cadhooday. “Wuxuuna amray in la baabi’iyo raggii Baabuloon e xigmada lahaa oo idil.”
Markii Sirkaalkii Daanyeel u yimid, wuxuu ku yidhi Aryook, Sirkaalka boqorkow, “

Muxuu boqrku u baabi’inyaa xigmadlayaasha oo idil?” deedna Aryook baa u sheegay Daanyeel waxwalboo dhacay. Daanyeel baa u tagay inuu arko boqorkii. In badan buuna weyddiistay inuu u sheegi karo boqorka rayada iyo micnaheedaba. Dabadeed Daanyeel gurigiisii buu aaday, oo wuxuu u sheegay waxwalba saxiibadii Shadrak, iyo Meeshak, iyo Cabeednegoow. Daanyeel ma uusan garanayn waxa ay tahay riyada iyo micnaheeda toona, laakiin qof yaqaana waxwalba . qofkaasina Ilaah buu ahaa, Daanyeel iyo saaxiibadii Ilaah bay baryeen. Daanyeel Ilaah wuxuu tusay oo u muujiyey riyadii iyo micnaheedaba. Daanyeel Ilaaha samada ayuu amaanay, Isagoo leh, “Aman waxaa leh magaca Ilaah weligiis iyo weligiis, Waayo Isagaa leh xigmad iyo xoogba.” Daanyeel wuxuu u galay boqrkii wuxuuna ku yidhi, “WAxaa jooga samada Ilaaha muujiya waxyaalaha qarsoon.” Wuxuuna u sheegay boqrkii wizxii uu ku riyooday iyo riyadii fasirkeediiba.

Markii uu maqlay boqor Nebudadnesar reiyadii iyo fasirkeedii, wajigiisii u dhacay oo u sujuuday Daanyeel hortiisa oo yidhi, “Sida runta ah Ilaahaagu waa Ilaaha ilaahyada iyo SAyidka boqorada, iyo mid muujiya waxyaalo qarsoon, maxaa yeelay, waxaad awooday inaad daaaha ka qaadid qarsoodigan!” Markaasaa boqorkii Daanyeel darajeeyey oo nin weyn ka dhigay., oo wuxuu siiyey haddiyado badan. Wuxuuna ka dhigay taliyaha madaxda u ah

gobolada Baabuloon oo idil, iyo madaxa ragga xigmadda leh oo idil. (*Daanyeel 1,2)*

## Daanyeel iyo Qarsoodigii Riyada

Boqor Nebukadnesar baa riyooday, oo riyadan in badan bay dhibtayn isaga. Awoodda Ilaah darteed, Daanyeel baa karay inuu sheego fasirka riyada. Wixii ugu horreeyey ee uu Daanyeel sameeyey waxay ahayd inuu u sharax ka bixiyo riyada sida ay ahayd. "WAxaad aragtay ekaan weyn, ekaanta xoogga weyn, Alla Boqorow. Ekaantu dhalaalkeeda aad buu u wanaagsanaa." "Ekantaasuna madaxeeda waxa uu ahaa dahab wanaagsan," Wuu sii waday Daanyeel. "Laabteeda iyo gacmaheeda waxay haayeen lacag"

"Caloosheeda iyo bowyaheeda waxay ahaayeen naxaas" "Lugaheeda wxay ahaayeen bir, cagaheeda qaar wuxuu agaa bir, qaarna dhoobo."

Ka dib markii loo sharxay ekaantii boqorka, Daanyel wuxuu u sheegay intii ka hadhsanayd riyadii. "Oo Ilaa waxaad aragtay dhagax aan gacmo lagu gooyn," Daanyeel baa sidaa u sheegay boqorka. "Ekaantii kaga dhacay cagihii birta iyo dhoobada, wayna kala burbureen." "Markaasaa wada burbureen oo noqdeen sdia buunshaha meelaha wax lagu tumo." Inyar buu aamusay Daanyeel. "Markaasaa dhagaxii ekaanta ku dhacay wuxuu noqday buur weyn oo dhulka oo idil buuxiyey." Boqorkii wuu yaabay. Taasi waxay ahayd wixii uu ku riyooday! Sidee buu Daanyeel ku gartay taa? Keliya sabato ah Ilaah baa u sheegay Daanyeel. Ka dibna wuxuu u sheegay boqor Nebukadnesar waxa ay tahay fasiraadda riyada. "Ilaaha samada ayaa ku siieyey adiga boqortooyadan, awooddan,

xoogan iyo amaantan,” Daanyeel ayaa sidaa u sheegay boqorka. “Adigu waxaad tahay madaxa dahabka”
Daanyeel wuxuu u sheegay boqorka boqortooyadiisa dahabka ah inay idlaan doonto. Qaybta lacagta ee ekaantana la micne tahay daciifnimada boqortooyada meesheedii gali doonto. Naxaastuna micnaheeda waxaa weeye boqortooyo kale. birtuna iyo dhoobada waxay u taagan yihiin afar boqortooyo.

## Boqrtooyadii Afaraad

Wixii ugu dambeeyey uu Daanyeel u sheego boqorka sidan bay ahayd. “Ilaaha samada ayaa dhisi doonaa boqortooyo aan weligeed la baabi’inayn.” Boqorkii wuxuu ictiraafay in Ilaah keliya siin karo Daanyeel xigmadda iyo fahamka riyadiisa. Nebukadnesar wuxuu ugu abaal guday Daanyeel hodantanimo oo isaga wuxuu ka dhigay ninka ugu muhiimsan boqortooyada. Boqortooyinkii 1,2, iyo tii 3 ba wey yimaadeen oo tageen. Boqortooyada Ilaah baa iman doonto ka dib boqortooyada 4aad. Masiix baa iman doonay oo u talinaya arlada. Oo dhakhsey u iman taasi! (*Daanyeel 2)*

## Nimankii Aan Leexan

Boqor Nebukadnesar wuxuu dhisay oo sameeyey ekaa dahab oo aad u weyn, tan madax ilaa cirib. Lagayaabee inuu boqorku ilaabay riyiadii Ilaah u sheegay isaga boqortooyadiisa dahabiga ah inaysan weligeed dhamaanayn. Mid ka mid ahaa addoomihii boqorka ayaa akhriyey ama naadieyey amarkii la siiyey. “—Waa inaad u sujuudaan oo caabuddaan ekaanta dahabka ah….. oo ku alla kii aan u sujuudin oo aan caabudin waxaa algu dhex tuuri doonaa foorno dab ah. ”Qofwalba wuu sameeyey wixii boqorka ku amaray – saddex nin mooyaane. Saddexdan nin cibraaniyiiin bay ahayeen.

Waxyna kala ahaayeen Shadrak, iyo Meeshak, iyo Cabeednegoow, saaxiibadii Daanyeel, saaxiibadii Daanyeel. Waxayse u ektahay kolkaa iyada ah inuusan meeshaa joogin Daanyel, waase la hubaa ghasddii uu joogi lahaa inuu diidi lahaa sanam inuu caabudo. Xigmadlayaashii boqorka aad bay uga hinaaseen Daanyeel iyo saaxibadii sababta oo ah boqorka ayaa jeclaa iyaga. Kolkaa bay waxay yidhaahdeen, "Waxaa jira kuwa yuhuud ah oo u dooratay inay axwaalkii gobolka Baabuloo u taliyaanwaana Shadrak, iyo Meeshak, iyo Cabeednegoow. Haddaba boqorow nimankaai dan kaama ay lahayn, iyagu uma adeegaan ilaahyadaada umana sujuudaan ekaanta dahabaka ah oo aad qotimisay." Markaasaa boqor Nebukadnesar intuu dhirfay oo aad u cadhooday. Wuxuuna u digay iyagii, "Haddaad u sujuudi weydaan isla saacadda waxaa la idinku dhex tuuri doonaa foornada dabka oo ololeysa. Kolkaas waa ayo ilaaha gacantayda idinka badbaadin doona."Boqrkii khalad weyn buu sameeyey. Wuxuu isku dhereriya oo uu ka horyimid Ilaaha nool. Saddexdan nine e cibraaniyiinta ah way ogaayeen inay ka soo horjeedo sharciga Ilaah in la caabudo ekaanta sanamkan. Meeshoodiibayna ku adkaysteen oo istaageen. Sababta oo ah waxay rumeysnaayeen Ilaah, oo ma aysan ka cabsaanyn boqorka. Saddexan nine e geesiyiinta ah jawaab bay u hayeen boqorka. Waxayna ku yidhaahdeen, "Ilaahayaga aan u adeegno waa awoodaa inuu naga samata bixin doonaa gacantaada, boqorow."Boqor Nebukadnesr aad buu u cadhooday! Wuxuuna amar ku bixiyey in dabka foornada aad loo sii qixiyo oo la kulayliyo kulkeeda ilaa todoba jeer in ka heerkulka caadiga ah. weli nimankii ma aysan jilba joogsan.

Boqrku wuxuu amray niman xoog badan oo ciidnkiisa ku jiray inay sidhxidhaan Sahdrak, iyo Meeshak, iyo Cabeednego oo ay ku dhex tuuraan foornada dabka ah nee ololeysa. Foornadana aad iyo aad bay u kululayd oo nimankii baa lagu dhex tuuray Shadrak, iyo Meeshak, iyo Cabeednegoow kulaylka dabku inuu dilo.

Boqorku wuu ka daawanayay meel fogaan badqab ah. Wuxuuna arkayay saddexdii nin oo lagu dhex tuurayo foornad ololka dabka ka baxayay. Laakiinse taasi keliya ma aysan ahayn wuxuu arkay.

Boqor Nebukadnesar wuu yaabay! "Miyaynaan saddexda nin ee xidhxidhan dabka ku dhex ridin?" wuxuu weyddiiyey caawiyayaashiisii. Markasay u jawabeen oo ku yidhaahdeen "Haa" "Bal eeg waxaan arkaa afar nin oo furan, oo dabka ku dhex socda, ee aan waxyeelo gaarin, oo midka afaraad soojedkiisa wxuuu u eg yahay mid ka mid ah Wiilasha Ilaahyada!" Wuxuu ag yimid foornadii dabka ahayd oo ololeysa afkeedii, , oo intuu hadlay buu yidhi. "Shadrak, iyo Meeshak, iyo Cabeednegoow, Ilaaha ugu sareeya addoomadiisow, soo baxa oo hakan kaalaya!" deedna Shadrak, iyo Meeshak, iyo Cabeednegoow, baa ka soobaxay foornadii dabaka ahayd ee ololeysay. Cidwalba oo meeshii joogtay baa ku soo ururay hareerahoodii si ay bal u eegaan saddex nin e Cibraaniyiinta. Markii uu hubsaday waxa dhacay, boqor Nebukadnesar waxuu sameeyey inyaroo caqlicali ah. Wuu tukuday oo yidhi, "Mahad waxaa leh Ilaaha Shadrak, iyo Meeshak, iyo Cabeednegoow, oo u soo diray malaaigtiisa , oo badbaadiyeye addoomadiisa isaga isku halleeyey Isaga." (*Daanyeel 3)*

## Daanyeel iyo Bohoshii Libaaxyada

Dariyus wuxuu ahaa boqorka cusub ee Baabuloo. Wuu caqli badnaa. Wuxuu ka soo dhex saartay boqol iyo labaatanka ugu fiicnayd dadka boqortooyadiisii inay caawiyaan xukunka. Dabadeedna waxa uu ka sii dhex xushawy saddex u sii xil saaran. Daanyeel wuxuu ka mid ahaa saddexdaa nin midkood.

Boqor Dariyus aad buu u ixtiraami jiray Daanyeel, wuxuuna ku fikirayay inuu isaga ka dhigo ka ugu sareeya xukuumadda boqortooyada. Hoggaamiyayaashii kale way ka hinaaseen. Waxayna qorsheeyeen inay u yeelaan khaladaadyo Daanyeel si ay ugu helaan Daanyeel dhibaatooyin cilado ka soo gaara xagga boqorka. Micno ma samaynayso siday isugu dayeen, sarakiishan wayeen sabab iyo xumaan toona ku saabsan Daanyeel. Daanyeel wuu ku saxnasanaa wax walba uu u sameeyo boqorka. Weliba, wuu taxadar iyo caqli badnaa, oo marwalba wuxuu samayn jiray waxa ugu wanaagsan ee uu karo. Saraakiishii hinaasanayd waxay garanayn un keliya inay jirto waddo lagu gacangalin karo Daanyeel. Waxay kale oo garanayeen inaysan jirin dunidan dusheeda wax ka joojin kara isaga caabudiddda Ilaaha Israa'iil.

Cadowyadii Daanyeel waxaa u soo baxay fikirkoodii qorshe. Waxay u sameeyeen sharci cusub boqorka inuu saxiixo. Sharcigaa wuxuu odhanayaa cidwalba waa inay baryo wax ku weyddiistaa boqor Dariyus keliya. Ku kii kale ee addeeci waayo waa in lagu tuuraa bohosha libaaxyada.

## AMARKA QARAARKA BOQORKA

Boqor Dariyus wuu saxiixay sharcigii cusbaa. Sharcigii cusbaa ku samaynin isbedel Daanyel. Wuxuuna samaynayay wixii uu marwalba samayn jiray un. Wuxuu ku jilba joogsan jiray daaqadda furan ee qolkisa maalin walba saddex jeer, oo baryi jiray Ilaaha samada. Saraakiishii hinaasanayd waxay ku ordeen boqorka si ay ugu sheegaan. Boqor Dariyus doorasho ma uusan lahayn laakiinninuu Daanyeel xidho mooyaane. Sharciga waa in la yeelaa. Daanyeel waa inuu dhintaa. Boqorkii way ku adkaatay, laakiinse ma jirin waddo kale oo u banaanayd oo lagu bedeli karo shrciga.

Daanyeel waxaa lagu xukumay xukunka ah in lagu rido oo uu ku dhinto bohoshii libaaxyada. Intii ka horreysay markii Daanyeel lagu tuuri lahaa bohoshii libaaxyada baahnaa, boqor Dariyus baa la hadlay oo ku yidi isaga, "Ilaahaaga aad had iyo goorba u adeegto ayaa ku samata bixin doona!"
Boqorkii habeenkaa ma uusan seexan. Aroortii hore dambee ee xigtay, ayuu ku soo cararay bohoshii libaaxyada  Boqr Driyus wuxuu ku soo qayliyay, "Daanyeelow, Ilaaha nool midiidinkiisow, Ilaahaga aad had iyo goor u adeegto ma awoodi karaa inuu libaaxyada kaa samata bixiyo?" klaga yaabe inuusan ka filynaini jawaab! Daanyeel baa ka soo dhawaaqay godkii, "Alla boqorow, Ilaahayga ayaa ii soo diray malaa'igtiisa, oo waxay xidhay libaaxyada afkoodii, oo waxba ma ay i"yeelin! Oo weliba, xagaagana boqorow waxba kuma aan yeelin." Boqor Dariyus aad iyo aad buu u farxay! Wuxuuna amr ku bixiyey in dibadda looga soo saaro godka.Boqorku wuu ogaa in Ilaah soo samata bixiyey Daanyeel oo Daanyeel cadowyadiisa yihiin cadowga Ilaah. Amarna wuxuu ku bixiyey dhamaan kuwii khiyaamay ee saxiixay sharcigii

xumaa in lagu wada tuuro godka libaaxyad dhamaantood. Boqor Dariyus wuxuu doonay inay dunida ogaato in Ilaaha samada uu difaacay addoonkiisa daacadda u ahaa, Daanyeel. Boqrkii wuxuu qoray warqad uu ku amrayo qofwalba inuu caabudo Ilaaha nool. Oo boqorkii wuxuu dib u soo ceshaday Daanyeel oo xishmo iyo hoggaamin isugu daray. (*Daanyeel 6*)

## Darbigii Weynaa ee Nexemyaah

Boqortooyadii Beershiya, waxay ahayd dowlad awood badan, oo adduunka xukunta. Oo Boqor Artaxshast ayaa xukumi jiryay Bershiya. Taana waxay u ahayd isaga inuu yahay xaakin sare. Mid ka mid kuwa caawiya boqorka waxaa ka mid ah nin Yuhuudi ah oo la yirahdo Nxemiyaah. Shaqadiisana waxay ahayd inuu ka dhadhamiyo cuntada boqorka si aan loo sumaynin. Maalin baa, Nexemyaah jor yimid boqorkii hortiisa isagoo aad wajigiisa u murugeysan yahay. Boqorkii baa damcay inuu ogaado wax ka khaldan. “Boqorow weligaaba noolow,” ayuu Nexemyah yidhi. “Bal maxaa wajigaygu u murugeysan waayay, iyadoo meesha ah magaaalada awowyaashay xabaalahoodu ahaayeen ay baaba’ tahay oo idaheeda dab lagu gubay.” Nexemyaah wuxuu ka hadlayaa Yerusaalem, oo ay dagaalo burburiyeen sanado badan ka hor.

Boqor Artaxshasta ayaa weyddiiyey, “Maxay tahay waxaad jeceshay?” “Aan aado Yerusaalem si aan dib ugu dhiso iyada,” Ayuu Nexmyah ka codsaday. Boqorkiina wuu ka yeelay si naxariisi kujirto. Oo weliba wuxuu siiyey warqad dowladeed oo isaga ka difaacaysa dhib walba oo uu kala kulmo sodcalkiisa.

Boqorku in bandanna wuu ku sii caawiyey. Wuxuu siiyey Nexemyaah warqad ku socota Aasaaf, kan dhowr dhirta boqorka, si uu u siiyo alwaax oo ahayd sida uu Nexemyaah weyddiistay inuu ku dhiso derbiyada magaalada. Markii Nexemyaah yimid Yerusaalem,

wuxuu isug yeedhay saraakiishii oo ku yidhi, “ Inay dhibaato jirto. Magaaladii inay baaba’day oo irdaheedii gubteen. Aannu bilowno inaan dib u dhisno.” Wuxuu u sheegay inuu boqor Artaxshasta u soo ogolaaday oo ah qofka ugu muhiimsan dadka oo idil, Ilaah inuu dhankooda la jiro. Rumaysadka Nexemyaah oo xamaasad geliyey dadkii loo ikmaday. Way ku raaceen, iyagoo leh “AAnnu dib u dhisno.” Nexemyaah wuxuu u sheegay qoys walba inay qayb ka mid ah derbiga ay dayac tiraan. Intii ay shaqada socotay, Sanballad baa aad u cadhooday. Isaga iyo saaxiibadii way ku jeesjeeseen Yuhuuddii. Toobiyah baa yidhi, “Waxa ay dhisayaan oo dhan xataa haddii dawaco fuusho way kala burburayaan.” Nexemyaah uma jawaabin. Taa bedelkeeda, Ilaah buu ka baryay inuu la xisaabtamo iyaga. Markii ay jeesjeeskoodii afxumada lahaa aysan saamayn ku yeelan weyday, waxay qorsheeyeen iyagoo midaysan ku dagaamaan wax ka gees ah Yerusalem, oo ay abuuranto rabsahdo badan inay ka sameeyaan. Mar labaad, NexemyaahIlaah buu ka baryay caawimaad. Oo weliba gaar buu ka ahaan jiray maalin iyo habeen ba si aysan waxba uga qaadan si layaab leh. Yuhuuddii aad bay u shaqeeyeen, wayna welweleen. Qaar baa ka cabsaday in cadowgoodu u iman doono inuu iyaga laayo inta ay howsha ku jiraan. Wali, Nexemyaah ma uusn joojin mashruuca dhismaha. Wuxuu ilaalo dul dhigay shaqaalihii oo xusuuiyey iyaga in Ilaahay dhinacood la jiro oo uu ka awood badan yahay cadowga!

Nehemiah tried to be a good example. King Artaxerxes had made him governor of Jerusalem with the right to demand food and money from the people, but he didn't do it. He just worked hard alongside the people as they rebuilt the wall. He used his own money to buy food. Nexemyaah wuxuu isku dayay inuu noqdo tusaale wacn oo ku dayasho leh. Boqor Araxshasta wxuuu ka dhigay guddoomiyaha Yeruusalem xaqna u leh inuu dadka ka qaado karo lacag iyo

raashinba. Si adag buuna ugala shaqeeyey dadkii inay dib u dhisaan derbiga. Wuxuu u isticmaalay lacagtiisa inuu raashin ugu iibiyo.

Ugu dambeyntii, dadkii way dhameeyeen derbigii, oo albaabadii baa lagu xidhayay iridda weyn. Markii Sanballat, Toobiyaah iyo Geshem kii Carabka ahaa maqleen inaysan jirin wax u dhaxeeya derbiyada, ayay qorsheeyeen inay dhib gaarsiiyaan Nexemyaah. Farriin bay u direen Nexemyaah inuu kula kulmo iyaga meel la odhan jiray Ono. Laakiin Nexemyaah wuu ogaa inay khiyaano la damacsan yihiin isaga inay magaalada kaga saarayaan si ay wax u gaarsiiyaan.. warqad buu u qoray oo uu ugu sheegayo iyaga inuusan ka soo baxayn shaqada oo uusan iyaga soo booqanaynin.
Ugu dambayntii derbigii wuu dhamaaday, oo Nexemyaah wuxuu dhigay Ilaaliyayaal.

Oo weliba isagu wuxuu dhigay sharci odhanaya idahaha inaan la furi karin ilaa iyo si cad waaga u soo baryo oo qoraxdu u soo muuqato mooyaane. Habeenkii oo idilna waa inay xidhnaadaan.
Iminka magaaladii waa meel nabdoon. Qurbajoog qaxooti Yuhuud ah ayaa dib ugu soo wada noqotay Yeruusaalem. Nexemyaah ayay u ahaatay inuu aad faraxsanaado inuu howshii Ilaah u dhiibay dhammaystiray. Oo uu ka soo gudbay wax ala wixii horjoogsady oo idil. Wuxuu joogay Yeruusaalem oo caawiyey dadkii, mar walbana wuxuu addeeci jiray Ilaah. (*Nexemyaah)*